

# **Haldoor**

**Taariikh-nololeedkii  
iyo Dhaxal-cilmiyeedkii  
Shariif Saalax Maxamed Cali  
(1936 – 2014)**



**Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida**  
*Somali Language and Literature Studies Series*

2

# **Haldoor**

**Taariikh-nololeedkii  
iyo Dhaxal-cilmiyeedkii  
Shariif Saalax Maxamed Cali  
(1936 – 2014)**

**Mustafa Cabdullaahi Fayruus  
&  
Cabdulqaadir Nuur Xuseen “Maax”**

Copyright © 2018 by AGA

Xuquuqda oo dhan way dhawran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabici karo, lama duubi karo, nuqullo lagama samayn karo, lama tarjumi karo, sina dib looguma soo saari karo la'aanta idan qoran oo laga helo faafiyaha (AGA).

*All rights reserved. No part of this book may be reproduced or translated or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical or other means, including photocopying and recording or by any information storage and retrieval system, without written permission from the publisher.*

Daabacaadda 1<sup>aad</sup> /First edition

Waxaa soo saaray

*Published by*

**Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA)**

Muqdisho/Mogadishu

Email: info@aga.so

Website: www.aga.so

Facebook: @AkadeemiyeGoboleedkaAfSoomaaliga

Tweeter: @somalacademy

Waxaa lagu daabacay Soomaaliya

Printed and bound in Somalia

ISBN: 978-0-9686867-3-7

## TUSMADA BUUGGA

Mahadcelin	09
Hordhac	11
Gogoldhig	15
<b>QAYBTA KOOWAAD</b>	<b>19 - 110</b>
<b>Taariikh-nololeedkii iyo Waxqabadkii Shariif Saalax</b>	
<b>CUTUBKA 1aad</b>	<b>20 - 27</b>
Dhalashadii iyo Bilowgii Nololsha Shariif Saalax	
1.1. Dhalashadiisii iyo Qoyskii uu ka Dhashay	20
1.2. Deegaankoodii	23
<b>CUTUBKA 2aad</b>	<b>28 - 35</b>
Waxbarashadiisii	
2.1. Bilowgii Waxbarashadiisa	28
2.2 Dugsiga iyo Madarasadda Xuddur	29
2.3 U soo Wareegiddiisii Muqdisho	34
<b>CUTUBKA 3aad</b>	<b>36 - 48</b>
Sooyaalkiisii Shaqooyinka & Xilalka	
3.1 Macallinnimo	36
3.2 Maamulka & Siyaasadda	37
3.3 Guddoomiyenimadii Guddigii Af-Soomaaliga	38
3.4 Xilal Maamul kale	43
3.5 Safiirnimo 13 Sanno ah	44
3.6 Isxilqaan Odaynimo	46

3.7 Soo Celinta Dawladnimadii Soomaaliya 47

**CUTUBKA 4aad 49 - 61**

Dadaalkiisii Cilmibaarista iyo Qoraalka

4.1. Arar 49

4.2. Baaxaddii iyo Qotodheeridii Aqoontiisa 50

4.3. Qoraallada Daabacan 55

**CUTUBKA 5aad 62 - 88**

Aragtidii iyo Fikradihii Shariif Saalax

5.1. Arar 62

5.2. Af-Soomaaliga iyo Horumarinta Adeegsigiisa 64

5.3. Cilmiyaynta Af-Soomaaliga 68

5.4. Af Soomaaliga Guud iyo Lahjadaha 71

5.5. Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta 82

5.6. Adeegsiga Afafka Waa loo Wada Baahan Yahay 83

5.7. Kaalinta laga Sugayo Hay'adaha Cilmibaarista 84

**CUTUBKA 6aad 88 - 110**

Geeri Culus iyo Baroordiiq

6.1. Geeri murugo leh 88

6.2. Erayo ay ku sagootiyeen waxgarad yaqaanay 91

6.3. Gablan: Maanso Baroordiiq ah 106

**QAYBTA LABAAD 111 - 181**

**Lifaaqyo: Qoraallo & Khudbado la Xiriira**

**Af-Soomaaliga**

1. Arar 112

## **XIRMADA 1aad**

<i>Lifaaq (1):</i> Munaasabadda Afartanguurada	
Qoridda Far-Soomaalida	114
<i>Lifaaq (2):</i> Horumarinta Af-Soomaaliga	
Tan Maanta ah iyo Timaaddada	123
1- Waxtarka Af Soomaaliga	123
2- Turjumaannadii hore dhibka ay ku qabeen afafka shisheeye	124
3- Horumarinta Lahjadaha	125
4- Language Varients	128
5- Cilmiyaynta Af-Soomaaliga	129

## **XIRMADA 2aad**

<i>Lifaaq (3)</i> Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta	131
1. Hordhac	131
2. Welwelka Maanta Jira	133
3- Dhaliilaha Qaar	134
4. Ereyo Micnahooda Mugdi ku Jiro	135
5. Xaggee Sixidda u Baahan?	136
5.1 Ereyo isku Micne ah (Synonymous)	138
5.2 Eray-Koobid	144
5.3 Ereybixin	144
5.4 Ereyada Juqraafiga iyo Magacyada Dadka	149
6- Talooyin	151
<i>Lifaaq (4)</i> Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga	153
1- Maay waa Lahjad ka mid ah Af-Soomaaliga	153

2- Arrimo kale	157
3- Circular Somali (Af isku Wareegsan)	159
4- Talo	161
<i>Lifaaq (5) Dhawr Fikradood oo ku Saabsan</i>	
Hawlaha Akadeemiyada AGA	162

### **XIRMADA 3<sup>aad</sup>**

<i>Lifaaq (6) Xarfaha Qoraalka Afka Maay</i>	165
A- Labo afeef iyo labo waano	165
B- Nasteexada	166
C- Ujeeddada ummadaha aan faraha lahayn ay u raadiyaan abjaddiyad ay afkooda ku qoraan?	167
D- Doodda ah waxaa la xaqiray Afka iyo Farta Maay	170
E- Qorista Afka	171
F. Alifbaada Maay	172
<i>Lifaaq (7) Qoridda Lahjadda Maay</i>	174
A- Hordhac	174
B- Isa Saamaynta Labada Lahjadood	176
C- Alifbaayaasha faruhu dhawaaqyada afafka ma wada koobi karaan	180

### **QAYBTA SADDEXAAD 183 – 204**

#### **Sawirro Xul ah oo Muujinaya Sooyaalka Taariikhda Shariif Saalax**

<b>Tixraac</b>	205
----------------	-----

## **i. Mahadcelin**

Idanka Eebbe iyo dadaal wadareed ayaa suurtagaliyay soo saarista buuggan magaciisu yahay '*Haldoor: Taariikh-nololeedkii iyo Dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali*'. Dadaalkaas intii gacan ka geysatay, si toos ah iyo si dadbanba, waxay naga mudan yihiin mahadcelin. Ugu horreyn, mahadcelin gobeed waxaa mudan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Md. Ismaaciil Cumar Geelle, hiilka uu had iyo jeer la garab taagan yahay guud ahaan daryeelka Af-Soomaaliga iyo xoojinta aqoonta, gaar ahaanna dadaalkii aabbonimo ee uu ugu hagarbaxay aasaasiddii Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA). Midhii dadaalkaas ka soo baxay ayuu ka mid yahay buuggan imminka dhashay.

Mahadcelin ballaaran waxaa naga mudan marwo Caasho Cabdi Diini, marwada uu ka geeriyooday Danjire Shariif Saalax, oo aan uga mahadcelinayno dadaal hagarla'aaneed oo ay mar walba ku dhiirrigelinaysay inuu qormo buuggani, kuna biirinaysay xogwaran qiime badan iyo fikrado kala duwan. Waxaan u mahadcelinaynaa Dr. Maxamed Daahir Afrax, Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, oo dadaal midkaas la

mid ah had iyo jeer la garab taagnaa hawsha buuggan, dadaalkaas oo isugu jiray talobixin, tusaalayn, tifaftir iyo weliba fikradda ah AGA inay qaaddo xilka soo saarista ama daabicidda iyo faafinta buuggan oo uu asagu ka dambeeyay.

Waxaa kale oo aan u mahadcelinaynaa akhyaarta kala ah: Barfasoor Cabdalla Mansuur oo gacan fiican ka gaystay tifaftirka buugga; Cabdicasiis Maxamed Xasan oo ku deeqay qoraallo waxtar leh; Xildhibaan Shariif Maxamed Cabdulaahi oo xog iyo taloba nagu kordhiyay; iyo Inj. Cabdulqaadir Cabdi Diini oo dhanka farsamada talooyin iyo gacan kaleba ka geystay.

Waxaa mahadnaq gaar ah mudan hawlwadeennada AGA xafiiska dhexe ee Muqdisho oo kaalin weyn qaatay: Cabdinaasir Yuusuf Macallin (Ganey) oo hawsha xog-ururinta kaalin muuqata ka qaatay; Saynab Xaaji Axmed iyo Dayax Axmed Maxamed oo diiradda u qaatay khaladbixinta garaacidda buugga iyo Axmed Faarax Saalax oo gacan ka gaystay farsamada iyo habaynta qoraalka.

**Qoreyaasha**

## ii. Hordhac (*Preface*)

Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA) waxaa farxad weyn u ah in ay soo shaacbixiso oo akhristayaasha la wadaagto buug-cilmiyeedkii labaad ee ‘*Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida*’. Darsidda iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo suugaantiisa waxay safka hore kaga jirtaa himilooyinka waaweyn ee ay hirgelintooda har iyo habeen heeganka u tahay AGA. Waxay aasaas u tahay himilada uu xambaarsan yahay halkudhegga Akadeemiyadan ee ah “*Himiladayadu waa hiilka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa*”. Sababtaas awgeed ayay Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaligu u abuurtay taxanahan, oo qayb ka ah dadaalka AGA ay ugu jirto ururinta, darsidda, kaydinta, fidinta iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa fan iyo suugaaneed. Waxaa u sii dheer dhiirrigelinta iyo daadihinta da’yarta arrimahaas u qalin-qaadatay iyo, dhanka kale, karaamaynta facii hore ee arrimahan dadaalka weyn galiyay; kuwaas oo dhaxalkoodii aqooneed ay waajib tahay in la waariyo, la kaydiyo,

lana faafiyo. Kuwaas ayuu ka mid ahaa Shariif Saalax Maxamed Cali.

Waa taas ujeeddada aannu, Akadeemiye ahaan, u go'aansannay buuggan labaad ee *Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta* in uu noqdo dhigane diiwaangelinaya dadaalkii weynaa ee uu muddo konton sanno ka badan ku soo jiray Shariif Saalax Maxamed Cali. Waxaa jira sababo badan oo Shariif Saalax iyo dhaxal-aqooneedkii uu nooga tegay ay ku mudan yihiin karaamayn, abaalgud iyo ka-tilmaan-qaadasho; Sababo kala duwan oo muhiim ka dhigaya in jiilka cusub iyo jiilalka soo socda loo tilmaamo dadaalkii uu sannado badan ku soo jiray iyo dhaxalkii uu aqoonta Soomaalida ku soo kordhiyay Shariif Saalax. Sababaha aan u doorannay waxaa ka mid ah halgankii dheeraa ee uu u soo galay qoridda iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo in uu ka mid ahaa aasaasayaashii Akadeemiyadan iyo odayada ilaaliya ee ah Golaha Maqaawiirka AGA; ka dibna in ay ajashiisii timid ee uu ka mid noqday halyeeyadii geeriyooday, kuwaas oo ay waajib tahay in la xusuusnaado, AGA ahaanna an ku talojirno inaan

halkaas ka sii wadno xuskooda iyo xusuustooda. Halyeeyadaas, ama *haldoor*kaas, marka laga yimaado aabbayaashii qorista Af-Soomaaliga ee ay ka midka ahaayeen Abwaan Cismaan Yuusuf Keenadiid, Muuse Xaaji Galaal, Shire Jaamac Axmed, Xuseen Sh. Axmed “Kadare”; kuwa dhawaan geeriyooday, kana mid ahaa asaasayaashii iyo maqaawiirtii AGA waxaa ka mid ahaa buunigii taariikhyahanka ahaa, Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Xuseen Sheekh Axmed “Kadare”.

Haddaba, buuggan la magacbaxay ‘*Haldoor: Taariikh-nololeedkii iyo Dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali*’, waxa uu ku saabsan yahay waxay ku cad yihiin cinwaanka buugga. Waa taariikh-nololeedkii Shariifka oo kooban iyo hogatusaalayn akhristaha u taataabanaya ama ka tilmaan-bixinaya waxqabad-maskaxeedkii Shariif Saalax qaybtiisii ku wajahnayd guud ahaan cilmibaarista, gaar ahaanna Af-Soomaaliga. Mahadcelin iyo bogaadin waxaa mudan labada qore ee waqtiga badan iyo dadaalka badan u huray diyaarinta buuggan; waa Guddoomiye Cabdulqaadir Nuur Xuseen “Maax”, oo fikradda

buugga curiyay, u hawlgalkiisana bilaabay, iyo Bare Sare Mustafa Cabdullaahi Fayruus oo hareeraha la qabtay, dadaal badanna geliyay ururinta xogta cilmiyeed iyo dhisidda nuxurka buuggu xambaarsan yahay. Miraha ka soo baxay dadaalkooda waxaa la hubaa in ay wax badan u faa'iidayn doonaan akhristeyaasha. Waxay naga mudan yihiin hambalyo iyo bogaadin.

**Maxamed Daahir Afrax, PhD**  
**Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka**  
**Af-Soomaaliga**

### **iii. Gogoldhig**

Buuggan waa taariikh-nololeedkii iyo waxqabadkii Danjire Shariif Saalax Maxamed Cali (1936-2014). Ujeeddada buuggan loo qoray mar waa xus iyo baroordiiq; marna waa abaalgud iyo bogaadin; marna waa iftiiminta jiilka dambe la tusayo, si ay ugu daydaan, sooyaalkii shaqo ee marxuumka, oo wada ahaa dadaal iyo xilkasnimo.

Buuggan laguma soo wada koobin taariikh-nololeedkii iyo waxqabadkii ballaarnaa ee Shariif Saalax, waase inta la karay waqtiguna saamaxay. Waxaa xusid mudan, in kaalinta ugu badan ay buuggan ka gaysteen qoraalladii uu diyaariyay marxuumku intuu noolaa. Waayo waxyaabo badan oo noloshiisa la xiriira ayaa uu marxuumku iska qoray intii uu noolaa.

Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan, cilmibaare, diblomaasi, siyaasi iyo xirfadle maamul. Waxana uu soo qabtay shaqooyin iyo xilal kala duwan, laga soo bilaabo bilowgii 1950aadkii.

Waxaa inna horyaalla taariikhdii uu reebay marxuumku iyo raadkii ay aqoontiisaasi ka tagtay, ha

noqoto waxqabad iyo shaqo muuqata ama qoraal iyo cilmibaaris uu innoo soo gudbiyay.

laga soo bilaabo 1962kii ilaa maalmihii ugu dambeeyay noloshiisa, Shariif Saalax si joogto ah ayuu u diiwaangelin jiray dhacdooyinka iyo duruufaha ku xeeran. Halkaa waxa ka muuqata inuu taariikh iyo waayo badan kaydiyay. Iyana, waa dhaxal u baahan baadigoob, habayn iyo daabacaad intaba.

Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan darajada koowaad ah! Waxa uu ahaa nooca loo yaqaan *“mawsuucada”*. Cilmibaaristu waxay u ahayd *“hiwaayad”* uu aad u jeclaa, markuu ku dhex jirana uu aad ugu farxo. Duruufaha ku hareeraysnayd ee mashquulka iyo walaahoowga kala wadatay, marna kamuu oggolaan inay *“hiwaayaddiisa”* ah cilmibaarista ka joojiso!

Shariif Saalax Maxamed Cali waxa uu tusaale u yahay dadka waxtarka ah ee hawl fiican dalkooda iyo dadkooda u soo qabtay, isla markaana dunidan ka hooyday iyaga oo aan helin maamuuskii ay mudnaayeen!

Buuggani wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood. Qaybta koowaad waxay ka kooban tahay lix cutub, oo kala ah: (1) Dhalashadii iyo bilowgii noloshiisa, (2) Waxbarashadiisii. (3) Sooyaalkii shaqooyinka iyo xilalka, (4) Dadaalkiisii cilmibaarista iyo qoraalka, (5) Aragtida iyo fikradaha Shariif Saalax ee la Xiriira Af Soomaaliga iyo Cilmibaarista, iyo (6) Geeri culus iyo baroordiiq. Qaybta labaad waa lifaaqyo ah ‘qoraallo iyo khudbooyin la Xiriira Af Soomaaliga iyo Cilmibaarista’; waxayna isu raacsan yihiin saddex xirmo, oo xirmo kastaa ka kooban tahay lifaaqyo xiriir wadaaga. Qaybta saddexaad waa sawirro xul ah oo muujinaya taariikhnololeedkii marxuumka. Waxaa ugu dambeeya liiska ilaha laga tixraacay buuggan.

Horaa loo yiri ‘nin habari dhashay hal ma seegi waayo’ e, wixii dhaliil iyo goldaloolo ah ee ka soo baxa buuggani, waa wax ku yimid kamma’ iyo ilduuf qoreyaasha ka dhacay; waxaanan rajaynaynaa in akhristayaashu noo cudurdaaraan.

**Qoreyaasha**



# **QAYBTA KOOWAAD**

**Taariikh-nololeedkii iyo  
Waxqabadkii Shariif Saalax**

# CUTUBKA 1<sup>aad</sup>

## **Dhalashadii iyo Bilowgii Nolosh Shariif Saalax**

### **1.1. Dhalashadiisii iyo Qoyskii uu ka Dhashay**

Shariif Saalax Maxamed Cali wuxuu ku dhashay magaalada Xuddur sannadkii 1936. Xuddur waa magaalomadaxda gobolka Bakool.

Shariif Saalax wuxuu ka dhashay qoys culumo ahluddiin ah, cilmi iyo aqoonna caan ku ahaa. Aabbihiis waa Shariif Maxamed-Siraajuddiin Shariif Cali Shariif Maxamuud Shariif Maxamed Shariif Nuur. Hooyadiina waxaa la oran jiray Khayra Maxamed Aw Yuusuf<sup>1</sup>.

Shariif Maxamed-Siraajuddiin, Shariif Saalax aabbihiis, waxa uu dhalay 16 carruur ah, 7 wiil iyo 9 gabdhood, oo kala ahaa afar bahood, oo ay ka mid ahayd bah Khayro. Hooyo Khayro Maxamed wuxuu Shariif Maxamed-

---

<sup>1</sup> Shariif Saalax wuxuu si faahfaahsan qoyskiisa ugaga hadlay buuggiisa 'Huddur and the History of Southern Somalia' bb. 211-216.

Siraajuddiin ku guursaday Xuddur 1926; waxayna u dhashay 7 carruur ah, 3 wiil iyo 4 gabdhood. Saalax wuxuu ahaa ilmaha afraad ee bah Khayro; waxaa ka weynaa 2 wiil iyo gabar, waxaana ka yaraa 3 gabdhood.

Shariif Cali Yare, Shariif Saalax awoowgiis aabbo, waxa uu dhalay 7 carruur ah, 5 wiil iyo 2 gabdhood, oo kala ahaa 3 bahood. Shariif Maxamed-Siraajuddiin (1900-1961) waxa uu ahaa bah-gooni, waxaana hooyadii la oran jiray Aamina Geeddi Maxamuud. Bah Aamina waxay degganaayeen deegaanka Muus, oo hadda ah magaalada Tiyeeglow. Labada bahood ee kale waxay kala degganaayeen magaalada Berbera iyo deegaanka Dhagaxbuur.

Shariif Maxamed-Siraajuddiin, Shariif Saalax aabbihiis, wuxuu ku dhashay deegaanka Ceelgaras, ee gobolka Bakool, sannadkii 1900; markii uu 16 jirsaday ayuu u guuray magaalada Xuddur, oo uu noloshiisa inta badan ku qaatay. Xuddur ayuuna ku geeriyooday Oktoobar 1961. Ceelgaras waxay dhacdaa Bariga magaalada Xuddur, waxayna u jirtaa 40 km.

Shariif Maxamed-Siraajuddiin noloshiisa inta badan waxa uu ku qaatay magaalada Xuddur. Waxa uu ka tirsanaa dariiqada Qaadiriyada, faraceeda Uweysiya, waxaana uu

ka gaaray ilaa darajada “khaliif”.<sup>1</sup> Shariifku waqti badan oo noloshiisa ah ayuu u huray hawlaha dariiqada iyo faafinta dacwada Islaamka ee deegaanka Xuddur.

Shariif Maxamed Cali waxa uu la xididay reer Sheekh Aweys, waxaana uu guursaday Xaajiyo Siti Sheekh Aweys Al-Qaadiri, oo uu dhalay Sheekh Aweys, inkasta oo aysan carruur u dhalin. Xaajiyo Siti waxa ay hore carruur ugu dhashay Sheekh Ooyaaye.

Hooyo Khayro Maxamed Aw Yuusuf, Shariif Saalax hooyadiis, waxaa hooyadeed la oran jiray Faadumo Sheekh Xasan “Faadumo Jiira”; qoyskooduna waxa uu degganaa deegaanka Doollo iyo Wardheer. Hooyo Khayro waxay walaalo ahaayeen gabadh keliya oo ka weynayd, waxaana la oran jiray Yusur. Xilligii dagaallada Daraawiishta ayay reer Maxamed Aw Yuusuf ka soo

---

<sup>1</sup> Qaadiriyadu waa dariiqo abbaaraha muddo sagaal qarni ah soo jirtay, kuna baahday dunida daafaheeda. Waxay ku abtirsataa Sheekh Cabdulqaadir Jeylaani (1077-1166 Miilaadiga). Dariiqada Qaadiriyada Bariga Afrika waxay leedahay laba farac oo waaweyn: faraca ‘Sayliciya’ oo ku aroora Sheekh Cabdiraxmaan Saylici (1815-1882), kuna baahsan dhinacyada Waqooyi iyo Galbeed ee geyiga Soomaaliyeed; iyo faraca ‘Uweysiya’ oo ku aroora Sheekh Uweys Al-Qaadiri (1847-1909), kuna baahsan dhinaca Koonfureed ee Soomaaliya iyo Bariga Afrika.

daaduumeen dhulkii ay degganaayeen una soo kaceen xaggaa iyo Webi Shabeelle iyo carro Raxanweyn. Aabbe Maxamed Aw Yuusuf jidka ayuu ku soo dhintay, wuxuuna u dhintay cudurka furuqa, halka hooyo Faadumana ay dhimatay safarka ka hor.

Yusur iyo walaasheed ka yar ee Khayro, oo agoonnimo iyo rajonimo ku kulmeen, waxa ay u tageen qaraabadooda oo degganayd tuulada Luuq-Ganaane. Yusur waxaa Luuq lagu guursaday qiyaastii 1920, walaasheed Khayrona iyada ayay la sii joogtay. Muddo ka dib waxa ay u guureen magaalada Xuddur. Shariif Maxamed-Siraajuddiin iyo Khayro waxay isku guursadeen Xuddur qiyaastii sannadkii 1926. Badiba noloshooda waxa ay wada degganaayeen magaalada Xuddur, Hooyo Khayro waxay ku geeriyootay magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga bishii Abriil 1981, iyada oo 70 jir ah.

## **1.2. Deegaankoodii**

Shariif Saalax, deegaan ahaan, waa reer Bakool, abtirsiiyo ahaanna waa Asharaafta Jamaalulayl, oo ka farcanta Asharaafta Bin Calawi. Asharaafta Jamaalulayl, deegaan ahaan, waxay ku fidsan yihiin Koonfurta Jasiiradda Carabta (gaar ahaan Yaman iyo Cummaan), Koonfur Bari Aasiya, iyo Bariga Afrika.

Asharaafta Jamaalulayl ee Bariga Afrika waxay caan ku yihiin faafinta aqoonta iyo Diinta Islaamka. Qiyaastii, bartamihii qarniga 18aad ayaa Asharaaf Jamaalulayl ahi, iyaga oo ka tegay Banaadir, ay degeen deegaanka Tiyeeglow; halkaa ayuuna Ibrahim Nuur Jamaal ka sameeyay xarun lagu barto Diinta Islaamka. Deegaankan Tiyeeglow ayay Shariif Saalax awoowayaashii degganaayeen. Shariif Cali Yare, Shariif Saalax awoowgii aabbo, yaraantiisii cilmidoonasho darteed ayuu uga tegay Tiyeeglow, ilaa uu gaaray magaalada Berbera. Markuu cilmiga bartay ka dib, Berbera ayuu ka bilaabay faafinta aqoonta Diinta Islaamka, kuna yeeshay xer, kana guursaday, kuna dhaqmay.

Muddo markii uu maqnaa Shariif Cali Yare, ayaa loo diray walaalkiis ka weynaa oo la oran jiray Shariif Maxamed Maxamuud; wax uu raadiyaba waxa uu ugu tegay Berbera, wuuna soo kaxeeyay oo reerkii keenay. Halkaas ayaa Shariif Cali loogu guuriyay Aamina Geddi Maxamuud. Shariif Cali muddo badan kuma sii negaannin reerka, ee markiiba wuxuu ku noqday Berbera oo uu kaga yimid xaaskiisii weynaa iyo carruurteedii.<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup> Bahdan magaalada Berbera degganayd, waxaa ka mid ahaa Shariif Maxamed Calaa`uddiin oo markii dambe noqday sheekha

Markii uu sannadku ahaa 1900 ayaa hooyo Aamina waxay dhashay wiil loo bixiyay Maxamed-Siraajuddiin, waa Shariif Saalax aabbihiise. Hooyo Aamina ayaa dusha u ridatay barbaarinta iyo waxbarista wiilkeeda Maxamed. Maxamed-Siraajuddiin wuxuu ku dhashay deegaanka Ceelgaras, wuxuuna ku gaaray ilaa 16 jir.

Shariif Cali Yare waxa uu dhalay 7 carruur ah, oo kala ahaa 3 bahood. Bah waxay ahayd Hooyo Aamina Geeddi oo dhashay Maxamed-Siraajuddiin keliya; bah kale waxay degganayd Berbera, waxayna ahaayeen 4 carruur ah, 3 wiil iyo gabar; bahda kalena waxay degganayd agagaarka Dhagaxbuur, waxayna ahaayeen 2 carruur ah, wiil iyo gabar.

Markii uu hanaqaaday, Shariif Maxamed-Siraajuddiin waxa uu shaqaale u noqday maamulkii Talyaaniga, muddo ka dibna wuu ka ruqsaystay. Badiba noloshiisa wuxuu ku qaatay magaalada Xuddur, halkaas ayuuna ku guursaday Khayro, qiyaastii sannadkii 1926.

Magaalada Xuddur waxay ka koobnayd saddex xaafadood oo kala ahaa: Buulow (Bandar Dhawiil), Bandar Jadiid

---

dariiqada Saalixiyada ee magaalada Burco. Shariif Maxamed Calaa`uddiin waxa uu Burco ku geeriyooday 1975 isagoo 81 jir ah.

iyo qaybta Koonfureed. Xuddur waxay xarun u ahayd deegaan ballaaran oo ku hareeraysnaa, sidoo kale, waxaa degganaa jaaliyad Yaman ah. Reer Shariif Maxamed Cali waxay degganaayeen oo aqalkoodu ku yaallay xaafadda Bandar Jadiid.<sup>1</sup>

Dugsigii/iskoolkii ugu horreeyay ee casri ah, oo magaalada Xuddur yeelato waxaa dhisay maamulkii Ingiriiska dabayaaqadii 1945, waxaana uu ka koobnaa hal qol oo fasal ah keliya.

Xog ballaaran iyo falanqayn buuxda oo Xuddur ku saabsan, iyo guud ahaanba Koonfurta Soomaaliya, Shariif Saalax waxa uu kaga hadlay buuggiisa ‘Huddur and the History of Southern Somalia’ oo la daabacay sannadkii 2005. Waxa uu si faahfaahsan ugaga hadlay: magaalada Xuddur iyo deegaannada ku xeeran ee ay xarunta u ahayd ama ay xiriirka dhaqaale la lahayd; kobocii iyo dhismihii Xuddur; qoysaskii degganaa Xuddur oo wata fahfaahinta magacyadoodii; dhinacyada bulshada, caadooyinka iyo kulammada bulsho ee ka jiray; dhaqaalaha magaalada iyo

---

<sup>1</sup> Faahfaahinta saddexdan xaafadood ee Xuddur iyo magacyada qoysaskii degganaa, waxa uu shariif Saalax ku faahfaahiyay buuggiisa ‘Huddur and the History of Southern Somalia’ bb. 207-225.

meelaha xiriirka ganacsi ay la lahayd; siyaasadda iyo maamulka; iyo guud ahaanba taariikhda iyo waayihii magaalada Xuddur, laga soo bilaabo dhammaadkii qarnigii 19aad ilaa laga soo gaaro bartamihii qarniga 20aad.

# CUTUBKA 2<sup>aad</sup>

## Waxbarashadiisii

### 2.1. Bilowgii Waxbarashadiisa

Waxbarashada Shariif Saalax waxay martay heerar kala duwan, waxayna ka bilaabataa barashada Quraanka Kariimka oo uu bilaabay sannadkii 1941. Waxa uu Quraanka ku bartay Xuddur, waxaana looxa u qabtay dhowr macallin oo kala dambeeyay, kalana ahaa Sheekh Samaan, Shariif Caydaruus (Shariif Saalax walaalkiis), Xaaji Maxamuud Macallin Yuusuf oo ku magac dheeraa (Irdho). Waxaana uu halkaa ku bartay akhrinta iyo qoridda Af Carabiga, waxaana uu xafiday Quraanka Kariimka.

Barashada Quraanka ka dib, waxa uu Shariif Saalax bilaabay in uu barto cilmiga Naxwaha iyo Sarfiga Af Carabiga, waxaana uu raacday kitaabbadii xilligaa lafdhabarta u ahaa Naxwaha & Sarfiga, sida: Ajruumiga (الأجرومية), Laamiyatul-Afcaal (لامية الأفعال), Mulxatul-Icraab (ملحة الإعراب). Shuyuukhdii cilmigan uu ka raacday waxaa ka mid ahaa Sheekh Xuseen Macallin, Sheekh Xasan Sheekh Cali, iyo Sheekh Cabdulaahi.

Waxaa kale oo Shariifku bartay culuumta Islaamiga ah, sida Axkaamta iyo Tafsiirka. Kitaabada uu axkaamta ama cilmiga fiqhiga (الفقه الاسلامي) ka raacday waxaa ka mid ah kitaabka Abuu Shujaac. Shuyuukhda uu axkaamta ka raacdayna waxaa ka mid ahaa Sheekh Yuusuf Macallin. Waxaa kale oo uu bartay Tafsiirka Quraanka Kariimka. Shariif Saalax wuxuu Culuumta Islaamiga ah ka raacanayay xalaqaadka cilmiga ilaa 1951.

Shariif Saalax yaraantiisiiba waxa uu bartay afafka Carabiga, Ingiriisiga iyo Talyaaniga. Ugu horayn waxa uu galay dugsi ama iskool, ku yaalla magaalada Xuddur si uu sare ugu sii qaado aqoontiisa Af Carabiga. Waxaa kale oo uu bilaabay in uu barto Af Ingiriisiga, ka dibna Af Talyaaniga.

## **2.2 Dugsiga iyo Madarasadda Xuddur**

Waxbarashadiisa iskoolka wuxuu Shariif Saalax ka bilaabay dugsigii magaalada Xuddur sannadkii 1945. Dugsigan waxaa dhisay maamulkii Ingiriiska ee loo yiqiinnay BMA (British Military Administration) oo

xilligaa ka talinayay gobollada Koonfurta Soomaaliya, waxaana uu ka koobnaa qol hal fasal ah keliya.<sup>1</sup>

Shariif Saalax waxa uu ka mid ahaa dufcaddii koowaad ee loo qaatay dugsiga Xuddur sannad-dugsiyeedkii 1945-46, oo ka koobnayd 22 arday. Dufcaddii labaad ee gashay Sannad-dugsiyeedkii 1946-47 waxay ka koobnaayeen 14 arday.

Magacyada ardayda dufcadda koowaad, waxay kala ahaayeen:<sup>2</sup>

1. Saalax Shariif Maxamed Cali
2. Xuseen Maxamed Saciid Suufi
3. Maxamuud Diiriye Maxamed
4. Saalax Yuusuf Faarax

---

<sup>1</sup> Koonfurta Soomaaliya waxaa gumaysanayay dawladda Talyaaniga. Laakiin dagaalkii labaad ee dunida ayaa Ingiriisku ka qabsaday; wuxuuna ka talinayay laga soo bilaabo bishii Maarso 1941 ilaa Abriil 1950, oo Ingiriisku uu Talyaaniga ku wareejiyay. Xilligan dambe, Talyaanigu wuxuu Koonfurta Soomaaliya ku maamulayay hab wisaayo ahaan [oo macnaheedu yahay inuu xornimo u diyaariyo] ilaa 1960, dushana waxaa kala socday Qarammada Midoobay.

<sup>2</sup> Magacyada ardayda labada dufcadood, shariif Saalax waxa uu ku taxay buuggiisa 'Huddur and the History of Southern Somalia' bb. 249-251.

5. Cismaan Yuusuf Faarax
6. Ismaaciil Yuusuf Faarax
7. Xasan Faarax Cali
8. Maxamed Cismaan Xuseen
9. Cali Nuur Cismaan Xuseen
10. Cabdullaahi Maxamed Sheekh
11. Maxamuud Maxamed Sheekh
12. Cabdiraxmaan Yaasiin Fadal
13. Cali Muxsin Gaab
14. Maxamed Tubeeli
15. Maxamed Saalax Xabiib
16. Axmed Cabdow Subay
17. Maxamed Xaaji Qaa'id
18. Saalax Qaasim Xuseen
19. Cabdalla Shariif Dooraani
20. Yaxye Shariif Dooraani
21. Xasan Shariif Dooraani
22. Cali Zeyn Cabdulle

Macallinkii ugu horreeyay ee dugsiga Xuddur wax ka dhigaa wuxuu ahaa macallin Axmed Muuddey oo reer Afgooye ahaa. Dhowr maaddo ayaa dugsiga laga dhigayay, waxayna ku baxayeen Af-Carabi, waxaa kale oo ka mid ahaa maaddo Af-Ingiriisi ah. Buugaagta muqarrarka waxaa laga keenay dalka Suudaan. Buugaagta wax lagu qorto iyo qalimaanta maamulka Ingiriiska ayaa

bilaash ardayda ku siin jiray. Ardayda waxaa laga qaadi jiray lacag ‘fee’ ah, bishiiba laba shilin arday kasta.

Ardayda dugsiga soo gashay hore ayay Quraanka u soo dhigteen, ugu yaraan min hal mar ayay soo dhammeeyeen. Sidaas darteed, waxbarashada wax baa uga bilownaa.

Si kastaba ha ahaatee, waalidiintu way saluugeen tacliintii dugsiga ka baxaysay, waxayna u arkeen mid heerkeedu ka hooseeyo ‘culuumul-casri’-ga ay dugsiga ka filayeen. Dugsigani wuxuu joogsaday nuskii labaad ee sannadkii 1947.

Waxgaradkii magaalada iyo intii danaynaysay barashada ‘culuumul-casri’-gu waxay ka hawlgaleen sidii dugsi tayo leh ay Xuddur ugu samayn lahaayeen, macallin tayo lehna u keeni lahaayeen. Waxay ku guulaysteen inay dhisaan “madarasad” baraako ah. Waxayna magaalada Baydhabo ka keeneen macallin la yiraahdo “ustaad Cali Saalax” dabayaaqadii 1947. Halkan waxaa ka unkamay dugsigii ahliga ahaa ‘madrasah ahliyah’ ama (private school) ee ugu horreeyay ee Xuddur yeelato.

Ardaydii dugsiga dawladda dhigan jiray iyo arday cusub ayaa madarasadan soo galay. Qiyaastii afartan arday ayay ahaayeen. Waxaa loo qaybiyay laba fasal, fasal heer bilow

ah iyo fasal ka sarreeya. Ardayda waxaa laga qaadayay lacag ‘fee’ ah, bishiiba shan shilin arday kasta. Maadooyinka la dhigan jiray waxay ahaayeen Af-Carabi, Xisaab, Taariikh, Juqraafi, Diin iyo Cilmiga Caafimaadka (Hygiene). Buugaagta muqarrarku waxay ahaayeen kuwa dalka Masar. Wax buug daabacan ah dugsiga waxaa yaallay saddex buug oo macallinku adeegsado. Ustaad Cali Saalax wuxuu dadaal badan ku bixiyay siduu aqoonta ardayda sare ugu qaadi lahaa, una xiisagelin lahaa.

Dabayaaqadii 1948, maamulkii Ingiriisku waxay ustaad Cali Saalax u qaateen macallinimo, waxayna ka codsadeen inuu ka shaqeeyo siduu ardayda ugu soo celin lahaa dugsiga dawladda. Arrintanna wuu ku guulaystay. Sannad-dugsiyeedkii 1948-49, macallin cusub ayaa Muqdisho laga keenay, waxaana la oran jiray macallin Mahdi Cali Maslax. Macallin Mahdi waxaa laga dhigay maamulaha madarasadda iyo macallin u dhiga fasallada sare; halka ustaad Calina ahaa macallinka wax u dhigayay ardayda heerka bilowga ah.

Dugsiga iyo madarasaddaa Xuddur ayay ahayd goobtii ugu horraysay ee Shariif Saalax ku barto waxbarashada casriga ah. Halkan waxaa uga bilowday geeddi cusub oo

aqoonkororsi ah, oo uu u maray dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

### **2.3 U soo Wareegiddiisii Muqdisho**

Shariif Saalax waxa uu u soo wareegay magaalada Muqdisho, oo uu tacliinta ka sii watay. Sannadkii 1954kii waxa uu galay dugsi tababar macallinnimo, waxaana uu ka qaatay “diploma” macallinimo dugsiyada hoose. Waxaana uu noqday macallin.

Ka dib Shariif Saalax imtixaan uu galay waxa uu ku guuleysatay deeq waxbarasho tababar macallinimo ah, oo uu ka helay maamulkii Wisaayada ee AFIS (Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia), waxaana uu u safray magaalada Genoa (Genova) ee dalka Talyaaniga si uu aqoontiisa u soo kororsado; waxaana uu halkaa ka galay machadka tababarka macallimiinta 1955-56, waxaana uu soo qaatay diblooma macallinnimo ah. Ka dibna dalka ayuu ku soo noqday sannadkii 1956, shaqadiisii macallinnimada ayuuna halkii ka sii waday.

Ka dib waxa uu galay Shariif Saalax machadka sare ee barashada dhaqaalaha iyo sharciga oo Muqdisho ku yaallay (markii dambena laga dhigay Jaamacadda

Ummadda Soomaaliyeed), waxaana uu ka qaatay shahaadada dibloomada sannadkii 1958.

Mar kale waxa uu helay deeqwaxbarasho heer jaamacadeed ah. Waxa uu galay Kulliyadda Culuumta Siyaasadda ee Jaamacadda *‘Università degli Studi di Roma, “La Sapienza”* oo ku taalla magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga. Waxa uu bartay cilmiga *political sociology*, waxaana uu ka qalinjebiyay sannadkii 1962, waxaana uu ka qaatay shahaadada digriiga ee *“laurea baccalaureate in economics and political science”*.

Run ahaantii, Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan leh aqoon qoto dheer oo dhinacyo badan leh. Waxa uu ahaa nooca loo yaqaan *“mawsuucada”*. Aqoontiisu waxa ay ku aroortaa qaybaha kala duwan ee kasmada iyo aqoonta, sida: culuumta siyaasadda, taariikhda, culuumta bulshada, luqadda, suugaanta iyo dhaqanka.

Af Soomaaliga oo afkiisa hooyo ahaa ka sokow, waxa uu Shariif Saalax ku hadli jiray afafka Carabiga, Talyaaniga iyo Ingiriiska. Afartaas luqadoodba wax buu ku qori jiray, wuxuuna leeyahay qoraallo iyo buugaag afafkan ku kala qoran.

# CUTUBKA 3<sup>aad</sup>

## Sooyaalkiisii Shaqooyinka & Xilalka

### 3.1 Macallinnimo

Shariif Saalax Maxamed Cali waxa uu soo qabtay shaqooyin iyo xilal kala duwan. Bilowgiiba wuxuu la jaanqaaday dhalashadii Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Shariif Saalax waxa uu aha aqoonyahan, cilmibaare, diblomaasi, siyaasi iyo xirfadle maamul. Intaba wuu ku soo shaqeeyay.

Shaqadii ugu horeysay ee uu Shariif Saalax soo qabtay waxa ay ahayd macallinnimo. Waxa uu macallin ka noqday dugsiga Xuddur. Waxa ugu xigay degmada Balcad, oo uu waxbarashada ka shaqaynayay. Waxa kale oo uu Shariif Saalax waxbarashada ka soo shaqeeyay magaaloyinka Diinsoor, gobolka Baay; degmada Qoryooley, Shabeellaha Hoose; degmada Ceeldheer, gobolka Mudug; iyo magaalada Muqdisho.

Markii uu dalka ku soo noqday 1956 waxa loo magacaabay kaaliye kormeere mashruuca horumarinta reer miyiga, oo laga fulinayay magaalada Diinsoor.

Markii uu soo qaatay shahaadada heer jaamacadeed oo buuxda, dalkana ku soo noqday sannadkii 1963kii waxa uu ka mid noqday shaqaalaha Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Ka dib waxa loo magacaabay la taliye iyo u qaybsanaha xagga ganacsiga iyo dhaqaalaha ee safaaradda Soomaaliya ee dalka Masar muddadii 1963-65.

### **3.2 Maamulka & Siyaasadda**

Ka dib Shariif Saalax waxa uu u wareegay dhinaca maamulka, waxaana uu agaasime ka soo noqday waaxo iyo wasaarado kala duwan muddadii 1966-70. Sannadkii 1966kii waxa loo magacaabay agaasimaha waaxda ganacsiga ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha. Ka dib Shariif Saalax waxa uu agaasime waaxeed ka noqday Wasaaradda Caafimaadka qaybta dhakhaatiirta. Ka dibna waxa uu u dallacay agaasime guud ee isla Wasaaradda Caafimaadka.

Muddadii u dhexaysay 1970-1976, Shariif Saalax waxa uu ka mid ahaa hawlwadeennadii iyo aqoonyahannadii Soomaaliyeed ee lafdhabarta u ahaa qoritaanka Farta

Soomaaliga iyo kabcinta tacliinta dalka, wuxuuna kaalin muuqata ku lahaa sidii tiirarka loogu taagi lahaa tacliinta sare ee dalka iyo hay'adaha cilmibaarista.

Sannadkii 1970 waxa madax looga dhigay machadkii sare ee “Institute University College”, oo gadaashii noqday Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed. Shariif Saalax oo guddoomiye ka ah ayaa machadka sare laga dhigay ‘Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed’, lana sii ballaariyay, waxaana lagu daray takhasusyo iyo kulliyado kala duwan. Shariifku wuxuu xilkan guddoomiyennimada JUS hayay ilaa sannadkii 1974.

### **3.3 Guddoomiyenimadii Guddigii Af-Soomaaliga**

Xilalka taariikhiga ah ee uu soo qabtay Shariif Saalax waxaa ka mid ahaa, in uu soo noqday guddoomiyaha Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga (ama Guddiga Af-Soomaaliga). Muddadii 1971 ilaa 1973 ayuu ahaa guddoomiyaha guddigan.<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup> Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga iyo hawlaha uu soo qabtay, waxa uu Shariif Saalax kaga sheekeeyay buuggiisa “Halgankii loo Galay Qoridda Af-Soomaaliga (1949-1972)”, bb. 10-30.

Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga waxaa la magacaabay bishii Jannaayo 1971, waxaana uu ka koobnaa 23 xubnood, oo kala ah:

1. Shariif Saalax Maxamed Cali
2. Muuse Xaaji Ismaacil Galaal
3. Yaasiin Cismaan Keenadiid
4. Sh. Ibraahin Xaashi Maxamuud
5. Cabduraxmaan Nuur Xirsi
6. Sh. Jaamac Cumar Ciise
7. Mustafe Sh. Xasan Cilmi
8. Maxamed Sh. Xuseen “Sheeka-Xariir”
9. Xuseen Sh. Axmed “Kaddare”
10. Cabdullaahi Xaaji Maxamuud “Insaaniya”
11. Xirsi Magan Ciise
12. Axmed Cartan Xaange
13. Iikar Baana Xaddaad
14. Cabdullaahi Ardeeye
15. Cabdi Daahir Afey
16. Maxamed Xasan Aadan “Gahayr”
17. Dr. Yuusuf Xirsi Axmed
18. Dahabo Faarax Xasan
19. Cabdullaahi Xaaji Abuubakar
20. Maxamed Nuur Caalin
21. Maxamed Shire Maxamed “Gaab”

22. Axmed Cali Abokor

23. Cumar Aw Nuux

Dhowr fadhi ka dib waxaa xubinnimada guddiga laga cafiyay Cabdiraxmaan Nuur Xirsi, oo waayadaa loo magacaabay inuu noqdo guddoomiyaha Bankiga Dhexe. Sida Shariif Saalax meelaha qaar ku xusay, Mustafe Sh. Xasan Cilmi dalka dibaddiisa ayuu u safray qiyaasta dhammaadkii 1971; waxaana guddiga isugu soo haray 21 xubnood, oo hawshii guddiga sii waday.

Guddigan waxaa loo xilsaaray hawlaha kala ah:

1. Inuu dejiyo buugaagta dugsiyada hoose.
2. Inuu dejiyo buug naxwe Af Soomaali.
3. Inuu dejiyo qaamuus Soomaali-Soomaali ah.

Guddiga waxaa ka farcamayay guddi-hoosaadyo, u kala qaybsan hawlaha kala ah: qaamuuska, naxwaha, taariikhda iyo juqraafiga, cilmiga sayniska, iyo buugaagta dugsiyada hoose. Shariif Saalax waxa uu ka mid ahaa guddihoosaadka qaamuuska, waxa kale oo ay ka wada tirsanaayeen Xuseen Sh. Axmed “Kaddare” iyo Yaasiin Cismaan Keenadiid.

Shariif Saalax waxa uu hawsha guddihoosaadka diyaarinta qaamuuska ku tilmaamay “badweyn aan hore loo

sahamin” oo loo diray iyaga oo aan badidood lahayn “aqoon iyo khibrad cilmi-afeedka (linguistics)”, sidaas darteed, shaqadooda wuxuu ku sifeeyay inay ahayd “*kacaakuf joogto ah*”, oo marar badan “*aan taageero lahayn*”.<sup>1</sup>

Xubin kasta ee guddiga qaamuusku, waxa uu soo macnaynayay ereyo loo diray, ka dib ayay guddigoodu isula iman jireen erayadaas, oo macnaha isla toostoosin jireen, islana meel dhigi jireen. Inkasta oo ay hawl fiican qabteen, haddana, gudigan uma suurtagelin inay soo ebyaan shaqadii loo xilsaaray muddadii sagaalka bilood ahayd ee ay shaqaynayeen. Sannadkii 1974, waxaa dhamaystirka hawha qaamuuska loo xilsaaray mudane Cabdulqaadir Faarax Bootaan, oo ahaa xubin ka tirsan Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta.

Sidaa guddiga qaamuuska oo kale ayaa guddihoosaad kastaa hawsha loo diray si gooni ah uga shaqayn jiray, wuxuuna qabsan jiray fadhiyadiisa gaarka ah. Inta la kala maqan yahayna xubin kastaa hawsha lagu ogyahay ayay soo qaban jirtay. Guddiga oo isku dhanna si guud ayay u wada shaqaynayeen, waxayna shir guud isugu iman jireen

---

<sup>1</sup> Shariif Saalax Maxamed cali. “Halgankii loo Galay Qoridda Af-Soomaliga (1949-1972)”. B. 10

ugu yaraan toddobaadkiiba saddex jeer, waxayna ka wada doodi jireen arrimaha ay guddihoosaadyadu u soo gudbiyaan.

Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga waxaa la dhisay bishii Jannaayo 1971. Waxaa loo qoondeeyay in muddo sagaal bilood ah ay hawlaha loo diray ku soo dhammaystiraan. Sidii qorshuhu ahaana, wixii u qabsoomay waxay u gudbiyeen Golihii Sare ee Kacaanka bishii Oktoobar 1971. Waxaa si rasmi ah loo go'aamiyay qoridda farta Soomaaliga bishii Oktoobar 1972. Dhowr bilood ka dib, waxaa la bilaabay ololeyaal lagu hirgelinayo barashada iyo adeegsiga Farta Soomaaliga, laga bilaabo bishii May [Maajo] 1973. Waxaa lagu bilaabay ololihii far baridda shaqaalaha dawladda, ardayda iyo dadweynaha magaalooyinka deggan; waxaana lagu soo ebyay Ololihii Horumarinta Reer Miyiga oo la soo gabagabeeyay bishii Maarso 1975.

Guddiga Af-Soomaaligu, markii uu warbixintiisa u gudbinayay Golaha Sare ee Kacaanka, waxa uu sii raaciyay talooyin ku aaddan hirgelinta Af-Soomaalaynta heerarka waxbarashada ee dalka, oo ahayd, si diyaargarow iyo waayo-aragnimo ku filan loo helo, in *'si jaranjaraysan oo ku raagid leh'* loo taabbageliyo. Talooyinkaas waxba

kama soo qaadin Kacaanku oo *'kacaannimada'* ayuu ka doorbiday *'nuxurka'*.<sup>1</sup>

Markii ay hanaqaadday qoriddii Farta Soomaaligu, lana soo gabagabeeyay Ololihii Horumarinta Reer Miyiga, waxaa xubnihii Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga, oo 21 xubnood isugu soo haray, lagu sharfay billad-sharafeedyo maar ah.

### **3.4 Xilal Maamul kale**

Sannadkii 1974, Shariif Saalax waxa uu noqday wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxaana uu xilkan hayay ilaa 1976.

Muddada uu Shariif Saalax ahaa Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxa uu ka shaqeeyay sidii loo aasaasi

---

<sup>1</sup> Arrintan wuxuu Shariifku kaga hadlay buuggiisa *'Halgankii loo Galay Qoridda Af-Soomaaliga (1949-1972)'*, fiiri bb. 24-30. Arrintan ka sokow, waxaa kale oo uu tilmaamay in go'aanno khuseeya waxbarashada la qaatay iyada oo aan lagala tashan dadkii aqoonta iyo khibradda u lahaa, ama talooyinkoodii loo garab maray, ujeeddo siyaasadeed darteed, taasina ay waxbarashadii dalka dhaawac u gaysatay. Dhibaatan hannaanka go'aan qaadashada khaldan ee Shariifku ka dayriyay waa dhibaato haysata badiba dawladda dalalka soo koraya, Soomaaliyana way ku soo gubatay.

lahaa Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed; waxaana uu ka mid noqday tiirarkii akaademiyadu ku taagnayd.

Waxaa kale oo uu Shariif Saalax noqday maareeyaha Warshadda Caagga ee *INCAS* muddadii 1976-1977. Warshadda Caaggu waxa ay sku taallay magaalada Jammaame ee gobolka Jubbada Hoose.

Sannadkii 1976kii waxa uu Shariif Saalax ka mid ahaa aasaasayaashii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS), waxaana uu noqday xubin Golaha Dhexe ee Xisbiga ee xisbigaas oo ahaa xisbihii haye u sarreeyey talada dalka. Waxa kale oo uu noqday Guddmiyaha Hoggaanka Cilmibaarista ee XHKS muddadii 1976-77. Waxaa kale oo uu noqday madaxa Hoggaanka Xiriirka Caalamiga ee XHKS muddadii 1977kii ilaa 1978kii.

### **3.5 Safiirnimo 13 Sanno ah**

Mar kale Shariif Saalax waxa uu ku noqday hawshii diblomaasiyadda. Muddo 13 sanno oo xiriir ah 1978-1989 ayuu Soomaaliya uga soo noqday safiir toban dal oo kala duwan. Saddex waddan oo Soomaaliya safaarad ku lahayd iyo toddobo waddan oo uu ka ahaa safiir aan degganayn

*“non-residence ambassador”*. Waxa uu safiir deggan ka soo noqday dalalka Talyaaniga, Shiinaha iyo Boqortooyada Midowday ee Ingiriiska. Sidoo kale, waxa uu safiir aan degganayn *“non-residence ambassador”* ka soo noqday toddobada dal ee kala ah: Giriigga, Roomaaniya, Jabaan, Filibiin, Ustaraaliya, Waqooyiga Kuuriya iyo Kaamboodiya.

Sannadku markii uu ahaa 1978 ilaa 1981 waxa uu ahaa danjiraha Soomaaliya u fadhiya dalka Talyaaniga. Isla xilligan, waxaa kale oo uu safiir aan degganayn *“non-residence ambassador”* ka ahaa dalalka Giriigga iyo Roomaaniya.

Muddadii u dhexaysay 1981 ilaa 1984kii waxa uu ahaa danjiraha Soomaaliya u fadhiya dalka Shiinaha. Isla xilligan, waxa kale oo uu safiir aan degganayn *“non-residence ambassador”* ka ahaa dalalka Jabaan, Filibiin, Ustaraaliya, Waqooyiga Kuuriya iyo Kaamboodiya.<sup>1</sup>

Sannadku markii uu ahaa 1984 ilaa 1989 waxa uu ahaa danjiraha Soomaaliya u fadhiya dalka Ingiriiska (UK).

---

<sup>1</sup> Xilli dambe ayaa dalka Jabaan laga furay safaarad buuxda.

Markii dawladda Soomaaliya ay soo tabardarraynaysay, waxa uu Shariif Saalax codsaday in laga beddelo safaaradda Soomaaliya ee Ingiriiska sannadkii 1989. Isla sannadkii 1989, ayuu dalka dib ugu soo noqday, 13 sanno oo shaqo danjirenimo dibadda ah ka dib.

Markii uu dalka dib ugu soo noqday Shariif Saalax waxa uu madax ka noqday hoggaanka cilmibaarista ee XHKS 1989, xilkaas ayuuna hayay ilaa Janaayo 1991.

### **3.6 Isxilqaan Odaynimo**

Hawlaha kale ee Danjire Shariif Saalax uu isu diray waxaa ka mid ah, inuu ahaa samafale u dhaqdhaqaaqa xuquuqul insaanka iyo garab-istaagga dadka dulman intii lagu gudajiray xilligii Kacaanka. Waxa uu iska xilsaari jiray dadka hoos yimaadda masuuliyaddiisa, wixii culays aan gar ahayn ee la saaro inuu ka fududeeyo intii tabartiis ah.

Dhankan hawsha ugu muuqata waxay ahayd dadaal uu u galay siidaynta abwaanka Soomaaliyeed ee caanka ah, abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), oo ku xirnaa degmada Qansaxdheere sannadihii 1973-1978. Maadaama uu yahay wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare, waxa uu sheegay Shariif Saalax inuu ka guban jiray qof

aqoonyahan iyo waxgarad ah, oo iska xiran, iyadoo dalku u baahan yahay aqoontiisa iyo maskaxdiisa.

### **3.7 Soo Celinta Dawladnimadii Soomaaliya**

Burburkii dawladda Soomaaliyeed ka dib, Shariif Saalax waxa uu qayb ka noqday dadaalladii dibuheshiisiinta iyo soo celinta dawlad Soomaaliyeed. Xilliyo kala duwan ayuu kaalimo kala duwan ka soo qaatay, tiro shirar dibuheshiisiin iyo nabadayn ah ayuuna ka qaybgalay.

Shirkii wadahadallada kooxaha Soomaaliya Addis Ababa 1993, waxa loo doortay guddoomiyaha aqoonyahannada Soomaaliyeed.

Shirkii dibuheshiisiinta Soomaaliya, Kenya Oktoobar 2002- Agoosto 2004, waxa loo doortay guddoomiyaha ‘Bulshada Rayidka’. Shirkan waxa uu Shariifku ka qaatay kaalin muuqata. Intii shirkani socday, waxa uu diiwaangeliyay dhacdooyinkii iyo duruufihii ku xeeranaa, waxaana uu qayb ka mid ah innoogu soo gudbiyay buuggiisa *“Xusuustebyo Eldoret: Shirweynihii Nabadaynta Soomaaliya 2002-2003”* oo la daabacay sannadkii 2005.

Sidoo kale, waxa uu qayb ka ahaa gadoodkii ka hor yimid in Itoobiya ay soo gashay gobollada Koonfurta Soomaaliya 2006-2009, iyo “*Isbahaysigii Dibuxoraynta Soomaaliya*”. Shariif Saalax waxa uu ka mid noqday madaxda isbahaysiga. Hawsha siyaasadda iyo maamulka ka sokow, qayb ka mid ah dhacdooyinkii iyo waayihii marxaladdan waxa uu innoogu soo tebiyay buuggiisa “*ملحمة النواب الأحرار الصوماليين ضد الإحتلال الإثيوبي 2006-2009*”, oo la daabacay sannadkii 2010.

# CUTUBKA 4<sup>aad</sup>

## Dadaalkiisii Cilmibaarista iyo Qoraalka

### 4.1. Arar

Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan, cilmibaare, diblomaasi iyo siyaasi. Halkan waxaan ku soo gudbinaynaa aqoonyahan Shariif Saalax iyo dadaalkiisii cilmibaarista iyo qoraalka.

Waxaan ku bilaabaynaa falanqaynta baaxadda iyo qotada dheer ee ay lahayd aqoonta Shariif Saalax. Ka dibna waxaan soo bandhigaynaa waxsoosaarkiisa aqooneed, ee uu ku sameeyay Af Soomaaliga iyo qaybo ka mid ah dhaqanka iyo taariikhda bulshada Soomaaliyeed.

Waxaan wax ka tilmaami doonnaa qoraallada Danjire Shariif Saalax intooda la daabacay ama daabacaad diyaar u ah.

Waxaan bandhig kooban ka soo gudbinaynaa lix buug oo ka mid ah qoraalladiisa. Waana kuwa noola muuqday inay ugu mudan yihiin.

## 4.2. Baaxaddii iyo Qotodheeridii Aqoontiisa

Sida aan ku soo tilmaannay waxbarashadiisa, Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan leh aqoon qoto dheer oo dhinacyo badan leh.

Laga soo bilaabo isagoo shan jir ah, 1941, ilaa uu ka god galay 2014, shariif Saalax wuxuu ku dhex jiray badweynta cilmiga iyo aqoonta, mar uu yahay arday wax baranaya, mar uu yahay macallin dad kale wax baraya, mar uu yahay aqoonyahan cilmibaaris samaynaya, iyo mar uu yahay masuul tacliinta iyo cilmibaarista hagaya intaba.

Cilmibaaristu waxa ay u ahayd “*hiwaayad*” uu aad u jeclaa, markuu ku dhex jirana uu aad ugu farxo. Waxaad arkaysaa in buugtiisa ugu muhiimsan uu qoray xilliyadii uu ku gudo jiray shaqada safiirnimada iyo xilligii dambe ee qaranjabku Soomaaliya ku dhacay. Duruufu ku hareeraysnayd ee mashquulka iyo walaahoowga kala wadatay, marna kamuu oggolaan inay “*hiwaayaddiisa*” cilmibaarista ah ka joojiso!

Shariifku wuxuu aqoon durugsan u lahaa takhasusyo kala duwan oo ku wada aroora laamaha kasmada ee loo yaqaan culuumta bulshada (social science), sida: culuumta siyaasadda oo uu shahaado ku qaatay, kuna shaqeeyay;

cilmiga bulshada (sociology); qaanuunka iyo sharciyada; taariikhda; culuumta Islaamiga ah ee uu yaraantiisii raacday; cilmi-afeedka; dhaqanka iyo suugaanta luqado kala duwan.

Dhinaca kale shariifku wuxuu yaqaanay, wax ku bartay, ku hadli jiray, waxna ku qoray afaf kala duwan, sida afafka Carabiga, Ingiriisiga iyo Talyaaniga; waxaa u soo raaca Af Soomaaliga oo ah afkiisii hooyo, oo uu waliba “maxaatiri” iyo “maay” labadaba aqoon dheer uu u lahaa. Luqadahan kala duwan ee uu wax ku bartay waxay dhaxalsiiyeen inay kobciyaan aqoontiisa tiro iyo tayoba.

Waxyaabaha kale ee kasmadiisa aqooneed kobciyay, sarena u qaaday, waxaa ka mid ah waayo-aragnimada uu ka dhaxlay dalalka kala duwan ee uu ka soo shaqeeyay, iyo xilliga uu soo joogay. Wuxuu ka soo shaqeeyay dalal kala duwan, leh dhaqammo kala duwan, marayay marxalado dhaqan-dhaqaale oo kala duwan, ay ka talinayeen hannaano siyaasadeed kala duwan. Tani waxay dhaxashiisay waayo-aragnimo hodan ah.

Sidoo kale, wuxuu soo joogay xilli saamayntiisa dunida iyo dalkaba ku lahaa, waa xilligii dagaalkii qaboobaa uu

dunida ka socday.<sup>1</sup> Shariifku wuxuu u soo joogay bilowgii dagaalka qabow ilaa dhammaadkiisii, wuxuu u soo joogay waayihii marxaladdan isagoo ah aqoonyahan haya xilal qaran oo la falgelaya xaaladdii dagaalka qabow. Dhinaca kale, wuxuu indhaha ku kala furay iyadoo baadigoob iyo halgan loogu jiro dawladnimo Soomaaliyeed. Wuxuu u soo joogay xornimadii iyo dhalashadii dawladda Soomaaliyeed iyo marxaladihii kala duwanaa ee ay soo martay, oo uu waliba xilal qaran hayay. Wuxuu u soo taagnaa qaranjabkii iyo burburkii Soomaaliya ku dhacay. Wuxuu qayb ka ahaa dadaalladii dibuheshiisiinta iyo dibusocelinta dawladdii Soomaaliyeed. Waayahan macaanka iyo qaraarka isugu jira, ee ka dhacayay dunida iyo dalkaba, wuxuu ka dhaxlay waayo-aragnimo, bisayl wacyi iyo koboc aqooneed.

---

<sup>1</sup> Xaaladda 'Dagaalka Qabow' ama 'Cold War' waa xaalad colaadeed aanu dhicin dagaal culus oo toos ah, uuse jiro tartan aad u kulul. Dagaalka qabow wuxuu u dhexeeyay isbahaysigii Waddamada Bariga iyo isbahaysigii Waddamada Galbeedka. Isbahaysiga Bariga waxa horkacayay Midowga Soofiyeeti (USSR) ama Ruushka, waxay wateen mabda`a '*Hantiwadaagga*', waxayna ku tiirsanaayeen cududda Gaashaanbuurta 'Warsow'; halka waddamada Galbeedkana uu horkacayay waddanka Maraykanku, ay wateen mabda`a '*Hantigoosiga*', ayna ku tiirsanaayeen cududda Gaashaanbuurta 'NATO'. Dagaalka qabow waxa uu bilowday dagaalkii labaad ee dunida ka dib, waxaana uu dhammaaday markii uu burburay Midowga Soofiyeeti 1991.

Sidaas darteed, Shariif Saalax Maxamed Cali, wuxuu ahaa aqoonyahan buuxa oo isku darsaday aqoon iyo waayo-aragnimo. Waxa uu ahaa aqoonyahan nooca loo yaqaan “*mawsuucada*”. Waa aqoonyahan aan ku koobnayn takhasus keliya, balse kulansaday laamo kala duwan oo ka mid ah laamaha kasmada oo ay u raacdo waayo-aragnimo iyo xogogaalnimo aqoontiisa u kordhisay bisayl iyo qotodheeri.

Aqoontiisa baaxadda iyo qotada dheer ee afka, isirka, taariikhda iyo dhaqanka Soomaalida, waxaad ka dheehan kartaa qoraalka ‘*Dib-u eegid Guud Buugga Taariikhda iyo Luqadda Bulshada Soomaaliyeed*’. Qoraalkani waa warqad uu u qoray qoraaga buugga Prof. Cabdalla Cumar Mansuur.<sup>1</sup> Sidoo kale waxaad ka dheehan kartaa qoraalka kooban ee uu ka sameeyay Asharaafta Sarmaan ‘*Notes on Asharaf Sarman*’.<sup>2</sup>

Waxa uu ahaa xogogaal iyo khabiir taariikhdii iyo halgankii loo soo maray qoritaanka Far-Soomaalida. Waxa uu si faahfaahsan wax uga qoray hawlihii la qabtay qarnigii 19aad iyo 20aad. Waxa uu ka hadlay taariikhda

---

<sup>1</sup> Waa qoraal aan la daabicin.

<sup>2</sup> Waa qoraal aan la daabicin.

halgankii qoridda Far Soomaalida, culaysyada iyo caqabadaha lala kulmay, dadka kaalinta muuqata ka soo qaatay iyo noocyada faraha loo soo bandhigay in lagu qoro. Waxaa ka mid ah buuggiisa '*Halgankii loo Galay Qoridda Af Soomaaliga (1949-1972)*', waxaa kale oo arrintan wax ka taabanaya qoraalka 'Munaasabada Afartanguurada Qoridda Far-Soomaalida' oo ah lifaaqa (1) ee buuggan.

Aqoontiisa ka sokow, Shariif Saalax waxaa kaalintiisa cilmibaariseed kobciyay xilalkii maamulka aqoonta iyo cilmiga ee uu qaranka Soomaaliyeed u soo qabtay, sida: Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare, guddoomiyaha Guddiga Af-Soomaaliga, iyo kaalintii uu ku lahaa Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta. Xilalkani waxay sii xoojiyeen danayntiisa cilmibaarista iyo kagungaarista arrimaha Soomaalida.

Baaxadda iyo qotada Shariif Saalax waxaa laga dheehan karaa maktabaddiisii gaarka ahayd ee kala taalla Muqdisho iyo Qaahira. Waxaa yaalla kumanaan buug oo ka kala hadlaya laamaha kasmada iyo aqoonta, kuna kala qoran luqado kala duwan.

Shariif Saalax wuxuu yaqaannay, kuna hadli jiray, dhowr af. Waxaa ugu horreeya Af Soomaaliga oo ah afkiisii hooyo. Waxaa kale oo uu ku hadli jiray afafka Carabiga, Talyaaniga iyo Ingiriisiga. Afartaas luqadoodba wax buu ku qori jiray, wuxuuna leeyahay buugaag iyo qoraallo kala duwan, oo luqadahan ku qoran.

Sida uu tilmaamay Prof. Maxamed Xaaji Mukhtaar buugaagta iyo qoraallada uu Shariif Saalax qoray waxa ay u badan yihiin Af-Carabi, halka Af-Ingiriisigu soo gelayo kaalinta labaad, Af Soomaaliguna kaalinta saddexaad, waxaana ugu yaraa Af Talyaaniga.

### **4.3. Qoraallada Daabacan**

Sidii aan soo tilmaannay, Shariif Saalax Maxamed Cali waxa uu ahaa aqoonyahan iyo qoraa soo saaray buugaag, maqaallo iyo qoraallo ama dhiganeyaal kale intaba. Dhiganayaasha laga dhaxlay Shariifka, maadaama ay fara badan yihiin oo aan halkan lagu soo wada koobi karin, waxaan tusaale ahaan uga soo qaadanaynaa buugaagta kuwii ugu muhiimsanaa. Waxaan halka hoose ku xusi doonnaa buugaagtaas magacyadooda iyo mid walba dulucda wixii uu ku saabsanaa. Qoraallada kale magacyadooda iyo xogta daabacaaddooda waxaad ugu

tegi doontaa liiska tixraacyada, dhammaadka buugga. Sidoo kale, xogta buuxda ee daabacaadda buugaagta soo socota waxay ku faahfaahsan yihiin liiska Tixraacyada. Buugaagta iyo dhiganeyaasha kale ee Shariif Saalax waxay ku kala qoran yihiin afaf kala duwan (Soomaali, Carabi, Ingiriisi iyo Talyaani).

#### *4.3.1. Huddur and the History of Southern Somalia*

Buuggan oo ka mid ah kuwa ku qoran afka Ingiriiska, sida magaciisa ka muuqata waa buug taariikh ah. Wuxuu ku saabsan yahay guud ahaan taariikhdii Koonfurta Soomaaliya qaybo ka mid ah, gaar ahaanna magaalada Xuddur, magaalomadaxda Gobolka Bakool, ahna magaaladii uu ku dhashay Shariif Saalax Maxamed Cali. Dadaalka uu buuggan geliyay wuxuu muujinayaa Shariifku in uu guday abaalkii ay ku lahayd magaaladii uu ku dhashay. Taariikhda guud ka sokow, waxa uu qoraagu buuggan ku soo bandhigay qaybo ka mid ah taariikh-nololeedkiisii, sida: dhalashadiisii, koritaankiisii, waxbarashadiisii hoose iyo xitaa bilowgii shaqadiisa. Buuggani wuxuu tusaale fiican u yahay aqoonta iyo cilmiga ballaaran ee Shariif Saalax iyo xeeldheeridiisa falanqaynta bulshada.

*4.2.2. Halgankii loo Galay Qoridda Af-Soomaaliga (1949-1972).*

Buuggani waxa uu ka hadlayaa heerarkii uu soo maray dadaalka qoridda Far-Soomaalida iyo dadkii kala duwanaa ee kaalinta weyn ka soo qaatay. Shariif Saalax naf ahaantiisa ayaa ka mid ahaa dadkii dadaalkaas taariikhda ku lahaa.

Waa buug ka kooban hordhac, arar, laba qaybood iyo sawirro taariikhi ah.

Qaybta koowaad waxa uu ku soo qaatay dulmar guud ee hawshii Guddiga Qoridda Af-Soomaaliga iyo arrimo xilligan taagan oo la xiriira Af-Soomaaliga. Waxa kale oo uu kaga hadlay qorayaashii wargeysyada ku soo bandhigay maqaallo iyo qormooyin xilligii dadaalka loogu jiray qoritaanka Far-Soomaalida.

Qaybta Labaad waxa uu taariikhdooda oo kooban ku soo qaatay dad uu ku magacaabay jiilkii u soo halgamay gobannimada Soomaaliya. Sawirrada taariikhiga ah oo aan ka dhigi karno qaybta saddexaad ee buugga, waa sawirro la xiriira hawlihii ballaarnaa ee Af-Soomaaliga laga soo qabtay.

#### 4.3.3. أصول اللغة الصومالية في العربية: دراسة مقارنة (الجزء الأول).

Buuggani wuxuu hordhac u yahay cilmibaaris lagu sameeyay isbarbardhigga luqadda Carabiga iyo tan Soomaaliga. Juska ama qaybta koowaad waxa uu ka kooban yahay toddoba cutub [fasal]. Cutubka koowaad ee hordhaca ahi wuxuu falanqaynayaa Soomaaliya, dhinacyo taariikhi ah. Cutubka labaad wuxuu ka hadlayaa cilmibaarista lagu sameeyay Af-Soomaaliga labadii qarni ee 19aad iyo 20aad. Cutubyada 3aad iyo 4aad wuxuu kaga hadlayaa arrimo la xiriira dhinacyada cilmiga codadka (phonetics) iyo alifba'da Af-Soomaaliga iyo Carabiga, iyo isbeddellada codeed ee ku dhaca. Cutubbada 5aad, 6aad iyo 7aad waxay si mug leh u falanqaynayaan saamaynta iyo xiriirka ka dhexeeya Af-Soomaaliga iyo Af-Carabiga. Waxa uu buuggani muujinayaa in ay saameyn weyn ka dhaxeeyso ereyada afafka Carabiga iyo Soomaaliga; wuxuuna fure u noqon karaa cilmibaarisyada intaa ka sii qoto dheer kana faahfaahsan, oo lagu sameeyo xiriirka dhinacyada badan leh ee ka dhexeeya labadan af.

#### 4.3.4. المعجم الكشاف عن جذور اللغة الصومالية في العربية (المجلد الأول).

Buuggani waa qaamuus, wuxuu soo bandhigayaa erayo Af-Soomaali ah, oo asal ahaan ka soo jeeda Af-Carabi. Waxaa la daabacay mujaladka koowaad ee qaamuuskan, wuxuuna ka kooban yahay shan kun (5000) eray oo Af-

Soomaali ah. Sida hordhaca qoraaga laga fahmayo, buuggan waxaa la daabacay 1996.

Qaamuuskan wuxuu ku habaysan yahay habka taxnaanta erayada Af-Soomaaliga, wuxuuna ka kooban yahay 13 xaraf oo ka mid ah **alifba'da** Far-Soomaaliga, oo kala ah: a, b, c, d, dh, e, f, g, h, i, j, k, iyo kh. Erayga Af Soomaaliga ah waxaa raacsan macnahiisa, waxaana ku hor qoran, oo dhinaca midig kaga soo jeeda, erayga Carabiga ah ee uu asal ahaan ku arooro.

Intaa ka sokow, hordhaca qaamuuskani wuxuu xambaarsan yahay xog iyo aqoon qoto dheer oo uu kaga hadlay arrimo ay ka mid yihiin: dhismaha ereyada Afka Soomaaliga iyo isbedellada codeed ee ku dhaca; sooyaalka Afka Soomaaliga; habka laqbaha ee culimadu Af-Soomaali ugu fasiraan culuunta Islaamiga iyo Carabiga ee Af-Carabiga ku qoran, sida Tafsiirka Quraanka, Fiqhiga ama Axkaamta iwm.

Shariif Saalax waxa uu qoraalka buuggan bilaabay sannadihii 1970aadkii. Markii uu ka mid ahaa Guddigii Af-Soomaaliga ee sannadkii 1971kii ayuu dareemay in ay Af-Soomaaliga ay ku jiraan ereyo badan oo asalkoodu yahay Carabi. Buugga koowaad waxa uu qoruhu ebyay sannadkii 1989kii.

#### 4.3.5. *Xusuustebyo Eldoret: Shirweynihii Nabadaynta Soomaaliya 2002-2003*

Waa buug ka kooban waxyaabihii maalin noolba ka dhacayay shirweynaha nabadeynta Soomaaliya, ee lagu qabtay dalka Kiiniya 2002-2003. Qoraagu wuxuu buuggan ku soo gudbinayaa dhacdooyinkii maalinlaha ahaa ee shirka ee uu diiwaan geliyay. Buuggan waxaa ku xusan dhacdooyinka muddadii u dhexaysay 15 Oktoobar 2002 ilaa 28 Febraayo 2003. Maalmahaas oo tiro guud isku noqonaya 136 maalmood. Ujeedooyinka buugga loo qoray waxa uu qoruhu ku tilmaamay in berri-ka-maalin marka la damco in shirarkii nabadeed ee Soomaaliya xilligii burburka loo qabtay wax laga qoro, gaar ahaan shirkii lagu qabtay Eldoret iyo Mbaghati in la kaashado xusuusqorkan. Dhacdooyinka buuggan ku qoran waxa ay ka dhasheen waxyaabihii ay qoraha indhihiisu qabteen iyo waxa uu shaqsi ahaan la kulmay iyo fikradihii uu ka qaatay.

#### 4.3.6. *ملحمة النواب الأحرار الصوماليين 2009-2006 ضد الاحتلال الاثيوبي*

Buuggani, isna, waa xusuusqor soo tebinaya halgankii siyaasadeed ee xildhibaannada Soomaaliyeed ee la baxay magaca “*Baarlamaanka Xorta ah*”, uuna ka midka ahaa Shariif Saalax, ay kaga horyimaaddeen soogelitaankii

Itoobiya ee qaybo ka mid ah gobollada Koonfureed ee Soomaaliya muddadii u dhexaysay 2006 ilaa 2009kii. Waa buug soo gudbinaya dhacdooyinkii maalinlaha ahaa ee qoraagu diiwaangeliyay ee la xiriira xaaladaha siyaasadeed ee ku aaddanaa go'aannadii iyo dhacdooyinkii muddadii u dhexaysay 1/1/2006 ilaa 14/2/2007. Waa muddo hal sanno iyo bil iyo bar ah.

# CUTUBKA 5<sup>aad</sup>

## **Aragtidii iyo Fikradihii Shariif Saalax Xagga Af-Soomaaliga iyo Cilmibaarista**

*Waxaa laynaga doonayaa inaan dadaal badan u hurno  
sidii hodontooyooyinkeenna dihan ula soo bixi lahayn,  
uguna intifaaci lahayn.*

*Shariif Saalax*

### **5.1. Arar**

Shariif Saalax Maxamed Cali, waxa uu lahaa aragtiyo iyo fikrado ku aadan arrimo xilligan taagan. Cutubkan waxaan isku daynay inaan ku ururinno aragtiyada iyo fikradaha Shariif Saalax ee la xiriira gaar ahaan Af Soomaaliga iyo guud ahaan cilmibaarista Soomaaliyeed.

Aragtiyadan iyo fikradahan waxaan ka soo dhex saarnay qoraallo kala duwan, oo isugu jira khudbooyin uu jeediyay munaasabado kala duwan, warqado uu u diray dad kala duwan, iyo qoraallo kaleba. Qoraalladan oo dhammaystiran waxaan ka dhignay lifaaqa buugga.

Habayn iyo isu-ururin ka dib, waxaan ka badin waynay inaan aragtiyada iyo fikradaha ku ururinno lix qodob, oo kala ah:

- i. Af-Soomaaliga iyo Horumarinta Adeegsiisa
- ii. Cilmiyaynta Af-Soomaaliga
- iii. Af Soomaaliga Guud iyo Lahjadaha
- iv. Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta
- v. Adeegsiga Afafka Waa loo Wada Baahan yahay
- vi. Kaalinta laga Sugayo Hay'adaha Cilmibaarista

Lixdaas arrimood mid walba murtida kooban ee fikradda uu ka qabay Shariif Saalax waxaan ku soo koobnay sida soo socota.

## 5.2. Af-Soomaaliga iyo Horumarinta Adeegsiisa

### 5.2.1. Af Somaaligu waa aalad horumarineed

Af Soomaaligu wuxuu la mid yahay khayraadka ay ummadda Soomaaliyeed haysato, haddii ay dheefsatana ay horumar ku gaarayso; haddiise ayna waxba ka qaban ay weligeed khayraadkaa ka qatanaanayso.<sup>1</sup>

Shariif Saalax waxa uu arkayay in Af Soomaaligu noqon karo qalab loo adeegsado horumarinta bulshada, dhinacyada heerka nolosha, aqoonta iyo wacyiga dadweynaha intaba. Sidaas darteed, waxa uu rumaysnaa in aan laga fursanayn in Af Soomaaliga laga dhigto qalab horumarineed.<sup>2</sup>

Haddaba, si Af-Soomaaligu u guto kaalinta horumarineed waa in afka laga shaqeeyaa, lana kobciyo adeegsiisa tiro iyo tayoba.<sup>3</sup>

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

<sup>3</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

### 5.2.2. Yididiilo iyo werwer isku dhafan

Marka loo kuurgalo xaaladda uu Af Soomaaligu ku sugan yahay xilligan, Shariif Saalax waxa ay ugu muuqatay mid yididiilo iyo werwer isku dhafan ah.<sup>1</sup>

Dhanka yididiilada leh, Af-Soomaaligu wuu sii korayaa, wuuna sii horumarayaa. Waxyaabaha yididiilada xoojinaya waxaa ka mid ah warbaahinta iyo idaacadaha badan ee Af Soomaaliga ku hadla. Si kaalintaa warbaahinta loo sii kobciyana, waxaa qasab noqonaysa in laga shaqeeyo sidii loo tayayn lahaa sida warbaahintu u adeegsato Af Soomaaliga.<sup>2</sup>

Kaalimaha lagu farxo, dhiirrigelintana mudan waxaa ka mid ah kaalinta muuqata ee u adeegidda Af Soomaaliga ay ka qaadatay dawladda Jabuuti oo uu horkacayo madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle. Jabuuti waxay

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 1 ‘Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 1 ‘Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida’  
iyo lifaaq 3 ‘Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta’

noqotay meel loogu soo hirto u adeegidda Af Soomaaliga.<sup>1</sup>

Dhanka werwerka leh ee xaaladda Af Soomaaligu ku sugan yahay, waxa weeye in qaranjabkii Soomaaliya ku dhacay uu dhaawac u gaystay kaalintii Af Soomaaligu ku lahaa nolosha, isla markaana uu meesha ka baxay daryeelkii dawladnimo ee uu u baahnaa.<sup>2</sup> Shariif Saalax oo tilmaamaya kaalintan maqan waxa uu yiri:

*In kastoo buugaag iyo qoraallo badan la qoray,  
haddana ma jirin xarumo la socda dadaallada la  
geshay qoraalladaa, mar haddii ay suuleen  
Wasaaradihii iyo Akadeemiyadii ku hawlanaa  
horumarinta afka.*

Waxaa iyana werwerka leh, khilaafka iyo colaadda siyaasadeed ee Soomaaliya ka jirtay muddadii la soo dhaafay saamaynta ay ku yeelatay aragtida iyo mawqifka

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 1 ‘Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

laga joogo Af Soomaaliga. Mar uu arrintan tilmaamayayna waxa uu yiri:<sup>1</sup>

*Afkeennii la rasmiyeeyay, dib u dhac baa meelo badan kaga yimid, markii la siyaasadeeyay, loona yeelay midab qabiil. Dadka qaarkii [waxa] ay u arkayaan in af-gurigoodu uu mudnaan ka leeyahay, ama xitaa jees-jees iyo dhaadhaajin laga dhigto. Kuwo kalena yiraahdaan afkannaga Af-Soomaali ma ba aha, iyagoon caddayn cilmi ah haysan.*

Si dhanka yididiilada leh loo sii xoojiyo, dhanka werwerka lehna wax looga qabto, waxa aan laga fursanayn in shaqo iyo hawl la qabto. Shariif Saalax meelo qoraalladiisa ka mid ah ayuu ku tilmaamay hawsha maanta innagala gudboon Af Soomaaliga, ee ay tahay in aan isu taagno.

### *5.2.3. Hawsha Maanta Taagan*

Afku wuxuu ka mid yahay hodantinnimada Ilaahay (SW) ku galladaystay ummadda Soomaaliyeed. Waxaase loo baahan yahay in hawl laga qabto si aan uga faa'iidaysanno hodantinnimada afka, uguna intifaacno.

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 3 'Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta'

Si looga shaqeeyo horumarinta Af Soomaaliga, waxaa loo baahan yahay in la qabto hawlo dhowr ah. Hawlahaas, kuwooda uu Shariif Saalax tilmaamay waxaa ka mid ah qodobbadaan:<sup>1</sup>

- i. Midaynta afka,
- ii. Dejinta naxwe lagu dhaqmo,
- iii. Cilmiyaynta afka,
- iv. Lahjadaha oo ku darsama afka, iyo
- v. Qaayibidda afka iyo farta Soomaaliga.

### **5.3. Cilmiyaynta Af-Soomaaliga**

Si adeegsiga afku ugu taabbagalo si buuxda, waxaa lagama maarmaan ah in loo diyaariyo baahida luqadeed ee dhinacyada kala duwan ee nolosha. Si uu Af Soomaaligu kaalintan u buuxiyana waxa uu u baahan yahay hawl uu ku magacaabay Shariif Saalax '*Cilmiyaynta Af-Soomaaliga*' iyo in afka la gaarsiiyo '*heer isku*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 1 'Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida'

*filnaasho*'.<sup>1</sup> Hawshani waa mid ka mid ah hawlaha kala duwan ee afkeennu u baahan yahay.

Hawshan cilmiyaynta Af-Soomaaligu waxay leedahay dhinacyo dhowr ah, waxaana ka mid ah:<sup>2</sup>

- a. Ereybixinta
- b. Turjumidda
- c. Sal u dejinta naxwaha
- d. Sarfaha Af Soomaaliga
- e. Culuunta luqadda ee kale
- f. Casriyaynta ereyada iyo tacaabiirta aan adeegsanno.

Hawlahani waxay gacan muuqata ka gaysanayaan kobcinta iyo taabbagelinta '*Af Soomaaliga Guud*'.

Af Soomaaligu weligiiba qaabka uu maanta yahay ma ahayn, ee isbedello taxane ah (evolution) ayaa ku dhacay. Haddaba, marka la qabanayo hawshan '*Cilmiyaynta Af Soomaaliga*', waxaa jira tabo iyo aalado ay tahay in laga

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

faa'iidaysto. Tabaha iyo aaladaha uu Shariif Saalax tilmaamay waxaa ka mid ah:<sup>1</sup>

- a. Lahjadaha Af Soomaaliga
- b. Afafka Kushitigga.
- c. Abtiris (genealogy)
- d. Rug-tiris (toponym).

Sida aan qoraallada qaarkood ku aragnay, arrimahan qaarkood wax buu ka tilmaamay ama wuu yara faahfaahiyay. Qodobbada 'c' iyo 'd' waxa uu kaga hadlay qoraal aan la daabicin oo la yiraahdo '*Transformation of Somali Language Through the Centuries*'. Marka tabahan la adeegsanayo, waa in tirada lagu daraa isbedellada codeed ee erayada ku dhacay muddada dheer ee jiilba jiil u soo tebinayay.

Dhowr qoraal, oo lifaaqa buuggan ka mid ah, ayuu Shariif Saalax kaga hadlay kaalinta ay lahadaha kala duwan ee Af Soomaaligu ka qaadan karaan hawshan. Meelaha

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 2 'Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada'

qaarkood si kooban ayuu ugu tilmaamay, meelaha qaarna si yara faahfaahsan ayuu ugu banbaxay.<sup>1</sup>

Tusaale ahaan, lahadaha kala duwan ee Af Soomaaligu waxay kaalin ka qaadan karaan in erayada Af Soomaaliga si buuxda loo fahmo. Tusaale ahaan, ereyo ku jira ‘Af Soomaaliga Guud’ qaarkood si buuxda looma fahmi karo haddaan loo noqon lahadaha kala duwan. Erayada ‘*baadifad, horseed, minfiiq, minxiis*’ waxay ku jiraan lahadada ‘Maxaatiri’ oo saldhig u ah Af Soomaaliga guud, si buuxda si loogu fahmo waa in loo noqdaa lahadada ‘maay’. Sidoo kale, erayo ku jira lahadada ‘Maay’ sida ‘*inanlayaal, daacqurun*’ iwm, si buuxda looma fahmi karo haddaan loo noqon lahadada maxaatiri.<sup>2</sup>

#### **5.4. Af Soomaaliga Guud iyo Lahjadaha**

Inkasta oo Af Soomaaligu leeyahay lahadada kala duwan, sida af kastaaba u leeyahay, haddana, waxaa lagama

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’  
iyo lifaaq 4 ‘Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

maarmaan ah jiritaanka ‘Af Guud’, oo noqda midka sida rasmiga ah loo wada adeegsado.

#### ***5.4.1. Lahjadaha Af-Soomaaliga***

Haddaan kormar guud ku samayno lahjadaha kala duwan ee Af Soomaaligu leeyahay, tiro ahaan way ka badan yihiin 25 lahjadood. Sida uu tilmaamay Prof. Cabdalla Cumar Mansuur, waxaa la isu raacin karaa dhowr kooxlahjadeedyo, waxaana ugu muuqda afar kooxlahjadeedyo, kala ah:<sup>1</sup>

- i. *Lahjadaha Maxaadtiri ama Maxaa*, oo ka kooban toban lahjadood, waxaa looga hadlaa dhammaan deegaannada Soomaaliyeed, marka laga reebo inta u dhaxaysa labada webi ee Shabeelle iyo Jubba.
- ii. *Lahjadaha Maay ama Maayteri*, oo ka kooban shan lahjadood, waxaa looga hadlaa deegaanka Koonfur Galbeed Soomaaliya, inta u dhexeeya labada webi Shabeelle iyo Jubba.
- iii. *Lahjadaha Digil*, waa shan lahjadood oo kala duwan, waxaana ku hadla beelaha: Garre, Jiiddo, Tunni,

---

<sup>1</sup> Cabdalla Cumar Mansuur ‘Midaynta iyo Horumarinta Af-soomaaliga’. Ku jira buugga ‘Afmaal: Proceedings of the Conference on the 40th Anniversary of Somali Orthography’ bb. 17-18

Dabarre iyo Oroole;<sup>1</sup> oo ku teedsan webiyada Shabeelle iyo Jubba ee Koonfurta Soomaaliya.

- iv. *Lahjadaha Maa-Dhati/Ashraaf*, waa laba lahdood, waxaana looga hadlaa degmada Shangaani (Muqdisho) iyo magaalada Marka.

Lahjadaha Maxaatiri ayaa juqraafi ahaan ugu ballaaran lahdadahan uu Af Soomaaligu ka kooban yahay, waxaana lagaga hadlaa deegaannada Soomaaliyeed, marka laga reebo inta u dhaxaysa labada webi ee Shabeelle iyo Jubba.<sup>2</sup>

Marka laga hadlayo afka guud, Shariif Saalax qoraalladiisa waxa uu adeegsaday dhowr magac oo kala ah ‘*Common Somali*’, ‘*Standard Somali*’ iyo ‘*Total Somali*’; intaba isku ujeeddo iyo isku macne ayuu u adeegsaday. Halkan, waxaan ku adeegsannay ‘*Af Soomaali Guud*’ oo isla ujeeddadaas looga gol leeyahay.

Aragtida Shariif Saalax waxa ay ahayd in ‘Af Soomaaliga Guud’ uu lagama maarmaan yahay. Taasina keenayso in

---

<sup>1</sup> Waxaa muuqata in adeegsiga Af Oroole uu sii yaraanayo, uuna ku sii milmayo Af Dabarre.

<sup>2</sup> Waxaa iyana jira lahdado jacbur ah, oo ka baxsan afartan kooxlahadood.

la doorto lajhad saldhig u noqota, deedna lajhadaha kale dhamaystiraan. Mar uu arrintan ka hadlayayna waxa uu yiri:<sup>1</sup>

*Waxaa lagama maarmaan ah in dalka rasmi u ahaato hal lajhad keli ah, ama middii hore loo rasmiyeeyay, oo saldhigga looga dhigay waxbarashada, warbaahinta iyo qoraallada rasmiga ah.*

Aragtidani waa mid ay ka siman yihiin luqadaha kala duwan ee dunidu. Luqad kastaa waxa ay leedahay lajhad kala duwan, mid ka mid ah ayaana saldhig u noqota afka guud ee ummaddaasi ka dhexaynaya.

Marna lagama fursan karo kala doorashada lajhadaha. Haddiise laga maagto kaladoorashadaas, oo ay dhacdo in lajhaduhu is wada garab yaacaan, waxaa meesha ka baxaya ‘af guud’ oo si dhex ah loo wada adeegsado. Isagoo arrintan tilmaamayana wuxuu yiri:<sup>2</sup>

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

*Haddii lays dhex shaaciyo ku dhaqanka lahjado badan, [oo] aan loo kala ab-dayin, waxaa dhalanaysa fawdo luqadeed iyadu is dabrayso, misna is kufinaysa oo is tirtiraysa.*

Sida aynu la wada soconno, hawlihii muddada soo taxnaa ee Af Soomaaliga laga soo qabtay, waxaa ka samaysmay in uu bilaabmay samaysanka ‘Af Soomali Guud’ oo ay saldhig u tahay lahjadda ‘Maxaatiri’. Tani waa tallaabo hore loo qaaday, miraheedana la arkay. Laakiin xaaladda colaadaha sokeeye iyo khilaafka siyaasadeed wuxuu dhalay dareen iyo dood dibudhac keeni karta. Shariifku arrintan wuxuu ka yiri:<sup>1</sup>

*Afkeennii la rasmiyeeyay, dib u dhac baa meelo badan kaga yimid, markii la siyaasadeeyay, loona yeelay midab qabiil. Dadka qaarkii ay u arkayaan in afgurigoodu uu mudnaan ka leeyahay, ama xitaa jees-jees iyo dhaadhaajin laga dhigto. Kuwo kalena yiraahdaan afkannaga Af-Soomaali ma ba aha, iyagoon caddayn cilmi ah haysan.*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 3 ‘Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta’

Waa in laga shaqeeyo in lahadaha Af Soomaaligu noqdaan kuwo kobcinaya afka guud, oo aan laga dhigin kuwo ka hor imanaya, waxaana uu yiri:<sup>1</sup>

*Lahjadaha oo ku darsama afka guud: ogaada haddii ay lahaduhu raacaan oo ay ku milmaan afka waxa uu noqonayaa hodan, haddiise ay ka hor yimaadaan ama ay hareer socdaan way hagar daameynayaan.*

Mar kale oo uu ka hadlayay sida lahadaha ‘Maay’ iyo “Maxaatiri” ay Af Soomaaliga guud u hodmin karaan, waxa uu yiri:<sup>2</sup>

*Sidaa darteed, labadan lahadood way isbuuxinayaan, waxayna muujinayaan in Af-Soomaaligu lahad goboleedyada ka weyn yahay, loona baahan yahay in lahadaha la barto, lagalana soo baxo hodontooyada luqadeed [ee] mid walba ku kaydsan, annagoo hadafkeennu yahay gaaridda TOTAL SOMALI.*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 1 ‘Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

#### 5.4.2. Lahjaduhu waa garaangar is dhamaystiraysa

Lahjadaha kala duwan ee Af Soomaaligu leeyahay waxa ay qayb ka yihiin hodantinnimada afka, waana kuwo iyagu is ebya, oo isxoojiya, oo sida gaarangarta isu buuxinaya. Isagoo arrintan sii adkaynayana Shariif Saalax waxa uu yiri:<sup>1</sup>

*Lahaanshaha Af-Soomaaliga lahjado kala duwan, xeerar iyo xirribooyin farsamo, hub qaadasho, aqoon cimilada deegaano kala raacsan, soor jaad-jaad ah, [intuba] waa u hodantooyo hiddaha iyo afka Soomaaliga.*

In lahadaha Soomaaliyeed yihiin garangar is buuxinaysa, waxyaabaha innoo sii caddaynaya waxaa ka mid ah, macnaha buuxa ee erayada lahadaha qaarkood waxaa la fahmi karaa marka loola noqdo lahad kale. Arrintan isaga oo faahfaahinaya Shariif Saalax waxa uu yiri:<sup>2</sup>

*Waxaa jira ereyo badan, oo ka buuxa qaybta MAXAA aan la garan karin haddaan loo cuskan lahadaha*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 4 ‘Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

*MAAY. Waxaa ka mid ah SEEDDA horseed iyo FADDA baadifad. Dhinaca MAAY waxaa ku jira ereyada INANLAYAAL, kumana jiro ereyga INAN (Raxaweyn baan lahayn, Garraha waa leeyahay inan, ama Garraha qaarkii. Wuxuu leeyahay oo kale Garrahu elen (gabar)- Mauro Tosco: schizzo Gramm. Del Dialetto Karre di Qoryooley, 1989. I) Waxaa kaloo ka mid ah MY (Rxn): HERGEL (HARGAL), HERGELLEE=nabad ma ku hargashay? Haddana lahjaddan ma laha ereyga HAR=HER, marka HOOS loola jeedo.Tusaalooyinku waa badan yihiin. Sidaa darteed, labadan lahjaddood way isbuuxinayaan, waxayna muujinayaan in Af-Soomaaligu lahjado goboleedyada ka weyn yahay, loona baahan yahay in lahjadhaha la barto, lagalana soo baxo hodontooyada luqadeed [ee] mid walba ku kaydsan, annagoo hadafkeennu yahay gaaridda TOTAL SOMALI.*

Hodantinnimada Af Soomaaliga guud waxa ay ku jirtaa lahjadhahaas iyo sida uu uga faa'iidaysto.<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 1 'Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida'

### 5.4.3. Maay iyo Maxaatiri

Lahjadaha ‘Maay’ ama ‘Maayteri’ iyo ‘Maxaa’ ama ‘Maxaatiri’ waa labada lahjaddood ee Af Soomaaliga u waaweyn, marka loo fiiriyo deegaanka ay ku fidsan yihiin iyo tirada dadka ku hadla.

Shariif Saalax waxa uu si cad u qeexay in lahjadda ‘Maay’ ay ka tirsan tahay Af Soomaaliga. Taasina ku qotonto cilmibaarista luqadeed “*afka Maayga baarista luqadeed ee ilaa iyo haatan la gaaray waxay caddaynaysaa in uu yahay lajhad*”. Waxaana uu sheegay in lahjadhaha ‘Maay’ iyo ‘Maxaadtiri’ ay ku kala duwan yihiin 10% keliya. Waxaana uu ku sii daray in fahmiddoodu u baahan tahay keliya fiirsasho degan.<sup>1</sup>

*Qofkii si miyir leh u dhageysto lahjadda Maay iyo Maxaa si sahal ah ayuu ku fahmi karaa. Bal u fiirso tusaaleyaashan: arra (carro), goriya (goroyo), miir (miyir), widaang (wadaan), dhug (dhug).*

Inkasta oo labada lahjaddood sidaa isugu dhow yihiin, ayaa haddana dadka qaarkii xafiiltanku la fogaadaa, oo “*Kan ku hadlaya Maxaada wuxuu yiraahdaa "afka shimbiraha*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 4 ‘Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga’

*miyuu ku hadlayaa" markuu maqlo afka Maayga. Maaygana marka uu isyeelyeelayo wuxuu yiraahdaa QALAQ QALAQ ma af baa.*<sup>1</sup>

Waxa uu Shariif Saalax ka digay in erayga 'Maay' la labanlaabo, oo laga dhigo 'Maay Maay'; labanlaabiddan oo loo qaadan karo xaqiraad.<sup>2</sup>

Arrinta la xiriirta qoridda farta Af Maayga, Shariif Saalax waxa uu ku taliyay in qoritaankan ay saldhig u noqoto alifba'da Af Soomaaliga Guud ee xilligan la isticmaalo, ka dibna in lagu daro dhawaaqyada lagama maarmaanka ah ee maayga u gaarka ah. Waxaana uu alifba'da Maayga ka soo jeediyay talooyin faahfaahsan, isagoo ka duulaya waayo-aragnimadiisii qoritaanka far Soomaalida.<sup>3</sup>

Aragtida iyo talooyinka Shariif Saalax, marka arrintan laga hadlayo, tixgelin gaar ah ayay mudan yihiin, dhowr sababood dartood. Waa mide, wuxuu ahaa guddoomiyihii guddiga Af Soomaaliga ee xilligii sida rasmiga ah loo go'aamiyay qoritaanka Far Soomaalida. Waa tan labaade, si fiican ayuu Af Soomaliga u yaqaan, weliba lahjaddiisa

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 4 'Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga'

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 4 'Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga'

<sup>3</sup> Fiiri lifaaq 4 'Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga'

aasaasiga ah waa lahjadda Maayda Xuddur oo la yiraahdo waa midda ugu takhtisan, kuwa lagaga hadlo arlada Raxanweyn oo dhan. Waa tan saddexaade, waa khabiir waayo-arag ah ee dhanka cilmi-afeedka (linguistics).

Sidoo kale, Shariif Saaalax wuxuu ku taliyay in idaacaduhu ay xoojiyaan adeegsigooda ‘Maay’ga, gaar ahaan idaacadaha caalamiga ah sida BBC-da. Waayo, waa lahdad ay ku hadlaan qiyaastii shan milyan oo qof.<sup>1</sup>

#### **5.4.4. Horumarinta Lahjadaha**

Inkasta oo loo baahan yahay ‘Af Soomaali Guud’, haddana taasi maaha inay meesha ka saarto lahdadaha kala duwan ee Af Soomaaliga iyo kaalinta ay nolosha ku leeyihiin. Waliba, waxaa loo baahan yahay in cilmibaaristu aysan ku ekaan afka guud oo keliya, ee ay tahay in lahdadahuna helaan mudnaantooda cilmibaariseed. Arrintan isagoo xoojinaya, Shariif Saalax waxa uu yiri:<sup>2</sup>

*Daraasaad cilmiyeed oo Af-Soomaaliga lahdadihiisa lagu baarayo, laguna ogaanayo khasaa’istooda*

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 4 ‘Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga’

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 2 ‘Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada’

*deegaaneed, oo gaarka u ah, waa hodontooyo Af-Soomaaliga u soo xerootay, mudanna taageero iyo garabsiin.*

## **5.5. Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta**

Waxa uu Shariif Saalax rumaysnaa in idaacadaha ku hadla Af-Soomaaligu ay qayb-libaax ka qaadan karaan xoojinta adeegsiga Afka. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in warbaahinta laga tayeeyo dhanka adeegsiga Af-Soomaaliga, loona hawlgalo inay adeegsadaan Af-Soomaali tayaysan.<sup>1</sup>

Warqad uu u qoray masuuliinta qaybta Af Soomaaliga ee VOA, waxaa uu ka hadlay arrimo ay ka mid yihiin: kaalinta ay idaacadaduhu qaadan karaan, dhaliilaha ka muuqda adeegsigooda afka, iyo sidii dhaliilahaa wax looga qaban lahaa. Dhaliilaha la xiriira adeegsiga afka, ayuu qaarkood tilmaamay Shariifku, waxaana ka mid ah kafiirsasho la'aanta xulashada erayo ku habboon macnaha iyo fariinta ay gudbinayaan.<sup>2</sup>

Haddaba, si loo tayeeyo adeegsiga Af-Soomaaliga, loona

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 3 'Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta'

<sup>2</sup> Fiiri lifaaq 3 'Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta'

casriyeeyo, wuxuu soo jeediyay talooyin ay ka mid yihiin:<sup>1</sup>

- a) in la diyaariyo/ururiyo eraybixin si wanaagsan u dabooli karta ereyada qalaad ee la micnaynayo, lagana dhigo eray-koobe yar (glossary) si loogu adeegsado warbaahinta.
- b) In warfidiyeennada, aqoonta guud ka sokow, loo sameeyo tababarro joogto ah (in service training).
- c) In idaacaduhu qabanqaabiyaan tartansuugaaneed ah ‘sheekooyin gaagaaban’, kuwooda wanaagsanna la abaal mariyo, idaacadahana laga siidaayo.

## **5.6. Adeegsiga Afafka Waa loo Wada Baahan Yahay**

Sida aynu hore u soo sheegnay, Shariif Salaax wuxuu yaqaanay kuna hadli jiray dhowr af. Waxaa ugu horreeya Af Soomaaliga oo ah afkiisii hooyo, Maay iyo Maxaatiri labadaba. Waxaa kale oo uu ku hadli jiray afafka Carabiga, Talyaaniga iyo Ingiriisiga. Afartaas luqadoodba wax buu ku qori jiray, wuxuuna leeyahay buugaag iyo qoraallo kala duwan, oo luqadahan ku qoran. Buugaagta iyo qoraallada uu Shariif Saalax qoray waxa ay u badan

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 3 ‘Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta’

yihiin Af-Carabi, waxaana ugu yaraa Af Talyaaniga, halka Af Soomaaliga iyo Af-Ingiriisiguna u dhexeeyaan.

Shariifku wuxuu ka duulayay mabda' ah in luqaduhu yihiin aalad wax lagula xiriiro, sidaas darteedna ay tahay in laga wada faa'iidaysto.

Isagoo Soomaali ah, Af Soomaaligana si fiican wax ugu qora, ayuu afaf kale doorbiday inuu qoraalladiisa qaarkood ku soo baxaan. Isagoo yaqaan afaf caalami ah, oo Ingiriisi iyo Carabi ugu horreeyaan, ayuu doorbiday in qoraalladiisa qaar uu ku qoro Af Soomaali. Midkoodna Shariif Saalax dhib uma arkayn, waana siday tahay.

## **5.7. Kaalinta laga Sugayo Hay'adaha Cilmibaarista**

### *5.7.1. Milicsi*

Hay'adaha cilmibaaristu kaalin ayay ku leeyihiin horumarinta dhinacyada kala duwan ee nolosha bulsho kasta.

Sida aan hore u soo marnay, 1970aadkii Shariif Saalax waxa uu kaalin muuqata ka soo qaatay aasaasidda iyo taabbagelinta hay'adaha cilmiga iyo cilmibaarista

Soomaaliya, ha noqoto guddigii Af Soomaaliga, Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta; iyo weliba isaga oo wasiir ka soo noqday Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Xilligan la joogo, Shariif Saalax waxa uu dareensanaa in hay'adaha cilmibaaristu ay kaalin ku yeelan karaan hawlaha horumarinta nolosha ee taagan. Hay'adaha uu qoraalladiisa ku muujiyay waxaa ka mid ah: Akademiya-Goboleedka Af Soomaliga (AGA) iyo Ururka Cilmibaarista Soomaaliyeed (Somali Studies International Association-SSIA).

### **5.7.2. Kaalinta Akademiya-Goboleedka Af soomaliga**

Munaasabaddii ballaarnayd ee loo sameeyay xuska afartan-guuradii qoritaanka farta Soomaaliga, oo lagu qabtay Jabuuti bishii Diisambar 2012, waxaa ka dhashay fikrad ah in la aasaaso hay'ad ka shaqaysa ilaalinta iyo hrumarinta AfSoomaaliga, kana dhexaysa gayiga Geeska Afrika, ee dadka Soomaaliyeed deggan yihiin, iyo Soomaalida qurbaha ku nool intaba. Guddi khubaro ah ayaa loo saaray inay muddo lix bilood ah soo darsaan sida fikraddan loo dhaqan galin karo. Ka dibna shirweyne kale oo Jabuuti la isugu tagey ayaa bishii Juun 2013 lagu saxiixay Heshiiskii hay'addan lagu aasaasay ayna wada

saxiixeen masuuliyadii ka wakiilka ahaa dowladaha iyo maamullada ka jira gayiga Soomaalida ee Geeska Afrika. Waxaa loo bixiyey Akademiye-Goboleedka AfSoomaliga (AGA).

Shariif Saalax Maxamed Cali waxa uu ka mid ahaa maqaawiirtii saldhigga u noqday aasaasidda Akadeemiyadan.

Waxa uu Shariifku rumaysnaa in Akademiye-Goboleedka AfSoomaaligu ay kaalin wax-ku-ool ah ka qaadan karto hawsha cilmibaarista iyo horumarinta afka iyo dhaqanka. Si ay hawshaas u gudatana in loo baahan yahay inay xiriir wadashaqayneed la yeelato hay'adaha cilmibaariseed, ee ay hawli kala dhexayn karto, ee AfSoomaaliga iyo cilmibaaristiisa danaynaya. Talooyin arrintan ku aaddan ayay xambaarsan tahay warqad uu u diray Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka, Dr Maxamed Daahir Afrax; ka eeg lifaaqa 5aad ee buuggan.<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup> Fiiri lifaaq 5 'Dhawr Fikradood oo ku Saabsan Hawlaha Akadeemiyada AGA'

### 5.7.3. Ururka Cilmibaarista Soomaaliyeed

Ururka Caalamoga ah ee Cilmibaarista Soomaaliyeed (*Somali Studies International Association-SSIA*) waxaa la aasaasay 1978, waana fagaare aqoonyahanku ku soo gudbiyaan cilmibaarista ay ka sameeyaan arrimaha Soomaalida. Ururkani wuxuu leeyahay shirweyne saddexdii sannaba mar dhaca.<sup>1</sup>

Aragtida Shariif Saalax waxay ahayd in ururkani noqon karo, ayna tahay inuu noqdo, fagaare lagu lafaguro arrimaha muhiimka ah ee dalka; wuxuuna arrintan ka yiri:<sup>2</sup>

*Waxaan u baahannahay in SOMALI STUDIES nagala taliyaan arrimaha deg-degga ah [ee] dalku u baahan yahay xagga siyaasadda, fikrado ahaan, dhaqaalaha, tacabka beeraha, horumarinta Af-Soomaaliga, ku baraarujinta dadka in murqhooda maalaan, iskana daayaan gacanhoorsiga iyo ku tiirsanaanshaha kaalmo aadane kale IWM. Ma aha Somali Studies (iyadoo ay mahad mudan yihiin aqoonyahannada weli ku taxan fagaarahan) inay noqdaan meel lagu baashaalo, aan dalka arrimihiisa kulkulul ku xirnayn.*

---

<sup>1</sup> <http://somalistudies.org/>

<sup>2</sup> 'Dib-u eegid Guud Buugga Taariikhda iyo Luqadda Bulshada Soomaaliyeed', qoraalkan lama daabicin.

# CUTUBKA 6<sup>aad</sup>

## Geeri Culus iyo Baroordiiq

### 6.1. Geeri murugo leh

Allaha u naxariistee, Danjire Shariif Saalax Maxamed Cali waxa uu ku geeriyooday magaalada Muqdisho 21 Maarso 2014, oo ahayd maalin Jimce ah, markay saacaddu ahayd 9:45 barqonnimo. Nin weyn ayaa halkaa ku baxay!

Danjire Shariif Saalax, waxa uu xanuun wadnaha ahi ku soo booday bishii Oktoobar 2013, maalintii Ciidda Arrafo 1434. Waxaa la geeyay isbitaalka “Deva Hospital”<sup>1</sup> oo Muqdisho ku yaalay. Isbitaalku wuxuu u sheegay inuu qalliin wadnaha oo degdeg ah uu u baahan yahay, waxayna ku taliyeen in dibadda degdeg loogu qaado.

---

<sup>1</sup> Isbitaalka Deva ‘*Deva International Training and Research Hospital*’ waxaa la xiray July 2016, goobtiisiina waxaa laga dhigay qayb ka mid ah Isbitaalka Erdogan ‘*Erdoğan Research and Training Hospital*’ (Ex-Digfeer), ka dib markii la joojiyay hawlihii ay hay`adda “Nile Organisation” ka waday Soomaaliya bishii July 2016, sababo la xiriira inqilaabkii milatari ee fashilmay 15/7/2016 ee ka dhacay dalka Turkiga.

Waxaa la geeyay isbitaal ku yaalla Nairobi, Kenya. Ka dibna waxaa la sii geeyay dalka Turkiga, wadnaha ayaana qalliin culus looga sameeyay. Ka dib wuu soo roonaaday, dalka ayuu ku soo noqday 26/1/2014, wuxuuna bilaabay inuu hawlmaalmeedkiisa qabsado.

Bishii Maarso 2014 ayaa mar kale Shariif Saalax lagu soo booday, madaxa ayaana dhiig kaga furmay. Tobaneeyo maalmood ayuu xanuunkan la liitay, laguna baxnaaninayay isbitaalka 'Deva Hospital'. Isbitaalkan ayuuna ku xijaabtay subaxii Jimcaha 21/3/2014, 9:45 am, oo ku beegnayd 20 Jumaadul-Awal 1435. Marxuumka Ilaahay haw naxariisto, oo ha u nuuro xabaasha!

Ooridii marxuumka, marwo Caasho Cabdi Diini waxa ay sheegtay in Shariif Saalax uu Ilaahay –sw- ka baryi jiray in aanu ku dilin mowtuqaflo iyo xabbad ku dhacda midna. Ilaahay –sw- wuu ka aqbalay ducadaas; labadii midna uma dhiman.

Shariif Saalax, Ilaahay ha u naxariistee, waxa uu ku dardaarmay in lagu aaso xabaal iil leh. Sidii ayaana la yeelay, oo xabaal iil leh ayaa lagu aasay. Waxaa lagu aasay xerada Xaajiyo Siti Sheekh Aweys, oo ku taal deegaanka '*calammada*' ee u dhexeeya Muqdisho iyo

Afgooye. Qabriga Shariif Saalax waxa uu dhanka Bari ka xigaa qabriga Xaajiyo Siti Sheekh Aweys, oo ahayd eeddadii ama aayadii oo aabbihiis Shariif Maxamed Cali qabi jiray.

Danjire Shariif Saalax Maxamed Cali (1936-2014) waxa uu geeriyooday isagoo da'diisu tahay 78 jir. Koritaankiisii iyo bilowgii waxbarashadiisa ka sokow, qiyaastii lixdan sanno oo cilmibaaris iyo hawl qaran ah ayuu marxuumku ku soo jiray. Halkaa waxaa ku soo afjarmay sooyaal ah aqoon, cilmibaaris iyo hawlkarnimo.

Shariif Saalax wuxuu ka tegay qoraallo iyo buugaag kaydiyay qayb ka mid ah aqoontiisii iyo waayo-aragnimadiisii. Wuxuu raad muuqda kaga tegay sooyaalka aqoonta Soomaaliyeed. Kaalin muuqata ayuu toddobaatanaadkii ka qaatay kobcinta tacliinta sare iyo cilmibaarista Soomaaliyeed, iyo in dhidibbada loo aaso hay'adihii arrintan ka shaqaynayay. Danjire Shariif Saalax waxaa ku rumoobaya halhayska Soomaaliyeed ee ah “ma dhiman ee wuu dhuuntay”!!

## **6.2. Erayo ay ku sagootiyeen waxgarad aqoon dheer u lahaa**

### **6.2.1. Marwo Caasha Cabdi Diini**

Marwo Caasha Cabdii Diini waa marwadii uu ka geeriyooday Allaha u naxariistee Danjire Shariif Saalax Maxamed Cali. Dhaqankiisii iyo fekerkiisa waxay ka tiri

*Danjire Shariif Saalax waxa uu ahaa halgame Soomaali dhab ah, go'aankiisuna waxa uu ahaa horumarinta dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Waxa uu jeclaa in ay dadku wax bartaan, oo ay ummaddu jahliga ka baxdo. Waqtigiisa ugu badan waxa uu gelin jiray taakuleynta ardayda wax baranaysa. Gaar ahaan kuwa diyaarinaya buugga qalinjebinta jaamacadaha, oo uu talo siin jiray. Waxa uu aad u jeclaa dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida, gaar ahaan gabayada, sheekooyinka, riwaayadaha, taariikhda, ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka. Waxa uu halhays u lahaa 'Afka Soomaaligu waa hodan ee hodontooyadiisa hala soo saaro'.*

*Marka uu arko arrin qaranimada Soomaaliyeed wax u dhimeysa, wuu ka guban jiray, hadal la maqlayo oo*

*muujinaya sida uu uga xun yahay ayuu odhan jiray,  
xिता haddii uu keligii yahay.*

*Waxa uu ahaa nin akhlaaq wanaagsan, oo u naxariis badan dadka guriga ku nool oo dhan. Waxa uu ahaa bare wax toosiya. Marka aan eray Af-Soomaali ah si qalad ah u sheegno ama ugu hadalno, waxa uu oran jiray 'sidaa dheh sidaa ma ahee'. Ilaahay ha u naxariisto marxuum Shariif Saalax.*

### **6.2.2. Dr. Maxamed Daahir Afrax**

Dr. Maxamed Daahir Afrax waa qoraa ahna Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA). Aad ayuu u yaqaanay Shariif Saalax, muddona way soo wada shaqeeyeen, wuxuu ka yiri Shariif Saalax:

*Ma xusuusto war iiga naxdin badan oo aan in dhawaale maqlay warkii la iiga nixiyay Geerida Shariif Saalax Maxamed Cali! Koob shaah ah oo an ka dalbaday Kafeteriya ku taal Koofurta London ayaan kabbadiisii labaad ka sarakacay markii telefoon la iigu sheegay warka naxdinta leh.! Shariif Saalax wuxuu ii ahaa macallin, saaxiib iyo walaalkayga weyn ee an iska kaashanno dadaalka guud ahaan danta dadka iyo dalka aan ka wada dhalannay, gaar ahaanna daryeelka Af-*

*Soomaaliga iyo aqoon-faafinta. Waa laba hammi oo aad ugu weynaa hiyiga Shariif Saalax. Wuxuu ka mid ahaa dhawrkii aqoonyahan ee ila aasaasay Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA). Wuxuu ka mid ahaa maqaawiirtii aan soo jeediyay in ay qabtaan xilka guddoomiyenimada AGA, haseyeeshee ka cudurdaartay oo aniga igu riixay culayskaas. Ilaa uu geeriyooday wuxuu ka mid ahaa Golaha Maqaawiirta Akadeemiyada xubnaha ugu firfircoon ee mar walba igu soo kordhin jiray fikradaha wax-ku-oolka ah iyo talooyinka odaytinnimo, sida aad ka arki doontaan talo-bixinta ka midka ah qoraallada buuggan ku daabacan.*

*Ka dib aqoon dheer oo aan si dhow ugu soo yeeshay muddo soddon sanno kor u dhaafaysa, waxaan ka maragfuri karaa Danjire, Aqoonyahan Shariif Saalax Maxamed Cali in uu ahaa shakhsi aan caadi ahayn; shakhsi ka garaad sarreeya dadka caadiga ah. Wuxuu ahaa shakhsi aqoonta iyo ehelkeeda u aaminsan heer qiyaas kasta ka sarreeya. Aaminaad middaas la heer ah ayuu aaminsanaa waddanka uu ka dhashay iyo sida ay waajib u tahay in wax kasta loo huro. Aqoonta uu ku mintidayay kana gaaray heerka sare wuxuu rumaysnaa in ay waajib ku tahay in uu ka dhigto aalad loo adeegsado horumarinta dalka iyo hagidda bulshada. Walaal iga*

*weyn ahaan wuxuu igu boorrin jiray inaan ku shaqeeyo fekerka noocaas ah. Aragti-wadaaggaas iyo qiimaynta aqoonta ayaa ahayd wixii ugu horreeyay ee aan ku saaxiibnay. Dadaalkii joogtada ahaa ee uu ku dadaali jiray aqoonkororsiga ayaa u geeyay in uu barto luqado kala duwan oo caalami ah, si uu mid kasta u fahmo aqoonta ku kaydsan. Wuxuu heer sare ka joogay aqoonta Afafka Carabiga, Ingiriiska iyo Talyaaniga. Saddexdaas luqadood iyo afkiisa hooyo, Af-Soomaali intaba wuxuu ku qoray dhiganayaal faafay.*

*Wuxuu ahaa qof Eebbe ku mannaystay hibooyin kala duwan. Taas ayaa keentay in uu dhinac ahaan ka mid noqdo hormuudka hoggaanka siyaasadda dalka: Wasiir, Safiir, Hormuud jaamacad qaran, hoggaamiye Akadeemiyada Cilmiga, iwm; dhanka kalena ka noqdo qoraa, cilmibaare, tarjume iyo suugaan-dhaari lafagura si weynna u dhadhansada hal-abuurka fanka iyo suugaanta. Isku soo wada duuboo, Shariif Saalax wuxuu ahaa halyay qaran oo noociisu dhifayahay.*

Waxaa xusid mudan in Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaligu ay shahaado sharaf ku maamuustay marxuum Shariif Saalax, geeridiisii ka dib; shahaadadaas waxaa lagu bixiyey munaasabad dad badan ka qayb-galeen oo ay

Akadeemiyadu ku qabatay magaalada London, 12 Abril 2014, wax yar ka dib geeridii Shariifka. Waana madashii uu Dr. Afrax ka jeediyey erayada kor ku qoran.

### **6.2.3. Cabdicasiis Maxamed Cali**

Cabdicasiis Maxamed Cali, oo ah marxuumkii walaalkii ka yar, waxa uu ka yiri walaalkii hadal saamayn weyni ka muuqato, oo uu ugu magacdaray “Xusuustii Walaalkay”, waana kan:

*Waxa aan xusuustaa walaalkay Saalax markii uu noogu yimid magaalada Xuddur, aniga oo sagaal jir ah, waxa uu Talyaaniga iiga keenay kabo nooca loo yaqaan (feero kooyo). Aad baan u jeclaa oo iskama dhigi jirin. Maalmihii uu Xuddur nala joogay waan ku jooqnaa. Walaalkay waxa uu igula taliyay in aan mar kasta si fiican u lebisto oo ‘elegente’ ahaado.*

*Geeriddii aabbo 1962 ka dib, Saalax markii uu noogu yimid Xuddur, isla markiiba baalka ayuu i soo gashaday. Wuxuu ii muujiyay sida uu u danaynayo waxbarashadayda. Sannadku markii uu ahaa 1963kii waxa uu ii ballanqaaday in aan u raaci doono dalka Masar oo uu xilligaa ka ahaa u-qaybsanaha ganacsiga ee*

*safaaradda Soomaaliya, wuxuuse igu shardiyay inaan galo kaalinta koowaad ee fasalkeyga. Aad ayaan ugu dadaalay in shardigaas aan oofiyo, waanan ku guulaystay. Walaalkay Saalax waxa uu ii ahaa dhiirrigeliye weyn xilliga noloshayda oo dhan. Waxa aan bilaabay in aan Af-Talyaani ku akhriyo taariikhda faraacintii hore ee Masar. Taas oo walaalkay Saalax farxad gelisay.*

*Markii aan imid dalka Masar waxa uu walaalkay Saalax beddelay luqadeydii waxbarashada oo waxa uu ka dhigay Ingiriis. Ka dib markii aan saddex bilood oo koorso degdeg ah oo Af-Ingiriis ah qaatay waxa aan ku biiray dugsiga hoose dhexe ee Al-Xurria. Sidoo kale natiijadii waxbarashaydu waxa ay noqotay inaan ku soo baxo kaalimaha hore, waxa aan galay kaalinta labaad. Kaalintan aan maanta galay walaalkay Saalax iyo aniguba kuma aanan faraxsaneyn. Laakiin waxa uu kalsooni badan ku qabay in aan ka sii fiicnaan doono.*

*Barbaarintayda xil ayuu iska saaray. Waxa uu i baray habdhaqankaa wanaagsan iyo weliba in aan ereyadayda miisaamo marka aan hadlayo. Waxa uu i baray sida ilkaha loogu cadaydo buraashka, waxa kale oo uu i baray sida nektiinka ama qoorxidhka loo xirto iyo sida cunnada*

*lagu cuno fargeetada iyo mindida. Aad baan u xusuustaa sida aan ugu faraxsanaa marka aan habeen ku wada casheynay Naadiga Ciyaaraha Jasiira oo magaalada Qaahira ku yaal.*

*Markii aan ka soo wareegnay dalka Masar 1965kii, walaalkay Saalax waxa uu i geeyay dugsiga dhexe ee Shabeelle oo ku yaal magaalada Jowhar. Halkaas oo aan ku noolaa ilaa aan ka qalin jebiyay dugsiga sare sannadkii 1974kii. Hal caado ama dabeecad oo aan kala imid dalka Masar waxa ay ahayd in aan jeclaa wax akhriska. Waxa aan si wanaagsan u akhrin jiray buugaagta sheekooyinka ah iyo kuwa cilmiga.*

*Xilliga dugsigu xiran yahay ee saddexda bilood ee fasaxa ah, labo bilood isaga ayaan Muqdisho la joogi jiray. Bisha saddexaadna hooyaday ayaan magaalada Xuddur la soo joogi jiray.*

*Walaalkay Saalax Alle ha u naxariistee waxa uu ahaa bare yaqaan sida loo isticmaalo ereyada. Eray walibana waxa uu dhigi jiray meesha ku habboon. Ma hadal badneyn, marka uu wax sheegayana ereyo badan ma isticmaali jirin, ereyada qaarna ma soo celcelin jirin.*

*Waxa uu walaalkay iila hadli jiray sida qof weyn oo la siman. Waxa uu igu hogatusaaleyn jiray inaan talooyinkiisa fahmo oo aan si kooban ugala soo dhex baxo ujeeddadiisa. Waxa uu i baray inaan noqdo qof dulqaad badan oo haddana dadka caawiya. Waxa uu iiga digi jiray oo uu necbaa in marka aan hadlayo ama wax qorayo aan isticmaalo luqad jilicsan oo aan mowduuca ku fadhin. Walaalkay Saalax waxa uu markasta jeclaa in uu igu abaabiyo dareen wadaniyeed.*

*Markii aan dhameystay dugsigii sare ee Shabeelle ee magaalada Jawhar sannadkii 1974kii waxa aan goostay in aan dibedda u baxo si aan tacliinteyda sare u sii wato. Aniga oo oggolaanshaha iyo ducada walaalkay Saalax iyo Hooyaday haysta ayaan baxay.*

*Sannadkii 1990kii asaga iyo xaaskiisa, Marwo Caasho ayaa igu soo booqday magaalada Milwaukee (Wisconsin, USA). Bil bay ila joogeen bishaasina waxay ahayd mid cilmibaaris ah, asaga oo ku jiray xulkii buugga Xuddur. Laba maktabo, mid ku taalla gobolka aan deganaa Wisconsin, magaalada Jaamacada Madison iyo mid kale oo ku taal gobolka Michigan magaalada Ann Arbor, jaamacadda Michigan ayaan gaari ugu ambabixi jirnay. Wuxuu ka codsan jiray shaqaalaha maktabadaas*

*buugaagta macduunka ah oo taariikhdi hore ee Soomaaliya. Maalintii oo dhan wuxuu akhrinaayay buugaagtaasi. Xusuusta igu weyn aan ka haysto walaalkay waxay tahay qof fadhiya degan oo wax akhrinaayo.*

*Ilaahay haw naxariisto walaalkay Saalax, waxa uu ahaa barbaariyaha noloshayda.*

#### **6.2.4. Shariif Maxamed Cabdullaahi**

Shariif Maxamed Cabdullaahi Xuseen, xildhibaan Golaha Shacabka Soomaaliya, ka mid ah qaraabada Shariif Saalax, muddo dheerna ay is yaqaanneen, waxa uu ka yiri Shariif Saalax:

*Waxa uu ahaa nin urursan iyo aqoonyahan derejada koowaad ah. Waxa uu ahaa qoraa qoray dhawr buug. Hiwaayaddiisu waxay ahayd kobcinta dhaqanka iyo afka Soomaaliga. Waxa uu ahaa nin aad ula socda arrimaha caalamka. Sida uu ii sheegay, si joogto ah ayuu u diiwaangelin jiray dhacdooyinka iyo duruufaha ku xeeran laga soo bilaabo 1962kii ilaa maalmihii dhowaa ee noloshiisa.*

### **6.2.5. Prof. Maxamed Xaaji Mukhtaar**

Waa Borofisoorka Taariikhda Afrika iyo Bariga Dhexe ka dhiga jaamacadda ‘Savannah State University, Savannah, Georgia, USA’ ee dalka Mareykanka. Muddo dheer ayay Shariif Saalax is yaqaanneen.

*Shariif Saalax waxa uu ahaa walaalkay iyo wadaaygay, cilmibaaristana hawlo ayaan ka soo wada qabannay. Waa nin dhinacyo badan oo uu ku wanaagsanaa kulansaday: siyaasadda, diblomaasiyadda, cilmibaarista, wax qoridda, arrimaha bulshadda, nabad raadinta iyo u doodidda xuquuqul insaanka.*

*Qoraallada Shariif Saalax waxa ay u badnaayeen Af-Carabi, Af-Ingiriiska ayaa labo ahaa, Af-Soomaaliga iyo Talyaaniga ayaa ugu yaraa.*

*Waxa xusid mudan dhanka xuquuqul insaanka in Danjire Shariif Saalax uu u halgamay sidii loo soo deyn lahaa abwaanka weyn ee Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi) oo degmada Qansaxdheere lagu xiray sannadkii 1973kii ilaa 1978kii. Doodihii uu Maxamed Siyaad Barre la galay darteed ugu dambeyn wuu ku guuleystay in la soo daayo Hadraawi.*

## 6.2.6. Prof. Cabdalla Cumar Mansuur

Prof. Cabdalla Cumar Mansuur waa aqoonyahan iyo khabiir dhinaca afka, dhaqanka iyo taariikhda Soomaalida. Muddo dheer ayay is yaqaanneen, muddona waxay ahaayeen shaqo wadaag. Waxa uu ka yiri Shariif Saalax:

*Anigu, Shariif Saalax, waxaan ku tilmaami karaa aqoonyahannada ugu sareeyay ee ummadda Soomaaliyeed ay lahayd. Markii iigu horreysay ee aan barto Shariif Saalax waxay ahayd 1976, isagoo ah Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta sare, kana qaybgalaayay xafladda qalinjebinta kooxdayada.*

*Ka dib siddeetameeyadii iyo wixii ka dambeeyay ayaan si fiican isu barannay. In uu ahaa qof aad u jecel cilmibaarista Soomaaliyeed, waxaan ogaaday kadib markii uu faallo dheer ka bixiyay saddex buug ee aan qoray: 1) Buugga qalin-jebintayda ee takhasuska (1980) oo af-talyaani ku qoran, kuna saabsanaa waxyaabaha ay wadaagaan Soomaalida iyo dadka ku hadla afafka Bahda Kushitigga; 2) Buuggayga Barashada Naxwaha Af-Soomaaliga (1999); 3) Buuggayga Taariikhda afka iyo bulshada Soomaaliyeed (daabacaaddiisi 1d, 2009). Si degdeg ah, oo hagar la'aan ah, oo cilmiyaysan ayuu*

*iigu siiyay talooyin iyo turxaanbixinna wax ku ool ah. Waana qaatay figradihiisa badankooda. Markaan arkay faallooyinka qiimaha leh ee uu ka bixiyay buugaagtayda, gaar ahaan midka taariikhda, waxaa ii muuqday saddex shay: 1) In Shariif Saalax uu ahaa nin aad iyo aad u daneeya cilmibaarista afka, taariikhda iyo dhaqanka Soomaaliyeed; 2) In uu wax badan uu akhriyay; 3) In uu lahaa xusuus aad u yaab leh.*

*Inkasoo wax badan aan isla wadaagnay xagga aragtida Af-Soomaaliga iyo lahdadihiisa, haddana waxaan marmar isku khilaafsanayn aragtiyo qaarkood, oo la xiraara qayb ka mid ah naxwaha Af-Soomaaliga. Isagu xagga Carabiga ayuu aad iigu jiidayay, anna aqoontayda cilmi-afeed ee gaaban iima oggalaanayn in aan ku raaco aragtiyada qaarkood. Taasina, haba yaraatee, inna hoos ugama dhigin qaddarinta iyo xiriirka naga wada dhexeeyay. Maxaa yeelay waa la kala aragti duwanaa karaa, sida culima badaniba ay horteenna u kala aragti duwanaayeen, haddana xiriirkoodu aanu xumayn. Waxaan ku soo gunaanadaya, Alle ha u naxriiste, Shariif Saalax wuxuu ahaa aqoonyahan waddani ah oo ku dayasho mudan.*

### **6.2.7. Md Maxamed Sheekh Cismaan Jawaari:**

Md Maxamed Sh. Cusmaan Jawaari, guddoomiyihii hore ee Golaha Shacbiga Soomaaliya muddadii Agoosto 2012 ilaa Abriil 2018, muddo badan ayay is yaqaanneen Shariif Saalax Maxamed Cali.

Waxa uu Shariif Saalax ka yiri:

*Waxa uu ahaa qof mar kasta isku xira taariikhda cusub ee Soomaalida iyo soojireenkeedii hore. Waxa uu cimrigiisa ku dhameystay cilmibaarista afka, dhaqanka iyo taariikhda ummadda Soomaaliyeed. Dhaxal la taaban karana wuu uga tegay.*

### **6.2.8. Jeneraal Jaamac Maxamed Qaalib**

Jeneraal Jaamac Maxamed Qaalib, xilal kala duwan ayuu dalka ka soo qabtay, waana ruug caddaa arrimaha Soomaalida. Waxay Shariif Saalax is yaqaanneen muddo ka badan konton sanno.

Waxa uu ka yiri Shariif Saalax:

*Lama soo koobi karo waxyaabihii uu ku wanaagsanaa, haddana waxa lagu xusuusan karaa afar waxyaabood oo waaweyn oo kala ah:*

- 1) *Ururinta iyo qoridda taariikhda Soomaaliya sida buugga Xuddur.*
- 2) *Doorkii uu ka ciyaaray aasaaskii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS).*
- 3) *Guddoomiyenimadiisii qoraalka farta Soomaaliga oo wax weyn ahayd.*
- 4) *Qoraallo badan oo huwan dhacdooyinka ummadda oo uu ka tegay.*

*Shariif Saalax waxa uu ahaa nin ku dhac leh oo go'aan qaadashada ku wanaagsan.*

### **6.2.9. Prof. Maxamed Axmed Jimcaale**

Prof. Maxamed Axmed Jimaale, waa guddoomiyaha xilligan ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed. Waxa uu Shariif Saalax ka yiri, kuna taliyay:

*Shariif Saalax waa nin weyn ee naga baxay. Waa nin bannaanka yaal oo waxqabadkiisu muuqdo. Waxa uu waajib bulshada ugu leeyahay in mirihiisii qaar looga maamuuso, oo mid ka mid ah xarumaha waaweyn ee ay ka kooban tahay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed in lagu maamuuso oo magaciisa loo bixiyo.*

### **6.2.10. Shariif Maxamed Shariif Maxamuud**

Shariif Maxamed Shariif Maxamuud muddo ayay is yaqaanneen Shariif Saalax, waxaana uu ka yiri:

*Waxa ay ummadda Soomaaliyeed wayday shakhsi isaga oo kale uu naadir ku yahay bulshada. Waxa uu kaalin muhiim ah ka qaatay ugu adeegidda dalkiisa, dhinacyada waxbarashada iyo diblomaasiyadda.*

*Danjire Shariif Saalax waxa uu ku qaatay xilliga noloshiisa oo dhan waxbarasho, akhris iyo qoraal. Waxa uu ahaa mawsuuco ama qaamuus aqooneed oo ummadda dhexyaalay.*

### **6.2.11 Dr. Maxamed Cali Nuur**

Dr. Maxamed Cali Nuur waa aqoonyahan iyo masuul Soomaaliyeed oo xilal kala duwan dalka ka soo qabtay; Shariif Saalax waxay is yaqaanneen ilaa yaraantiisii xilligii ardaynimada, waxaana uu ka yiri:

*Sharif Saalax wuxuu ka mid ahaa mutacallimiintii isu taagay difaaca xadaarada iyo waynaynta Soomalinnimda; wuxuuna siyaalo kala duwan isugu tacallujiyay inuu wax weyn ka qabto arrimaha*

*saldhigga ama asaaska u ah Soomaalinnimada sida luqadda, suugaanta, hiddaha iyo dhaqanka. Arrimahaas wax badan ayuu ka qoray, sidoo kalena wuxuu ka mid ahaa guddiyadii kala duwanaa ee arrimahan ka hawlgalay dalka gudahiisa iyo dibaddiisa.*

### **6.3. Gablan: Maanso Baroordiiq ah**

*Bashiir Maxamed Xirsi*

Maansadan waxa tiriyay Bashiir Maxamed Xirsi, oo waddanka Talyaaniga jooga. Waxa uu u tiriyay baroordiiqda marxuum Shariif Saalax Maxamed Cali.

Maansadan ‘Gablan’ waxaa laga akhriyay kulan baroordiiqda ah oo Shariif Saalax 12 Abriil 2014 loogu sameeyay London, UK; waxaa magaca Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, ku qabanqaabiyay Guddoomiyaha Akadeemiyadaas, Dr. Maxamed Daahir Afrax.<sup>1</sup> Wuxuu yiri:

*Geeriyaay fogeeyaay  
Gacalkiyo waxgaradkiyo*

---

<sup>1</sup> Maansadan waxaa goobta ka akhriyay Aamina Muuse Weheliye halabuurkuna waxa uu ku faafiyay boggiisa Internetka. [<https://bilediraac.wordpress.com>].

*Guurtida dhammeeyaay  
Gobonnimo ka dheeraay  
Geesiga hal adag iyo  
Halyeeyada god gelisaay  
Imisaad Garaad iyo  
Guudcaddaa Suldaaniyo  
Odayaal gumaaddoo  
Godka ciil la galayoon  
Loo gudin abaalkood?*

*Gelin hore Tuubeec baad<sup>1</sup>  
Codkii aad ka goysoo  
Gurbaanka iyo cuudkii  
Fankuu gaarka u lahaa  
La god galay daraaddaa!*

*Illayn Kaban garaac ma leh  
Googoos ma laha cuud  
Mar haddaan cod gaariyo  
Fannaan gaar ka haynoo  
Galbinaynin heesaha.*

---

<sup>1</sup> Waa fannaankii caanka ahaa ee Maxamed Saleebaan “Tubeecc”. Waxa uu ku geeriyooday dalka Jarmalka 11 Maarso 2014; waxaana lagu aasay Muqdisho 16 Maarso 2014.

*Sooyaal gureeyaha  
Ga'da buugga dhigi jiray  
Gaar hayaha afkeenniyo  
Taariikhda guunka ah  
Ma galbaday Shariifoo<sup>1</sup>  
Ma ka guuray dunidii  
Isagoonan loo gudin  
Loo galin waxuu galay  
Suugaanya gabay iyo  
Geeraarro loo tirin  
Gurboodkiyo carruurtiyo  
Gabannada haddeer kacay  
Gole looga sheekayn.*

*Dadku kala garaad weyn  
Guushana la kala mudan  
Guudka sare Shariif baa  
Gacal iyo xigaalooy  
Garashiyo aqoon iyo  
Darajaba ku gaaree  
Guubaabo iyo hadal  
Guulle guri Jannaad iyo  
Ha ku geeyo mudankeed.*

---

<sup>1</sup> Waa Shariif Saalax Maxamed Cali

*Waxa gooha igu riday  
Igu reebay gocoshada  
Ee gilgishay dareenkay  
Waxa gaabshay taladii  
Aaskii Shariif guray  
Oon guddoonba loo dirin  
Guddi gaar ah loo xulin!  
Maamuuskii gole haga  
Waxa looga gaataye  
Garabkiisa loo maray  
Gaasiray xabaashiis!*

*Geeridu xaq weeyee  
Layskama garaabee  
Qofba waa geddiisiyo  
Gelinkiisa tiisehe  
Ma gar baa dadkaygoow  
Miyaan laga gaboobayn  
Gaabisyada na kala dilay?*

*Maansada gunteediyo  
Guurowga curintiis  
Waxaan uga gol leeyahay  
Halabuurradii go'e*

*Gabbal dhacay sidii bay  
Gablantada adduunyadu  
Kala goysay araxdood  
Guuraha hayaankiyo  
Geeddi aanan wadan sahan  
Bulshadii ku guurtaye  
Goormay degaysaa  
Guryosamo barwaaqo ah??*

# **QAYBTA LABAAD**

**(Lifaaqyo Muhiim ah)**

**Ururin Qoraallo iyo Khudbado  
la Xiriira AfSoomaaliga**

## 1. Arar

Waa qoraallo iyo khudbooyin kala duwan oo laga helay kaydka Shariif Saalax, uuna u diyaariyay munaasabado kala duwan. Waxaan soo xullay intooda la xiriirta Af Soomaaliga iyo cilmibaaristiisa.

Maadaama aanu Shariifku u wada diyaarin in la faafiyo, waxaa dhici karta in qaarkood u baahnaayeen tifaftir dheeraad ah. Waxaanse, si asalka loo ilaaliyo darteed, doorbidnay inaan qoraalladaa sidooda ku soo gudbinno. Waxyaabaha tusinaya soo muujinta *'emphasising'* sida xarfaha *jiifa 'italics'* ama XARFAHA WAAWEYN iwm, waxaan u daynay sidii uu Shariif Saalax u qoray. Sidoo kale, habka taxnaanta lambarrada qaybaha lifaaq kastaa badiba waa sidii uu u qoray Shariif Saalax. Sidaas darteed, lifaaqyada qaarkood way ku kala duwanaayaan hannaanka taxidda lambarrada. Wixii tifaftir darteed laga fursan waayay in la taabto, waxaan dhex gelinnay calaamadda [ ]; wixii faallo ahna waxaan ka dhignay *'tilmaamo* ama *footnote'*, waxaanan ku soo xirnay erayga (tifaftiraha).

Qoraalladan waxaan u qaybinnay saddex xirmo. Xirmada 1aad waa laba khudbaood oo uu kaga hadlayo qoritaankii Far Soomaalida iyo arrimo Af-Soomaaliga ku sabsan oo xilligan taagan. Xirmada 2aad waa saddex warqadood oo

uu u kala diray Idaacadda VOA, Laanta Af-Soomaaliga; Idaacadda BBC, Laanta Af-Soomaaliga; iyo Guddoomiyaha Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga. Xirmada 3aad waa laba qoraal oo uu si cilmiyaysan ugu orfaynayo ‘Qoridda iyo Xarfaha Lahjadda Maay’. Guud ahaan, lifaaqyadu waa toddoba, waana kuwan magacyadoodu:

*Xirmada 1aad:*

1. Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Farsoomaalida
2. Horumarinta Af-Soomaaliga: Tan Maanta ah iyo Timaaddada

*Xirmada 2aad:*

3. Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta
4. Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga
5. Dhawr Fikradood oo ku Saabsan Hawlaha Akadeemiyada AGA

*Xirmada 3aad:*

6. Xarfaha Qoraalka Afka Maay
7. Qoridda Lahjadda Maay

# XIRMADA 1<sup>aad</sup>

## Lifaaq (1)

### [Munaasabadda Afartanguurada Qoridda Far-Soomaalida]<sup>1</sup>

Aad iyo aad ayaan ugu faraxsanahay munaasabaddan lagu xusayo afartanguuradii qoraalka Afka Soomaaliga. Run ahaantii qoraalka Af-Soomaaliga waxa loo soo maray dadaal badan oo faca badan iyo jiilal badan oo isaga dambeeyay ay arrintan ku mashquuleen. Afartankan sanno

---

<sup>1</sup> Waxaa magaalada Jabuuti lagu qabtay shirweyne si heer sare ah loo soo agaasimay 17-22/12/2012, oo lagu xusayay afartanguurada qoridda Far-Soomaalida. Shirweynahan waxaa ka soo qaybgalay madax, ururro bulsho, aqoonyahanno, qalinley iyo hal'abuurro Soomaaliyeed, kana kala yimid dalalka Geeska Afrika iyo dactaladda kale ee adduunka. Waxaa iyaguna goobta yimid inta tirada yar ee ka noolayd guddigii Af Soomaaliga, kuwaasoo kala ah: 1) Shariif Salax Maxamed Cali oo ahaa gudoomiyihii guddiga, 2) Xuseen Sheekh Axmed Kaddare, 3) Sheekh Jaamac Cumar Ciise, 4) Cabdillaahi Xasan Insaaniya, 5) Dahabo Faarax, 6) Cumar Aw Nuux. Qoraalkani waa khudbaddii uu Danjire Shariif Saalax uu ka jeediyay shirweynahaas. (Tifaftiraha)

hadda uun baa la xusayaa, laakiin waxaa ka sii horeysay afartan sanno oo kale.

Si loo qoro Af Soomaaliga waxyaabo badan ayaa lagu tijaabiyay. Mar waxa lagu tijaabiyay Af Carbeed, marna waxa lagu tijaabiyay ‘Farsoomaali’ qoraal la odhan jiray xilligii soddomeeyadii, dadka qaarkiina ay u yaqaaneen ‘*Cusmaaniya*’. Waxa jiray iyadana oo farahii af Carbeedka ugu magac dheereyd mid uu lahaa Ibraahim Xaashi Maxamuud, isaga oo raadin jiray in farta Quraanka lagu qoro Af Soomaaliga. Isaga oo dadaal badan arrintaa ugu jira waqti dheerna waday ayaa uu markii dambe dhintay 1975kii.

Annagu haddii aan hormoodkii afka nahay waxa aan munaasibadan aad iyo aad ugu mahadcelinaynaa Madaxweynaha Jabuuti Ismaaciil Cumar Geele, oo dalka iyo dadka Soomaaliyeed burburkii iyo jabkii ku dhacay uu garab ka siiyo sidii ay uga kabsan lahaayeen, afkii iyo dhaqankii oo baabi’i lahaana u gurmaday, runtiina dadaal badan u galay. Dadkeenan afka iyo dhaqanka ku hawlan ee jecel Af-Soomaaliga [inuu] noqdo af xoog leh oo rasmi ahna xurmo iyo qiimeyn badan na siiyay. Aad baana ugu shukrineyanaa.

Guud ahaan shacabka Soomaaliyeedna waxa uu Ismaaciil u qabtay adeeg dhinac walba leh.

Munaasibadan waxa kale oo ay muujineysaa in ay jiraan dadka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan wax midaynaya oo ah Afka iyo Fartaa qoran. Sida aad ogtahayna maanta Soomaalidu meel kasta oo ay joogto in ay xoogga saartay horumarintiisa, iyo inay qiimo gaar ah siiso Af-Soomaaliga iyo Fartiisa.

Annagii ka shaqeyn jirnay in Af-Soomaaligu noqdo af rasmi ah, oo xididdo leh oo xoog leh, sida afafka kale, aaminsanayna in Af-Soomaaliga af u beddeli kara aanu jirin. Waayo Soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa “biyo sacabbadaada ayaa looga dherгаа.” Waxa farxad weyn ah maanta dadka halkan isugu yimid oo siyaasiyiin leh, oo aqoonyahan leh, oo khubaro leh, oo dhammaan afka wada jecel, doonayana in Af-Soomaaligii uu labokacleyn sameeyo, aad ayay noo farxad gelinaysaa.

Haddii aan in yar ka taabto heerarkii uu qoraalka Af-Soomaaliga soo maray, waxa ugu horreeyay qof wax ka qora Af-Soomaaliga oo la diiwaan geliyo nin Ingiriisa oo la oran jiray David Salt sannadkii 1814kii. Waxa uu safar ku yimid dhulkan Bariga Afrika. Ka dib waxa uu dhadhansaday Af-Soomaaliga. Waxa laga hadlayaa waa

labo qarni iyo dheeraad ka hor. Waxa uu arkay ninkaas dadkan nool ee afkooda ku gabyaaya, ku sheekaynaaya, arrimaha noloshooda oo dhan ku maareynaya. Ka dib ayaa waxa uu sameeyay waxa la yiraahdo (word list) oo ah ereyo fudud ayuu ururiyay, mid kastana waxa uu ku hor qortay eray macnihiisa sheegaya oo ingiriis ah.

Markii uu ninkaa intaa sameeyay dadkii shisheeyaha ahaa way ku baraarugeen inay afkan wax ka qoraan. Ka dib Carabi ayaa wax looga qoray, Faransiis ayaa lagu qoray. Ka dib waxa ku xigay oo iyaguna qoraalo ka sameeyay Af-Soomaaliga niman Talyaani ah, kuwa kale oo Ingiriis ah, haddana qaar kale oo Faransiis ah, sidaa ayaa ay ku socotay. Qarnigii 19<sup>aad</sup> aad ayaa Af-Soomaaliga wax looga qoray. Maanta waxa laga joogaa 130 ilaa 140 sanno.

Markii la soo gaaray qarnigii 20<sup>aad</sup> daraasaad badan ayaa Af-Soomaaliga lagu sameeyay. Cilmibaarisayadaas kuwo dhumuc leh oo waaweyn iyo kuwo fudfudud labadaba way lahaayeen. Waxyaabahaas aan soo sheegnay oo dhan dadka Faranjiga ah ayaa sameyn jiray. Mid kastana waxa uu isku dayi jiray in uu qaamuus sameeyo. Marka ay dalka yimaadaana waxa ay sameyn jireen qaamuusyo laba af ku qoran. Qaamuusyadaa waxa ka mid ah Jarmal, Ruush,

Osteriya, Aarij. Qofkii yimaadaba ereyo badan oo Af-Soomaali ah ayaa uu uruursan jiray.

Markii la soo gaadhay qarnigii labaatanaad bartankiisa waxa soo baxay rag barista iyo wax ka qorida Af-Soomaaliga heer sare ka gaaray. Nimankaa waxa ugu caansanaa aqoonyahan ah iyo aqoonyahan Jarmal ah oo la kala oran jiray Jaluli<sup>1</sup> iyo Marero<sup>2</sup> oo gaarsiiday Af-Soomaaliga heer aanay dadkii ka horeeyay gaarsiin. Ka dib sannadkii 1937kii waxa soo baxay ninkii Ingiriiska ahaa ee Andreswiski oo isagana Af-Soomaaliga cilmi baaris iyo qoraalaba ka sameeyay.<sup>3</sup> Ninkani waxa uu ahaa ninkii ugu horreeyay ee Faranji ah oo Af Soomaaliga si fiican ugu hadla. Waxa uu geeriyooday sannadkii 1994kii. Laakiin weligii waxa uu ka shaqeyn jiray sida loo ballaariyo, sida loo horumariyo iyo sida loo cilmiyeeyo

---

<sup>1</sup> Waa Enrico Cerulli (1898-1988), waa aqoonyahan talyaani ah oo cilmiaaris badan ku sameeyay, wax bandanna ka qoray arrimaha Soomaalida. (Tifaftiraha)

<sup>2</sup> Waxaan u fahamnay inuu ula jeedo **Mario Von Tiling** (1886-1974) waa gabar cilmibaare Jarmal ahayd oo daraasado kala duwan ka qortay Af Soomaaliga. (tifaftiraha)

<sup>3</sup> B. W. Andrzejewski (1922–1994), oo Soomaalidu u taqaanay ‘Macallin Guush’ waa afyaqaan Ingiriis ahaa, waxa uu Afafka Kushitigga iyo Suugaantooda ka dhigi jiray Jaamacadda ‘SOAS, University of London’. (Tifaftiraha)

[Af-Soomaaliga]. Ninkan waxa uu Af Soomaaliga iyo aqoonta Afrikaba ka dhigi jiray jaamacad ku taala dalka Ingiriiska.

Dhinaca kale farihii la qoray ee la isku dayay in Af Soomaaliga laga dhigo, waxa ugu horreeyay nin la yiraahdo Cismaan Yuusuf Keenadiid far uu lahaa oo la odhan jiray “Far-Soomaali”, dadka qaarna ay u yaqaaneen “Cusmaaniya”. Waxa ay ahayd ama uu keenay 1920kii. Waxa ay ahayd fartii ay leegada isticmaali jirtay. Fartan waxa ay ahayd fartii ay leegadu (waa xisbigii SYL ee xornimo gaarsiinta dalka) ku darsatay distuurkeeda si ay ugu dhaqanto. Ka dib waxa bilowday dabeyl iyo dareen wada socda oo oranaya Af-Soomaaliga hala qoro.

Dadka qaar waxa ay oran jireen Af Soomaaliga lama qori karo, waayo ma cilmiyeysna, waxa uu ku dhisan yahay lahadjo kala duwan. Waxa aan oran karnaa dooddii ugu kululeyd ee Af-Soomaaliga qoriddiisa waxa ay socotay laga bilaabo 1949kii ilaa 1960kii. Waayo xilligaa waxa timid ama muuqatay baahi ah in aan laga maarmeyn in Af Soomaaliga la qoro. Markaa waxa timid su’aal ahayd waa la isku raacsan yahay in Af-Soomaaliga la qoro, laakiin ma waxa aan ku qornaa Carabi, ma Cusmaaniyo ayaan ku qornaa mise Laatiin. Markii ay dawladdii Soomaaliya

dhalatay waxa ay qoraalka afka u saartay guddi ka kooban sagaal nin. Guddigaa waxba way ku heshiin waayeen. Waxa ka mid ahaa Muuse Galaal, Yaasiin Cusmaan Keenadiid, Xuseen Sheekh Axmed kadare, Mustafe sheekh Xasan, Cabdulaahi Insaaniya, Shire Jaamac Axmed ayaa ka mid ahaa. Waayo guddiga dhexdiisa ayaa khilaafku ku jiray oo isnaqdin jiray. Xitaa markii dambe wejiyaal qabiil ayaa loo yeelay.

Markii dhanna loo wadi waayay dawladdu waxa ay bannaanka ka keensatay dad khubaro ah oo ka socda hay'adda waxbarashada iyo dhaqanka ee UNESCO. Khubaradii qudhoodu waxa ay doonayeen in FarSoomaaliga lagu qoro Laatiinka. Laakiin taasi kuma aanay dhici karin oo waxa ay ka baqayeen shacabka. Waayo waxa jiray Muqdisho bannaanbaxyo iyo khudbado masaajidda lagu soo qaato oo la leeyahay Laatiin qaadan mayno oo waa diin la'aan.

Waayo dadkii farta Carabiga watay ayaa dadka ka dhaadhicinayay waa nala gaaleysiinayaa. Iyada oo arrinku uu sidaa yahay oo madaxa la iskula jiro ayaa uu Kacaankii yimid. Warqadihii lagu dhisay Kacaanka oo loo yaqaanay 'ballanqaadka Kacaanka' waxa uu qaban doono, waxa ku jiray qodob ah in uu Af-Soomaaliga uu qori doono.

Xilligaa waxa ay ahayd 1969kii. Laakiin markii la gaaray 1971kii waxa uu Kacaankii dhisay guddi kale oo aan anigu guddoomiye ka ahay. Kaas oo markii hore ahaa 23 xubnood. Laakiin ay markii dambe ku soo hareen 21 xubin. Khilaafkii guddiga dhexdiisa ka dhalan jiray markan wuu yaraaday. Waayo nimankan Kacaanka ahi qofkii amarkooda ka horyimaada way xiri jireen. Waayo sida keliya ee Af-Soomaaliga lagu qori karayay waxa ay ahayd in loo qaado afti dadweyne, in baarlamaan uu ansixiyo iyo in ay dawladu xoog ku mariso guddiga. Ka dib nimankii Kacaanka dhaliyay oo askar ahaa waxa ay isticmaaleen xoog in ay wixii la qumanba ku fuliyaan. Waxa ay dawladdu guddigii amar ku siisay in ay buugaag qoraan waxbarashada hoose ah iyo weliba qaamuusyo. Go'aanka farta la qaadan doonana waxa ay yiraahdeen annaga noo daaya.

Markii shaqadii guddiga la amray ee ahayd inay wax qoraan ay bilaabatay, dhammaan farihi ay wateen way iska dhigeen, waxa aan dhammaanteen ku shaqeynaynay farta Laatiinka oo aan buugaagta ku diyaarinaynay. Waxa farta kaalin muhiim ah ka soo qaatay Shire Jaamac iyo Muuse Galaal oo markii hore farta Carabiga watay, laakiin markii dambe wuu ka tanaasulay oo Laatiinka ayuu wax ku qori jiray.

Qaamuuska uu qoray Yaasiin Cusmaan Keenadiid sida lagu helay waxa ay ahayd aniga iyo Yaasiin ayaa waxa aan u tagnay Maxamed Siyaad Barre, waxa aan ku idhi “waxa aan dooneynaa in aad na siiso konton kun [oo Doolar]<sup>1</sup> oo aan qaamuuska ku daabacno.” Isaguna markiiba wuu na siiyay.

Taas waxa aan ka wadaa marka uu burburka dhacay wax alle wixii taageero afka loo hayay horumarintiisa meesha ayay ka baxeen.

Ugu dambeyn waxa aan ku dardaarmayaa Af-Soomaaligu ma dhimanayo wuu korayaa, oo sii horumarayaa, laakiin waa in la dhawro qodobadan mideynta afka, u dejinta naxwe lagu dhaqmo, cilmiyeynta afka, lahjadaha oo ku darsama afka iyo qaayibida afka iyo farta Soomaaliga. Ogaada haddii ay lahjaduhu raacaan oo ay ku milmaan afka waxa uu noqonayaa hodan, haddiise ay ka hor yimaadaan ama ay hareer socdaan way hagar daameynayaan.

---

<sup>1</sup> Xilligaas, konton kun oo Doolar waxay u dhigmaysay saddex boqol oo kun oo Shilin. (Tifaftiraha)

## Lifaaq (2)

### Horumarinta Af-Soomaaliga Tan Maanta ah iyo Timaaddada<sup>1</sup>

#### 1- Waxtarka Af Soomaaliga

Soomaalidu af aan keeda ahayn kama dhigan karto qalab waxbarasho, shaqo iyo mid horummarineed. Waxaan ka hadlaynaa af dadka isku garto, iskana garto. In kastoo ay jiri karaan xulan afafka shisheeye bartay, haddana afafkaas ma aha kuwo loo adeegsan karo horumarinta heerka nolosha, aqoonta iyo wacyiga dadweynaha Soomaalida. Xaaladdaa waxay lama huraan ka dhigaysaa in aynu afkeenna horumarinno, kana qaadno xayiraaddii uu u gaystay qaranjabkii dalka aafeeyay, wax ku dhow rubuc qarni (25 sanno).

Af aan afkaada ahayn si dhab ah looma baran karo. Haddaadan u dhalan ama ku dhalan, oo ku korin waxna ku baran. Af shisheeye lama wada hanan karo. Maxaa wacay

---

<sup>1</sup> Khudbaddan Shariif Saalax waxa uu ka jeediyay munaasabadda 'Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo', uu soo qabanqaabiyay Naadiga Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed 'Somali Pen' xafiiskiisa Muqdisho 20/2/2012. [Tifaftiraha]

afku ma aha ereyo buug ku qoran, ama lagu hadlo keli ah, ee ereyadu waxay cabbirayaan, oo kale, hidde iyo dhaqan. Ereyo badan, ee afafka shisheeye, gaar ahaan kuwa Reer Galbeedku, waxay ka soo jeedaan diimaha, dhaqanka, xeerarka, isboortiga, lahadaha, muusikada iyo guud ahaan fanka [marar badan mideeya bulshooyinka caalamka qaarkood, sida reer galbeedka]. Afkeenna qudhiisu wuxuu leeyahay astaamo u gaar ah iyo hab-oraheed isaga u gooni ah, ay dhib ku tahay inuu fahmo qof ajnabi ah, hadduu wax badan dalka uusan ku noolaan.

## **2- Turjumaannadii hore dhibka ay ku qabeen afafka shisheeye**

Halkan waxaan xusi karnaa is maandhaafkii ka dhalan jiray markii turjummaannadii waayihii gumaysiga ay Faranjiga u af-celin jireen, sida: *“waxaad Faranjiga (aalaaba dhiisiga) u sheegtaa: geedka rag la yiraahdo mid mise mid”*. Turjumaankii si xaraf-raac ah ayuu damcay inuu ugu sheego faranjigii, wuxuu yiri: *“l’uomo che si chiama albero uno o uno”*. Faranjigii baa yaabay ee wuxuu yiri: *“maxaa geedka aad ka hadlaysid meesha keenay?”* Sidaa si u eg, waxaa jira daraasiin oraahyo Soomaaliyeed ah, haddii xaraf-raac loo fasiro, qof ajnabi ihi uusan fahmi karin. Sabaan hore waxaan maqli jirnay

inay jiraan dad Af-Ingriiska aad u bartay, waqti dheerna ku jilnaa jaamacadaha Oxford iyo Cambridge middood, sida Jawahir Lal Nehro, oo markay riyoonayaanna Af-Ingriis ku hadla. Aniga waxay ila tahay in ruux kasto afkiisa uu ku hadlo, riyada gudaheeda iyo runtaba. Haddii kale sidaa wixii ka duwan waa calwasaad ee ma aha hadal, qarowna hadal ma aha, sida hunnu hunnuna hadal ay u ahayn.

### **3- Horumarinta Lahjadaha**

Dadka waxaa u bannaan inay ku hadlaan lahjadahooda, hadday kari karaanna cilmiyeeyaan dhismahooda, si ay u baahiyaan hiddaha iyo dhaqanka deegaannada ay la xiriiraan lahjadahaa. Daraasaad cilmiyeed oo Af-Soomaaliga lahjadihiisa lagu baarayo, laguna ogaanayo khasaa'istooda deegaaneed, oo gaarka u ah, waa hodontooyo Af-Soomaaliga u soo xerootay, mudanna taageero iyo garabsiin.

Hayeeshee, waxaa lagama maarmaan ah in dalkoo dhan rasmi u ahaato hal lahjad keli ah, ama middii hore loo rasmiyeeyay, oo saldhigga looga dhigay waxbarashada, warbaahinta iyo qoraallada rasmiga ah (SS). Haddii lays dhex shaaciyo ku dhaqanka lahjado badan, aan loo kala ab-dayin, waxaa dhalanaysa fawdo luqadeed iyadu is

dabrayso, misna is kufinayso oo is tirtiraysa. Sidaa darteed, af iyo hawl innoo hanaqaadi karaa ma jirayaan, iskaba daa in la horummariyo afka, ama laga dhigto qalab horummarineed. Waxaa dadka halhays u ah: Afkeenu waa hodan, shakina ma laha, laakiin ogaanshaha hodontooyadaa keligeed kaa bixin mayso jahliga, dib-jirnimada iyo xasaradaha dhaqan-dhaqaale, oo dadkeenu ku sugan yahay.

Howraartaa waxay la mataano tahay halqabsiga kale oo aad loo xuso, oo ah dalkeenu waa taajir. Labadaa rumood waxba innooguma turra haddaynu ka baahannahay, oo waxba faraqa innoogaga jirin. Mana aha arrimo baashaal iyo yididiilo keligood aynu ku gaari karno af horummarsan, heer caalami ah gaarsiisan, iyo hodontooyo dabiicadda laga soo furtay, dadkuna ku hodmay kuna barwaaqoobay. Laakiin haddaan taagnaanno ‘AF WAA KOO MAY LAKA AAMEE’ meelna gaari mayno. Waxaa laynaga doonayaa inaan dadaal badan u hurno sidii hodontooyooyinkeenna dihan ula soo baxi lahayn, uguna intifaaci lahayn.

Dadka qaarkii waxay ku andacoonayaan inay jiraan dhawr af [oo] ay Soomaalidu leedahay, ayna habboonayn in “af”

iyo “far” qur ihi la rasmiyeeyo. Dooddaa iigu lama muuqato mid run ah sababaha soo socda awgood:

a- Ma suurtoowdo in dowladi rasmiyayso laba lahdood oo isku waqti loo adeegsado hawlaheeda oo dhan, oo heer kasto ah.

b- Farihi loo soo bandhigay guddigannagii hore ee Af-Soomaaliga aad bay u yaraayeen. Waxayna kala ahaayeen: Carabi, Cusmaaniya iyo Laatiin. Hayeeshee, sidaan ku xusay buuggan aan maanta soo fagaare dhignay,<sup>1</sup> far kasta buugaagtii guddiga loo igmaday waxaa loo fasaxay inay dadka farta wata buugaagta layska rabo lagu soo diyaariyo, maqaamkeedana la siiyay. Waxaana far kasto u furnayd inay xulashada ku guulaysato, markii la gaaro heerka kala doorashada, taas oo ay iska lahaayeen xukunkeeda Golihii Sare ee Kacaanka. Sidaa aawadeed, halhayska ah dadbaa fartoodii la xaqiray hadal run ah ma aha. Annagu, guddi ahaan, ma aanaan arag xibin guddiga

---

<sup>1</sup> Waxaa qoraalka laga fahmi karaa inuu tilmaamayo buuggiisa “Halgankii loo Galay Qoridda Af-Soomaaliga (1949-1972)”. Waxaa dhici karta in uu Shariif Saalax khudbaddan u diyaarsaday munaasabadda daahfurka buuggan oo beryahaas lagu talo jiray in la qabto, laakiin ma suurtagelin. (Tifaftiraha)

ka tirsan oo far iyada u gaar ah wadatay, ama codsatay in loogu tixgeliyo tartanka faraha.

#### 4- Language Variants

Waxaan si qoto leh u aaminsanahay inay jiraan ‘afaf guri’, ama lahjado, culummada qaar ba ku sheegaan: language variants ‘noocyo afeed’ aan heer lahjad gaarsiisnayn, haddana iyagu is buuxsha oo garaangaraysan. Waxaa jira ereyo badan, oo ka buuxa qaybta MAXAA aan la garan karin haddaan loo cuskan lahjadaha MAAY. Waxaa ka mid ah SEEDDA horseed iyo FADDA baadifad.

Dhinaca MAAY waxaa ku jira ereyada INANLAYAAL, kumana jiro ereyga INAN (Raxaweyn baan lahayn, Garraha waa leeyahay inan, ama Garraha qaarkii. Wuxuu leeyahay oo kale Garrahu *elen (gabar)*- Mauro Tosco: schizzo Gramm. Del Dialetto Karre di Qoryooley, 1989. I) Waxaa kaloo ka mid ah MY(Rxn): HERGEL(HARGAL), HERGELLE=nabad ma ku hargashay? Haddana lahjaddan ma laha ereyga HAR=HER, marka HOOS loola jeedo. Tusaalooyinku waa badan yihiin. Sidaa darteed labadan lahjaddood way isbuuxinayaan, waxayna muujinayaan in Af-Soomaaligu lahjado goboleedyada ka weyn yahay, loona baahan yahay in lahjadaha la barto, lagalana soo baxo hodontooyada luqadeed [ee] mid walba

ku kaydsan, annagoo hadafkeenu yahay gaaridda TOTAL SOMALI.

## **5- Cilmiyaynta Af-Soomaaliga**

Baahida loo qabo cilmiyaynta Af-Soomaaliga xagga eray-bixinta, turjumidda, sal u dejinta naxwaha, sarfaha, wejiyada kala duwan culuunta luqadda iyo gaarsiintiisa afka heer isku filnaasho buuxda, waxaa barbar socota baahi kale oo la xiriirta casriyaynta ereyada iyo tacaabirta aan adeegsanayno, oo looga maarmayn inay muujiyaan xaaladaha iyo runta aan ku noolnahay.

Marar badan waxaa la moodaa inay naga libranayaan aragtiyada maalin walba innala deriska ah. Waxaan u muuqanaynaa dad weli ku dheggaan sheeko xariirro, hidde baali ah iyo hab oraahyeedyo aan la saanqaadi karin xaqiiqooyinka aan ku noolnahay iyo timaaddada aan gacan-togaalaynayno. Oraahyada qaarkeed aan ku dhiirranno diin ahaan iyo akhlaaq ahaanba ma haboona, sida: Allahu Akbar waxaa tiri Islaan...; Xuunshooy ma ogtahy inuu dhintay (aabbahaa?); culummo abaar jooqta injir lagama qaado! Nin naagtaa doonaya...; cantuugo-jjiilaal can ba can buu bidaa; geel.... ma noola iyo oraahyo badan oo la mid ah, oo dhaqammadeenna reer magaalannimo ay ka gudbeen.

Maanso iyo maahmaah ba waa inaan kala soo baxnaa xaaladeheenna nololeed ee maanta, innagoo ku faraa-deegayna kaydkeenni hidde iyo dhaqan. Waxba inoo tari mayso inaan u boholyowno waayadii tegay iyadoo himiladeennu tahay inaan asaaggeenna horumaray tiigsanno. Af tayaysan, oraah edboon iyo eray micnihiisu cad yahay, tacbiir qiro iyo bisaylba leh waa inaan u gudubnaa, oo ka gudubnaa qaab-oraahed la siman dunidii aan ka soo guurnay, iyo dhaqammadeenni hore.

# XIRMADA 2<sup>aad</sup>

## Lifaaq (3)

### Tayaynta Af-Soomaaliga Warfidinta<sup>1</sup>

Halkan ujeeddadaydu ma aha inaan ka faalloodo arrimo la xiriira xirfadda warfidiyeenka, ama weriyaha, aanan aqoon u lahayn; ujeeddada qoraalkan koobani waa wanaajinta suugaanta (prose) idaacadaha.

#### 1. Hordhac

Markii la qoray 1972 ka dib, Af-Soomaaligu ma helin kansho uu ku hufmo, kuna tayoobo. 18 sanno rasmiyayntii afka ka dib qaranjabkii baa dhacay. In kastoo buugag iyo qoraallo badan la qoray, haddana ma jirin

---

<sup>1</sup> Qoraalkani waa warqad uu Shariif Saalax u qoray Idaacadda VOA, Laanta Af-Soomaaliga, Agoosto 2012. Gorfaynta qoraalkani waa faqrada 'Welwelka Maanta Jira' oo ka mid ah buugga 'Halgankii loo galay Qoridda Af-Soomaaliga (1949-1972)', bb. 30-53, qoraalka buugga waxaa raacsan tilmaamo (notes) xambaarsan xog faahfaahin ah. Sida muuqata, qoraalkan, qoraagu wuxuu dib ugu qaabeeyay si uu u gorfeeyo, talooyinna ka geysto furdaaminta mushkilad haysata sida ay warbaahintu u adeegsato Af-Soomaaliga. (Tifaftiraha)

xarummo la socdo dadaallada la geshay qoraalladaa, mar haddii ay suuleen Wasaaradihii iyo Akadeemiyadii ku hawlanaa horumarinta afka. Waa arrin loo riyaaqo in dalal badan ay ka jiraan idaacado Af-Soomaaliga ku hadla, kuwaasoo aad u saameeya gudaha dalka; iyo idaacado badan oo dalka gudihisa wararka Af-Soomaali ku faafiya, qudhoodu ammaan bay mudan yihiin.

Hayeeshee, waxaa la dareemayaa in idaacadahan weli ay u baahan yihiin in la sii tayeeyo, gaar ahaan kuwa gudaha ka shaqeeya. Anigoo weligay aaminsanaa, gaar ahaan inta lagu jiro xilliga dowlad-la'aanta, in idaacadaha ku salaysan Af-Soomaaliga ay qayb-libaax ka qaadan karaan tayaynta Afka, ayaa waxaan [sannadkii] labada kun (2000) kula taliyay Yuusuf Garaad, anigoo markaa ku sugnaa London, in BBCdu u hawlgasho si ay ugu hiran lahayd gudbin warar ku baxa Af-Soomaali tayaysan, mar hadday iyadu heli karto dad iyo farsamooyin howshaa lagu fulin karo. Soo jeedintaa BBCda lagama hirgelin. Ha ahaatee, iyadoo lala kaashaday dowladda Djibouti, wuxuu Yuusuf abaabulay 2003dii kulan aqoonyahanno lagu qabtay Djibouti, oo soo saaray qaamuus yar oo ereybixineed laysku fasirayo Ingriisi, Faransiis iyo Af-Soomaali.

## 2. Welwelka Maanta Jira

Sida ay caadadu tahay horumarka afafka iyo tayoobiddooda waxaa dhaliya qoreyaasha, gabayaasha, suugaanlayda, warfidiyeenka iyo dadka la yiraahdo ‘maandheereyaasha’ ama (intellectuals). Dhidibbada ay qolodan u aaseen rukunnada afafka, oo dadku ku jaangoosto, waa dhabbe ma guuraan ah. Ilaa maantadan aynu joogno afafkii Giriiggii hore iyo Roomaankii waxaa la yiraahdaa: weedhaas Plato ama Seneca ayaa yiri, ama Virgilius, Cicero ama Horatius. Waa marjacyadda sababtay in afafkaa maanta ay nool yihiin, lana barto (in kastoo dadweynuhu ku hadlin), saamaynna ku leh horumarinta cilmiga iyo suugaanta.

Innaga afkeennii la rasmiyeeyay, dib u dhac baa meelo badan kaga yimid, markii la siyaasadeeyay, loona yeelay midab qabiil. Dadka qaarkii ay u arkayaan in af-gurigoodu uu mudnaan ka leeyahay, ama xitaa jees-jees iyo dhaadhaajin laga dhigto. Kuwo kalena yiraahdaan afkannaga Af-Soomaali ma ba aha, iyagoon caddayn cilmi ah haysan. Dadka sidaa u fakaraya ma oga haddii afka la siyaasadeeyo, oo la waayo afkii (ama lahjaddii) la rasmiyeeyay wax walba ay fasakhmayaan, siday siyaasaddu u fasakhantay, oo u jiha-wareertay.

### 3- Dhaliilaha Qaar

1. Waxaa aad u baahsan inaan la kala bixin qodobka magaca raacaya, lab iyo dheddigba, kala soocaas oo aad u fudud. Marar badan waxaa la maqlaa: “*ururkii guul bay la kulantay*”.<sup>1</sup> Halkan ulama jeedo ereyo dhowr ah dadku marna qodob dheddig raaciyaan, marna mid lab sida: guddida iyo guddiga, labada dhawaaqba way bannaan yihiin (Af-Carabigu wuxuu leeyahay qudhiisu ereyo qaata qodob lab iyo mid dheddigba sida: ruux, dariiq, beled, xarbi iyo kuwo kale).

Sifooyin iyo magacyo sheegistooda aan loo baahnayn ayay idaacaduhu isticmaalaan, gaar ahaan kuwa gudaha. Iyadoo aad mooddo in looga gol leeyahay buunbuuninta qofka magaciisa la xusayo (emphasis) sida: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, Ra’iisal Wasaaraha Jamhuuriyadda Soomaaliya. Madaxweynaha Sh. Sh. ayaa ku filan oo lagu koobo. Dadkuna waa ogyahay in madaxweynahu yahay midka xaadirkan

---

<sup>1</sup> Weedha Af Soomaaliga waa in falka, yeelaha/faacilka, sifada, magacuyaalka iwm iska waafaqaan ‘*agreement*’ dhinacyada qofka (hadle/qofka 1aad, lalahadle/qofka 2aad ama lagahadle/qofka 3aad), tirada (keli ama wadar) iyo caynta (lab ama dheddig) iyo qofka. [Tifaftiraha]

howsha haya. Waxaa u baahan in la balballaarsho magaca iyo derejooyinka madaxweyneyaasha iyo masuuliinta dalalka shisheeye marka laga faalloonayo, ujeeddaduna tahay in laga sooco madaxweynaha dalka, ama kuwa dalalka kale. Sidaa si la eg looma baahna in la yiraahdo: Muqdisho caasimadda Jamhuuriyadda Soomaaliya. Waxaa ku filan in la yiraahdo: Muqdisho, ama Caasimadda. Ogaanshahay, Muqdisho magaalo la sami ah ma jirto.

#### **4. Ereyo Micnahooda Mugdi ku Jiro**

Aragttidayda, warka dadweynaha loo bandhigayo, runnimadiisa ka sokow, wuxuu u baahan yahay in loo tebiyo si toos ah, aad u cad, leeyahayna micne fudud oo kooban. Hayeeshee, marar badan waxaa shaac noqday isticmaalka ereyadan micnahoodu mugdi ku jiro, ama lagu nusqaaminayo qofka iyo isha warku ka soo jeedo, laga yaabe in uusan warfidiyuhu xumaan uga danlahayn. Si tawaadduc ku jiro (modesty) hadduu qofka warka laga qaadayo ereyadan soo socda isagu sheegto waxba kuma jabna: 1) Carrabbaab; 2) Tibaax; 3) Bidhaamin; 4) Ifin; 5) Dhawaajin.

Micnaha saxa ah ee carrabbaabiddu waa gefka carrabku soo dafo (lapsus, slip of the tongue). Waqtigaynu joogno

ereygan waxaa loo isticmaalaa war la sheegay, qaarkiina weli shareeran yahay. Tibaaxidduna waa war la sheegay, si buuxdana loo hubin jiritaankiisa. Bidhaamintu waa war weli faahfaahsanayn. Marka laga faalloonayo dood ama war saxaafadeed la qabtay, waxaa habboonaan lahayd in ereyadan shakiga laga saaro oo la yiraahdo: sidaad sheegtay ama aad qeexday, aad caddaysay, aad koobtay, soo bandhigtay, si looga fogaado in war ebyoon oo la caddeeyay aan har loo yeelin iyo shaki. Ereyadan shakiga wata waxay nusqaaminayaan dadkii iyo ilihii warka loo nisbeeyay. Ereyga ah 'waxaad ka dhawaajisay' waa af-xumo bareer ah qof ama il wareed lagula kacayo!

## **5. Xaggee Sixidda u Baahan?**

Shayga la tilmaamayo ereyga si waafi ah u cabbiraya 100% waa in loo doorto, ee ma aha [in la adeegsado] kan daboolaya micnaha shayga 25% ama 50%, haddii loo heli karo. Tusaale: iska-horimaadkii nin baa lagu toogtay, iyadoo la ogyahay in qof lagu dilay (sidaan ka maqalno idaacadaha qaar), meeshii ay toosnayd in la yiraahdo: qofbaa lagu dilay. Tusaale kale: dadkii beer bay fasheen, oo loola jeedo meseggo ama galley ayaa u soo go'day. Dad baa hawlaha beertoo idil *FALID* u yaqaan. Hayeeshee, faliddu waa heer ka mid ah hawlaha beerta,

markuu saracu soo fufu ee yerehe soo dheeraado. Tusaale kale: tartan kulul baa loogu jiraa MADAXNIMADA DALKA, meeshii laga oron lahaa: MADAXWEYNNINIMADA DALKA. Maxaa wacay, laga billaawo hawl wadeenka dowladda, saraakiisha, ilaa madaxweynaha waa madaxdii Dalka. Waxaan maqallaa dowlad shisheeye ayaa dalkeenna shidaal ka qodanaysa, si xad-gudub ah, iyadoon marna la sheegaynin rugta shidaalka laga qodayo (warkaa, xitaa hadday wax ka jiraan, waa in la yiraahdo: meel hebla shidaal-baarid baa dal shisheeye ka wadaa, oo rugta la sheegaa, si aan mugdi ku jirin. Illeen shidaal-qodiddo waa marka lala soo baxayo saliidda, hawlo badan oo qaybo kala duwan maraya ayaa qodidda ka horreeya).

Waxaa habboon in ereyga la dooranayo uu hufan yahay xagga edebta, af-suuqina ahayn, xiniif la qoonsadana lahayn. Waxaan idaacadaha qaar ka maqallaa: hoteelka wuxuu leeyahay 'jiim' aad baruurta isaga ridid. Waxaa ka habboonayd in la yiraahdo: 'jiim' aad caafimaadkaa ku ilaalisid, caafimaadkaa ku xoojisid, ama miisaankaa ku xakamaysid, isaga riddid. Si caqli-gal markaan u hadalno, jimicsiga hilib iyo baruurba waa yereeyaa. Waxaan shaki lahayn in weedh usluubsan ay hadalka toosinayso oo tayaynayso, dhabbahaasna ay ku jirto qaddarinta warka

iyoo qofka soo jeediyo.

### **5.1 Ereyo isku Micne ah (Synonymous)**

Ereyo isku micne ah (synonymous) ama isu micne dhow, mar mar la kala beddelan karo. Haddana aan isku miisan ahayn baa jira. Eray baa 100% daboolaa micnaha weedha. Mid kale 50% ilaa 20-10%, sida soo socota:

Tus. 1: Waarid 20%, raagid 100%, joogid 50%, daa'imid 25%.

#### **Faallo:**

Heshiis waara; nabad waarta; barwaaqo waarta; walaaltinimo waarta.

Heshiis raaga; nabad raagta; barwaaqo raagta; walaaltinimo raagta.

Heshiis joogtaysan; nabad joogto ah; barwaaqo joogto ah; walaaltinimo joogto ah.

Heshiis daa'ima; nabad daa'inta; barwaaqo daa'inta; walaaltinimo daa'inta.

Si caqligal ah markaynu u hadlayno, ereyga isticmaalkiisu

habboon yahay, ama wata micnaha 100% waa raagidda, waxaa ku xiga joogidda (joogto ah, ama joogtaysan, waxaa dadku isugu hambalyeeyaan: IFKA NOO JOOG, carruurtana waxaa lagu yiraahdaa JIROO JOOG, loola jeedo cimri dheer Alle ku sii. Ha ahaatee, mar uun dhammaan doono. Mana aha WAARID iyo DAA'IMID), oo aad micnahoodu uga fudud yahay waarid iyo daa'imid.

Waariddu, sidaan anigu qabo, waa eray-bixin laga soo dhambashay laqbada kutubta Fiqiga Islaamka. Nolol iyo macaamilaba, wax dunida ku waarayaa ma jiraan. DAA'IMIDDANA waa la micne.

Tus. 2: Sugid 100%; akidid 100%; adkayn 50%; ayidid 25%; taageerid 25%; raacid 20%.

Faallo: Lixdan eray ee isu micne dhow, hal arrin baa kulmisa: inay sugayaan, akidayaan, adkaynayaan, ayidayaan, taageerayaan oo raacayaan shay hore u jiray ama dhacay.

*Adkaynta, akididda iyo sugiddu* way isaga dhow yihiin seddexda eray oo kale. Tusaale: dhacdadan waxaa sheegay hebel, Calina waa akiday, Axmedna wuu sugay, waxaana ku sii raacay Bile. TAAGEERIDDU waxay ku jirta GOOBAABTA kulmisa micnaha shanta eray. Wayse,

yerehe, ka duwan tahay in si toos ah u beegsanayso qofka ama fikraddiisa. Tusaale: CADAALADDA hebel baa taageersan iyo XUQUUQDA Aadanaha, ama cabbiraadda ra'yiga xorta ah, waxaa ku raacay hebel. RAACIDDU waa ayidaad aan aad loo xoojinin. Tusaale: Aragtida hebel ayaa la raacay, waxayna tilmaamaysa taageero fudud (passive) noqon karta.

Tus. 3: Welwelid (werwerid) 100%; walbahaarid 100%; murgid 50%; hammiyid 25%.

Faallo: Afarta eray way isu micne dhow yihiin. Seddexda eray ee hore way isaga dhow yihiin hammiyidda (Af-Carbeedka innagaga timid), oo micnaheedu aad loogu dhoweeyay habka isticmaalka weedha Af-Carbeedka, ay ka soo jeedo, sida: rabitaan (sida lagu xusay Suuratu Yuusuf, sheekadii Nebiga iyo Zuleekha), hanqal-taag, fekerid, jirin, u halgamid. Hayeeshee, waa HAMMIYAY waxay la micne wadaagtaa waa MURUGOODAY. Waxaa la oran karaa: arrintaa walwal bay ku haysaa dadweynaha. Way ka habboon tahay in la yiraahdo HAMMI ama MURUG bay ku haysa. Sidaa aawadeed HAMMI waxaa laga door biday WELWEL. In kastoo ereyadu ay isu micne dhow yihiin haddana way kala mudan yihiin dhismaha hadalka, ama jumlada. Waxaa iyana jirta in

ereyo badan oo laga soo amaahdo Af-Carabiga (fiiri Saalax Maxamed Cali, Mu'jam Al-Kashaaf), loo heli karo, badiba, kuwo Af-Soomali ah sida: milix=cusbo; weji=fool; kifaax=halgan; albaab=afaaf; dallaayad=hoosin (Maay: ira-geer); suxuur= hiraabsi; subax=aroor; xayawaan= xoolo; barxad= bed; raxmad (loola jeedo roob): roob, naxariis; qado= hariimo; quraac (lahjad Yaman)= Af-billow; caraf=udgoon, carfin= udgayn; faakihaysi= maaweelid; ceebayn= canbaarayn; cadaab=naar; janno=beer, iyo kuwo kaloo badan.

Tus. 4: xoog, itaal, lixaad, tabar (tamar), awood.

Faallo: Xoog buu cuskaday; awood buu cuskaday; tabar buu cuskaday; Itaal buu cuskaday; lixaad buu cuskaday waa isku micne. Haddana markaad leedahay: waa laba-lixaadsaday ma oron kartid waa laba-awoodsaday, ama laba-xoogsaday. Ereyadan isku micnaha eg, mudnaan bay u kala leeyihiin dhismaha oraahda ama jumlada. Tusaale: libaaxii dhurwaa buu u itaal-sheegtay; u lixaad sheegtay; u awood sheegtay; u xoog sheegtay. Waa u Tabar-sheegtay micne caksi ah ayay la imanaysaa, loola jeedo: tabar-yaradiisa ayuu u sheegtay. Hebel baan u-tabar-sheegtay, waxaa looga jeedaa: tabar-yaridayda ayaan uga xogwarramay.

Waxaa ayaamahan aad u soo shaac baxday oraahda: dadkaa waa reer- tabareed, loola jeedo: way tabar yar yihiin, way hanti la' yihiin, waa sabool. Maxaa wacay afku waa cunsur nool oo isqaabeeya isna micne rog-roga. Awoodda (power) qudheedu micnaheedu wuu tarmay: waxaan maqallaa awood-qaybsi, awood-maroori, awood-raadin iwm. Isla waqtigaa ma quruksana in la yiraahdo: Itaal-qaybsi, ama Itaal-wadaag, lixaad qaybsi. Sidoo kale marka la leeyahay: waa laba-lixaadsaday (xoog buu u socday), lama dhihi karo: waa laba awoodsaday, ama waa laba-itaalsaday, ama waa laba-tabaraystay. Waqti aan fogayn dabka korontada (electricity), waxaa loo yiqiin: Xoogga Korontada. Sida la xusuusto, waxaa jiri jirtay Wakaaladda Xoogga Korontada. Xilligaynu joogno, beddelka xoogga korontada waxaa dhaqan-gashay weedha: Tamarta (energy). Waxaana habboon in la raacsho: korontada (electric), ilaha tamarta oo badan awgood.<sup>1</sup>

Tus. 5: Dherer 25%; fogaansho 100%; durugsanaan 50%;

---

<sup>1</sup> Eraybixinta Sayniska, erayga xoog waxaa loo adeegsaday “force” ama “قوة”, halka erayga tamar loo adeegsaday “energy” ama “طاقة”. Sidaas darteed, magaca Wakaaladda Xoogga korontada, adeegsiga erayga “xoog” waxay hareer martay eraybixintii cilmiga ahayd ee Wasaaradda Waxbarashadu taabbagelisay. (Tifaftiraha)

shishe 25%.

Faallo: Hebel meel dheer buu tegay (degay, jiraa, aaday), meel fog buu tegay, meel durugsan buu tegay, meel shishuu tegay. Waa ereyo isku micne ah, haddana ku kala xoog badan dhismaha oraahda. Iyadoo dherer tilmaamayo qoto, fiiqanaan sare iyo fogaansho aageed. Fogaanna waxay tilmaamaysaa durugsanaanta aagga. Waxaa la micne ah durugsanaan. Shishe labadan micne baa aad ugu dhow, haddana ka caarad gaaban. Dal shisheeye markaynu leennahay ma aha keliya inaan fogaansho juqraafiyayeed keli ah tilmaamayno, ee waxaan u jeednaa, oo kale, dal koraad naga fog xagga shucuurta niyadda, dhaqanka iyo dan-wadaagga. Mararka qaar, dad iyo dal shisheeye waxaan ula jeednaa dal-cadaawo. Waxaan arkaynaa, sidaa aawadeed, in eray micnihiisu kooban yahay, oo aan raamo badan lahayn, kaga habboon yahay dhismaha oraahda, ama jumlada, ereyada u micnaha dhow, oo firqo badan yeesha.

Afartaa ereyba waa koobeyaal meeled, ama darfi meeled (darfu makaan), ma aha darfiyaal seben (darfu zaman). Sidaa aawadeed waa laxni in la yiraahdo: “batteriga Fahaari” wuxuu ku wadayaa waqti fog! Sidaan ka maqalno idaacadaha Af-Soomaaliga ku hadla qaar.

Marka la leeyahay: waqti fog, xilli fog, xusuus fog, saban tegay ayaa loola jeeda, ee ma ahaa waqtiga soo socda ama timaaddada ku beegan. Waa arrin kale marka la leeyahay: faalladii baad ku dheeraatay ama hadalkii, loola jeedo waqti badan baad u hurtay, ama ku lumisay.

## **5.2 Eray-Koobid**

Marar badan waxaan maqallaa: tacshiirad baa lagu furay, la toogtay oo dhintay oo la dilay. Waxaa ka habboonaan lahayd: shilkaa qof baa lagu dilay, ama qof baa ku dhintay.

## **5.3 Ereybixin**

### **5.3.1 Raadraac Taariihkeed ee Ereybixinta**

#### **Af-Soomaaliga**

Waa dhif iyo naadir in afafka dadka dunidu ku hadlaan la helo mid mid saafi ah, oo ay ka maran yihiin, ereyo afaf kale ka soo galay, ama ay ka soo amaahdeen. Waxaa la sheegaa, in waqtigan ay jiraan afaf bidaa'i ah, ay ku hadlaan bulshooyin aad u tiro yeryer oo ku go'doomay jasiirado ama kaymaha dhul-sooruhu maro ee Australia, Aasiya, Afrika iyo Ameerika afafkoodu saafi lagu tilmaamo. Hayeeshee, waxaa caado ah in afafka dunidu ay

isa saameeyaan, ereyo kala amaahdaan, iyadoo loo qasdiyay ama si kama' ah ku yimid. Iyagoo micnihii asliga ahaa ku dhaqangalay, ama mid ku dhow ama ka soo horjeeda, oo cagsigiisa ah. Af-Ingriisigu wuxuu afkeenna ka soo amaahday: waabeeyo iyo gerinuug u dhigma sidaynu u naqaan.<sup>1</sup> Dhinaca kale, ereyda lahadaha Koofurta Soomaaliya ay Af-Talyaanniga ka soo amaahdeen waxaa ka mid ah: Cattivo oo loola jeedo qof xun, wax xun ama liita, xaasid ah ikhlaaqdiisuna xun tahay. Laakiin dadka ereygan isticmaala, badiba, waxay u yaqaanaan: qof howdaar ah, karti leh, libaax ah. Marka afkeenna lagu yiraahdo: hebel waa jinni, waxaa loola jeedaa waa karti iyo awood badan yahay, ama caqli sare leh. Faransiiska, Carabta, Talyaaniga iyo Ingiriiskuba waa innala mid sidaynu u naqaan: (Fr.): diable au corps: jin baa wada; guulayste (Cr.): haadhaa cifriit [هذا عفریت], (In.) works as a devil; (It.): diavoleria: loola jeedo hawl karti iyo caqli wax lagu qabto, ka dambayso. “diavolo” (jin) wuxuu ka yimid Giriigga (ee hore) ‘diabolos.’. Afafkaa reer Yurub ‘jinni’ oo Af-Carbeedka ka yimid waxay ka soo dhambasheen ereyga: ‘genie, ge’nie, genio. Jinniga, cifriitka iyo shayddaankaba

---

<sup>1</sup> Af Ingiriisiga waxa ay ku yihiin erayada ‘wabayo’ iyo ‘Gerenuk’; sidoo kale, erayga ‘ouabain (Chemistry)’ wuxuu isna ka soo jeedaa wabayo. Waxaa iyana jira ‘dibatag’ iyo ‘beira’ oo Af Soomaaliga ku ah Dabataag/dibtaag iyo beyrac. (tifaftiraha)

innaga waxaynu kala nimid Diinta Islaamka. Weyna dhici kartaa in dadka Soomaalida qaar ay magacyadan Islaamka ka hor yiqiinneen.

### **5.3.2- Ereybixinta Af-Soomaaliga**

#### **5.3.2.1- Tarjumidda**

Tarjumiddu waa u rogidda Af-Soomaaliga eray ka mid ah afafka qalaad, oo mid u dhigma laga heli karo Af-Soomaaliga. Sida ay caadadu tahay Carrab (lisaan, lingua, language) walba waxaa laga helayaa ereyo uu la wadaago badiba carrabbada kale [ee] dunida lagaga hadlo. Weliba dunidan maanta isu furan, iyo xiriiridda dadyowga oo aad u ballaaratay waxay fududeeyeen af-celinta [tarjumidda] afafka, uu ka dhasho is-fahan guud. Culummada ku hawlan afafka waxay dejiyeen qaamuusyo, af-koobeyaal (word list) laga barto luqadaha ummadaha dunida.

Dadka Af-Soomaaliga ku hadla waxay yiqiineen afafka dadyowga la ollogga ah. Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa buug uu ka tegay nin ka tirsanaa Boqortooyadii BADHAALISADII [Ptolemaic Dynasty] Masar ka talin jirtay, isagoo qoraalka ku magacaabay: ‘Ku wareegidda Badda Cas’ [Periplus of Erythrean Sea]. Qoraagan isagoo tilmaan ka bixinaya xeebaha iyo magalooyinka Badda

Cas, oo ganacsi wanaagsan lala yeelan karo, wuxuu warbixintiisa ku sheegay in Soomaalida iyo Yamaniyiintu Af qur ah, Carabi loo qaatay, ku wada hadlaan, markay wax kala iibsi is dhaafsanayaan. Baareyaal-cilmi oo badan waxay isku raacsan yihiin in buuggaa la qoray qarnigii 2aad ee Miilaaddiga. Taariikhyahanno badan waxay gaareen xogag badan oo qiraysa in qaybo reer Ximyrir iyo reer Saba, ee Yemantii hore ay soo degeen xeebaha Soomaaliya, gaar ahaan magaalooyinkii Banadir, Islaamka ka hor, dadkay la soo degeenna ay is dheehen, dhaqan iyo luqadba. Markuu Islaamka soo galay dalka Soomaalida, waxaa iyana sugan, in afkii Quraanku sii fidiyay garashada Af-Carabiga, sidii hore ka sii qoto-dheer. Waxaa iyana mali-awaali karnaa in afkeenna ay barten dadyowga ollogga innala ah, ama aynu wadaagnay xiriir ganacsi, dhaqan iyo is-gashaan-buursi.

Ibnu Badhuudha (Abuu Cabdullaahi Maxamed) markuu soo booqday Muqdishu 1331 Miilaaddiga, wuxuu warbixinta sodcaalkiisa ku sheegay in Boqorkii magaalada xukumi jiray Af-Carbeed iyo Af-Soomaali ku hadli jiray.<sup>1</sup> Waxaan faallo u baahnayn in dadka magaaladana ay afkaa

---

<sup>1</sup> Ibn Batuta wuxuu sheegay in boqorku ku hadli jiray Af-Maqdashi, isla markaana yaqaanay Af-Carabiga. Af-Maqdashi waxaa loo fahmay inuu Ibn Batuta ula jeedo Af-Soomaali. (Tifaftiraha)

yiqiineen.

Barashada afafka qalaad waxaa saldhig u ah lahaanshaha carrab gaar ah, oo ereyadiisa la barbar-dhigo midka aqoontisa waqtigaa la kororsanayo. Tarjamadduna waa dhabbaha loo maro afka qalaad barashadiisa.

Dhinaca Reer Galbeedka waxaa la hayaa qoraal uu dhigay David Salt, sodcaale Ingriis ah 1814, labo qarni ku dhowaad, oo ereyo badan oo Af-Soomaali ah u rogay Af-Ingriisi. Waa waqtiguu bilaabanayo in reer Galbeedku xoog ku qabsadaan dalalka Afrika. Sodcaaleyaasha iyo sahammiyeyaasha Reer Yurub (explorers) bad iyo berriba waxay wareeg ku ekaynayaan Qaaradda affarteeda barjiho. Tarjumidda afafka dadyowga Afrika, nuxurkeeda cilmiyeed ka sokow, waxaa looga dan lahaa, in dadka lagula hadlo oo la fahmo sidii loola dhaqmi lahaa, lana oggolaysiin lahaa in dad shisheeya ah la soo dersaan, sida ugu khasaaraha yarna xukun cusub loogu soo dul-dejin lahaa. Bartamihii Qarnigii 19aad (1840-50) waxaa jiray dad badan oo Soomaali ah oo bartay afafka Reer Yurub ku hadli jiray.

Tarjumidda Af-Soomaaliga wuxuu billowday 1814, markuu sodcaale Ingriis ah ereyo badan, oo afkeenna ah, uu Af-Ingriisi u rogay. Haseyeeshee waxaan dareensan

nahay in erybixinta la fududaysto, ama garasha la'aannida dhabta ah ee ereyga afka qalaad ay sabab u noqoto in fasiraaddii xumato, ama qalloocato. Tusaale: power sharing micnihiisu waa: awood-wadaag ee ma aha awood-qaybsi. Micnahan dambe awooddu (haddayba jirto) waa mid kooxiba qaar qaadatay, oo lagu kala tegay (sidii inta ka hor dalka ka dhacday oo qolo waliba waxay qayb u heshay cayriinka lagu siiyay, siday ashigooda ugu qaybsan lahaayeen, waana mindhaa sababta arrintu weli u murugsan tahay!). Ereybixinta qalloocan waxaa ka mid ah: Dowladda Hoose, oo laga soo fasirtay “Local Government” sidii looga yiqiin Woqooyiga Soomaalia (dadkuna u yiqiin: lug atoor). Meejaa ‘hoos’ meelna kama soo geli karto. Waxaa habboon in lagu magacaabo: ‘dowladda deegaanka’. Dhinaca kale, waa hore ayaa la kala saaray State & Government, oo lagu beddelay labo eray oo Af-carbeed ah: Dowlad iyo xukuumad. Waa dhif inaad idaacadaha ka maqashid ereyga xukuumad.

#### **5.4 Ereyada Juqraafiga iyo kuwa Magacyada Dadka**

Idaacadaha oo dhan baa ku dhib qaba ereyada juqraafiga, gaar ahaan kuwa deegaanka. Marar badan dhawaaqa khaldan ee ka soo yeera idaacadaha dibadda ayay jilaan kuwa gudahu, khaladka horena way sii faafinayaan. Dad

yar ayaa toosiya ku dhawaaqidda magacyada rugaha dalalka shisheeye, inta kale waxay raacaan sida Franjigu ugu dhawaaqo. Su'aasha halkan ku jirtaa waxay tahay: dhabbehee la habboon inay raacaan idaacadahu, dibad iyo gudaba, sida warbaahinta Reer Galbeedku ay u minguuriso magacyada iyo rugaha, ama sida dhabta ah dadka deegaannadaa shisheeye ay ugu dhawaaqaan? Waxaan ku talin lahaa in dhabbe dhexe la qaato, mar hadday jiraan dhawaaqyo aad u cul-culus (sida Shiinaha). Waxaa tusaale loo qaadan karaa walaahowgii la xiriiray, waayahan dambe, magaalooyinkii dalka Suuriya. Xittaa idaacaddiinu way laba carrab-labaysay sida: Aleppo iyo Xalab, wariye kasto magacuu rabo doorto. Ha ahaatee, marna la maqli mayo Suuriya, oo laga door-biday Syria, oo raacsan habka Reer Galbeedka.

Weriyeaal badan uma kala baxsana dhismaha magaca qofka shisheeyaha ah, gaar ahaan Frenjiga. Waxaana isaga qasan Family name iyo First name. Tusaale: John Atkinson ama Luigi Benedettini, waxaa dhacda in maantoo dhan idacadahu ku celceliyaan: waxaa yimid Mr. Luigi ama John oo wafdi hoggaaminaya, kumana baraarugsana in magac-dhowgaa qar-jaban yahay,

dhibaatana ka iman karto.<sup>1</sup>

## 6- Talooyin

Afkeennu waa hodan, weynu awoodnaa inaan sii tayayno, oo casriyeyno.

1. Tayaynta aan xusnay waa inay ku qotontaa mabda'a sare u qaadidda hawlaha saldhig kastoo idaacadeed.

2. Waa in la ururiyo erybixin si wanaagsan loo darsay, sida ugu wanaagsanna u dabooli karta ereyga qalaad ee la micnaynayo (waxaan xusuustaa in Guddigii Af-Soomaaligu ay ka qaadatay gelin dhan si uu u dhaliyo eray u dhigma: dean of Faculty, ama president. Waxaa dood dheer ka dib laysku raacay ereyga HORMUUD). Waxaa eray-bixinta feer socon karta magac-bixin, oo ah ereyo Af-Soomaali ah si toos ah loo curiyo. Ereyadaa in keyd gaar ah lagu hayo ayaa shardi ah, si loogu adeegsado warbaahinta, ama looga dhigo eray-koobe yar (glossary).

---

<sup>1</sup> Dhaqanka waddamada Galbeedka, magacyada *Donald Trump, Barack Obama & David Cameron*, haddii magac keliya lagu kaaftoomayo waxaa la qaataa magaca qoyska oo ah *Trump, Obama & Cameron*; waase khalad in lagu kaaftoomo magaca qofka keliya, sida *Donald, Barack & David*. (Tifaftiraha)

3. Warfidiyeennada, gaar ahaan kuwa gudaha, aqoonta guud ka sokow, waxay u baahan yihiin tababarro jooqta ah (in service), si tayaynta loo gudagalo.

4. Waxaa aad u habboon in idaacadaha waaweyn, sida VOA Af-Soomaaliga, ay ku guubaabiyaan dadka tartan suugaaneed ay qoreyaan SHEEKOOYIN GAAGAABAN, kuwooda wanaagsanna idaacadaha laga siiddaayo oo la abaal mariyo, si ay saamayn ugu yeeshaan tayaynta afka, iyo horumarinta hab-qoraalka.

Ugu dambayn, waxaan qaddarin iyo bogaadin u soo jeedinyaa VOA Af-Soomaaliga, oo iigula muuqata in muddo gaaban ku tabar-gashay, iyadoo hanatay kalsoonnida Soomaalida, taaganna heer horyaalnimo. Hor u socda.

Qore: Shariif Saalax Maxamed

Muqdisho 1da Agosto 2012

## Lifaaq (4)

### Caddayn ku Saabsan Af-Soomaaliga<sup>1</sup>

Madaxa laanta Af-Soomaaliga

Idaacadda BBC-SS

**Ujeedo:** CADDAYN KU SAABSAN AF-SOOMAALIGA

#### 1- [Maay waa Lahjad ka mid ah Af-Soomaaliga]

Barnaamijka weydiin iyo warcelin ee baxay galabtii khamiista 17kii Jannaayo 2002. Waxaad u wareejiseen Prof. Maxamed Xaaji Mukhtar inuu ka jawaabo su'aal la xiriirtay sifaha afka Maayga.

Waxyaabo badan oo uu sheegay Prof. Mukhtar oo aanu muddo 26 sanno ah iska kaashaneynay cilmi baarista la xiriirta Soomaaliya, waan ku taageersanahay, hase yeeshee waxaan rabaa in aan caddeymo ka baxsho saddex qodob oo ka mid ahayd jawaabihiisii oo kala ah: (1) Guddiga Af-Soomaaliga oo la dhisay Jannaayo 1971kii,

---

<sup>1</sup> Qoraalkani waa warqad Shariif Saalax u qoray md Yuusuf Garaad oo ahaa madaxa Laanta Af-Soomaaliga ee BBC-da.

tixgelin ma uusan siin afka Maayga markii uu eray bixinta dejinayay, isaga oo Afcarbeedka kala soo baxayay fasirka ereygii laga waayo Af-Soomaaliga. (2) Afka Maayga wuxuu la siman yahay afka Gaallada (Oromada) iyo kan Beejada Suudaan degto. (3) Waxaa jira abjaddiyad AfMaaygu leeyahay.

Dhibicda hore Maxamed Xaaji Mukhtaar waa markii labaad ee aan ka maqlo BBC sannad gudaheed isaga oo arrintaa kaga hadlaya. Taas ayaa keentay in aan ka jawaabo dhaliishaas ama tuhunka ah in uu guddigu ka gaabshay gudashada waajib uu xambaarsanaa. Anigoo ahaa guddoomiyihii Guddiga Af-Soomaaliga, kuna hadlaya magaceyga iyo kan saaxiibbaday inta nool, waxa aan rabaa in aan caddeeyo, anigoo dhaliil iyo isdhaliilba diyaar u ah, marna inaanay ku fekerin in Afmaaygu ka duwan yahay luqadda Soomaaliga. Waxaa kale oo la wada ogsoon yahay Maay iyo Maxaa (ama maxaa tiri iyo Maayteri) uu yahay labada qaybood ee uu Af-Soomaaligu u qaybsamo. Sidaa awgeed nooma muuqan sabab aanu Maayga u takoorno oo aan ka bixinno maqaamka uu ku leeyahay afkeenna.

Qoddobka labaad afka Maayga baarista luqadeed ee ilaa iyo haatan la gaaray waxay caddaynaysaa in uu yahay

lahjad (fiiri “Saalax Maxamed Cali "Shariif" the unity of Somali Language in the proceedings in Somali studies international congress held in Rome May 1986kii.edited by Annarita Puglieli”; Waliba “Cabdalla Cumar Mansuur ‘some traces of Somali History in Maay Dialect’ proceedings in of the second international congress of Somali studies, Hamburg 1983kii”. Waxaa isaguna sidaa qaba Marcello Lamberti ‘linguistic situation in Somali Republic’ proceeding-ka kor ku xusan. Sidoo kale Giorgio Banti, isla proceeding-kan. Weliba Enrico Cerulli oo lahjadda Soomaaliga u yiqiin Language Variants iyo Martino Mario Moreno ‘*Il Somalo della Somalia*’ uu kaga hadlayo lahjadaha Soomaalida badankood. Hase yeeshee qoreyaasha qaba Maay in ay lahjad tahay dhawr bog bay buuxinayaa inta aan xusnayna innagaga filan.

Sida caadadu tahay Af-Soomaaliga ayaa lala simaa afafka kale ee bahda Kushiitikada.

Qaybta saddexaad ee farta ku saabsan waxaa jira niman aqoonyahanno ah oo ku dadaalay FAR in ay u dejiyaan afka Maayga 1992 lagumana guuleysan iyadoo ay ugu wacneyd la tashi la'aan dadka yaqaan culuumta afafka (linguistics). Shiddaday isbadeen looma baahneyn, anigu qudheyda lahjadeyda aasaasiga ah waa Maayda Xuddur

oo la yiraahdo waa midda ugu takhtisan, kuwa lagaga hadlo arlada Raxanweyn oo dhan. Aragtidayda marka la qorayo afka Maayga xarfaha hadda aan qorayo unbaa la isticmaalayaa oo lagu kordhiyay keliya dhawr dhawaaq oo Maayga u gaar ah sida G (jiimka carabiga), GN (sida Talyaaniga OGNI ama Spanishka SEGNOR), NG (sida Ingiriiska giving), J (oo leh dhawaaq ka duwan maxaa tiri, dhawaaqa xarafkan waa isla Plato-Velar oo neef yar dib loo celinayo. Waxaa shaneeeya A (oo mar walba kalmada dhamaadkeeda gasha. Dhawaaqeeduna waxa uu u dhexeeyaa ‘a’ iyo ‘e’ oo neefsasho tufid ah la socoto sida QAANSA(h) Qaanso. Hase yeeshee mar haddii dhawaaqaa uu joogto yahay oo uusan isbedelayn waxaa loo qorayaa A caadi ah sida Maxaada, Alifka, Illinka, bishA, AlifkA, IlbaabkA, billA mlm. Sida laga warqabo afka Maayga kuma jiraan dhawaaqyada PHARYNGALKA loo yaqaan oo cunaha ka soo baxa sida X(ha isu rogto) C (a isurogta) iyo KH (k isu rogta); fiiri “Saalax Maxamed Cali Usuulagha Alcarabiya Maay iyo Maxaatiri” iyo “PHONOLGY of Somali Dialect. (realization of KH sound)”.

## 2- Arrimo kale

Jamhuuriyada Soomaaliya waxaa looga hadlaa afaf kale oo Maay iyo Maxaatiri toona aan ahayn sida afka Booranta ama Oromada, gaar ahaan afka uu ku hadlo Garraha degan Ceelwaaq,<sup>1</sup> afka Baajuunta iyo Kan Baraawaha oo ah lahjado ka tirsan Sawaaxiliga.

Guddiga Af-Soomaaliga waxa uu ku qanacsanaa in afka Maayga laga soo ururiyo ereyada gaarka u ah. Qaamuuska Yaasiin Cismaan Keenadiid oo ahaa kii guddiga la soo hordhigay inuu lafo guro waxaa ku jiray ereyadan Maayga ah:

	<u>Maay</u>	<u>Maxaatiri</u>
1.	Booddo	Tagfi
2.	Boojaal	digaagad yar
3.	Dhoobooy	dhul carrosan ah

---

<sup>1</sup> Inkasta oo ay meelo badan isaga mid yihiin, haddana way kala duwan yihiin afka ay ku hadlaan Beesha Garre ee degan Shabeellaha Hoose iyo Beesha Garre ee degan Ceelwaaq iyo Waqooyi Bari Kenya. Af Garreha looga hadlo Ceelwaaq iyo Waqooyi Bari Kenya waxaa cilmi ahaan lagu tiriyaa lahjad ka tirsan afka Oromada ama Booranta; halka Af Garreha looga hadlo gobolka Shabeellaha Hoose uu yahay lahjad ah Af Soomaali. (Tifaftiraha)

- |    |        |         |
|----|--------|---------|
| 4. | Wadday | Saaxiib |
| 5. | Istun  | .....   |

Intaa way ka badan yihiin ereyada aan sheegayno.

Labada Lahjadood waxa ay wadaagaan ereyada afka oo dhan, haddii laga reebo 10% ay ku kala duwan yihiin.

Maay iyo Maxaa (Standard Somali) xagga ku dhawaaqida weedhaha waa sidatan:

- |    |         |        |
|----|---------|--------|
| 1. | Arra    | carro  |
| 2. | Goriya  | goroyo |
| 3. | Miir    | Miyir  |
| 4. | Widaang | wadaan |
| 5. | Dhug    | dhug   |

Ninkasta oo magaalo joog ah durba wuu fahmayaa haddii uu si miyir leh u dhageysto lahjadda Maay iyo Maxaa. Laakiin dad badan iskuma luraan in ay bartaan lahjad kale. Kan ku hadlaya Maxaada wuxuu yiraahdaa "afka shimbiraha miyuu ku hadlayaa" markuu maqlo afka Maayga. Maaygana marka uu isyeelyelayo wuxuu yiraahdaa QALAQ QALAQ ma afbaa. Waana caado aadane. Waxaan ka digi lahaa in la labanlaabo ereyga Maay oo laga dhigo Maay Maay oo xaqiraad loo qaadan karo ama (demeaning).

### **3- Circular Somali (Af isku Wareegsan)**

Lahjadaha Af-Soomaaliga waa kuwo iyaga is ebya, oo isxoojiya, si afka “Standard Somali” miisaankiisu uu buuxsamo waxaa lagamamaarmaan ah heerka hore in lahadaha Soomaalida la barto, heerka labaad afafka Kushiitiga. Ereyo ku jira “Standard Somali” ruuxu si buuxda uma fahmi karo hadduusan baran lahadaha kale.

*Tusaalooyin:*

BAADIFAD waa eray lammaan oo ka kooban baadi iyo fad. Afka Standard Somali waad ka helaysaa Baadi, laakiin FAD waa inaad ka doontaa Maay, waxaana looga jeedaa madaxfurasho laga dhiibayo gabadha la guursanayo (yarad). Waxaa ereygaa hore la mida HORSEED. Seed wuxuu ka yimid SEEDOW (tegid) horfiiq ama hormood oo Maay ah.

Ereyga Minfiiq, Minxiis lammaanaha qaybtiisa hore waa Maay, ee ah Min iyo Guri. Ereyada macnahooda oo buuxa Maayga laga helayo waxaa ka mid ah Dhaashi, (dhaaysa Maay subag) Beel Garre wuxuu u yaqaan Saaxiib; SO' hilib Maay; TEBIN tabow Maay tegid; SHIID waa Maay dhagax; MOODAL Jiiddo bakhey!; diidid reebid. Sidaa si le'eg ereyo badan oo ku jira afka Maayga si buuxda looma

fahmi karo haddaan Maxaada laga raadinin sida lammaanayaasha INANLAYAAL, DAACQURUN. Ereyada inan iyo qurun maayda kuma jiraan, fiiri “Saalax Maxmaed Cali II Somalo circolare 1992kii” oo ah ESSAY aan idiin soo diri karo.

Dadka afka Maayda darsa waxay ka welwelsan yihiin sida xawliga leh ee uu u fasakhmayo afkaas, gaar ahaan markii la qoray Af-Soomaaliga lagana dhigay qalab waxbarasho. Arrintaa waxay dedejisay khalkhal luqadeed ku sii fidiyay Maayga 40kii sanno ee ka horreeyay rasmiyaynta Af-Soomaaliga. Facaha dhallinyarada ah ee maanta Maayga ku hadla (Bakool, Bay, Gedo, Jubbada Dhexe iyo Banaadir) ama magaalooyinka lagaga hadlo waa mid lala amakaago. Wuxuu isu rogay af guri la moodo miro la qooshay oo aan macaana lahayn ama "stale fruit salad" oo ah Maay iyo Maxaa isdhexyaal, marmarna aad la sureerto sidii halxiraalihii afkii fasiixa ahaa murtidii lahayd xaaladda iyo xoogga cabbiraadda waa gabaabsi. Dadkoodiina way socdeen. Haddii aan arrintaa aan wax laga qaban waxaa dhammaantayo, innaga lumeysa gacaltooyo qiimo weyn ku fadhida.

#### **4- Talo**

Afka Maaygu wuxuu ahaa afafka Radio Muqdisho ka baxa laga bilaabo 1950, ilaa lixdameeyadii bartamaha. Waqtigan la joogo labo idaacadood oo muqdisho ku yaal FMka ku shaqeeya, ayuu ka baxaa (Horn afrik iyo STN) sidaan la socdo; Baydhabana waa afka koowaad ee raadiyaha gobolka. waxaa laga yaabaa inuu sii fido xagga idaacadaha. BBC waxaan u soo jeedinayaa in toddobaadkiiba mar warkiiba la soo koobay afka Maayga lagu sheego, iyadoo la tixgelinayo in lahadaha ay ku hadlaan ugu yaraan 5 milyan oo Soomaali ah.

Ugu dambeyntii lahaanshaha Af-Soomaaliga lahadado kala duwan, xeerar iyo xirribooyin farsamo, hub qaadasho, aqoon cimilada deegaano kala raacsan, soor jaad-jaad ah, [intuba] waa u hodantooyo hiddaha iyo afka Soomaaliga.

*Salaan diiran iga guddoon.*

## Lifaaq (5)

### **Dhawr Fikradood oo ku Saabsan Hawlaha Akadeemiyada AGA<sup>1</sup>**

Dr. Maxamed Daahir Afrax

Guddoomiyaha Akadeemiyada Afka Soomaalida

Salaan ka dib, aad baan ugu faraxsanahay la kulankaada iyo imaatinkaada Muqdisho.

*Ujeedo: Gudbin dhawr fikradood oo ku saabsan hawlaha Akadeemiyada*

1. Akadeemiyada iyo baareyaasha Af-Soomaaliga, Ururka *Somali PEN* iyo *Somali Studies International Association* (oo weli jira) waa in xiriirkooda aan caddaynaa. Akadeemiyada howsheedu waxay ku kooban tahay, sida qayaxan, horumarinta AfSoomaaliga, hiddaha iyo dhaqanka, oo urur goboleed ah. Naadiga Qalinlaydu Soomaali ayuu khaas u yahay, hayeeshee waa caalami, ay ku taxmi karaan Soomaalida meel ay joogaan ba, iyo

---

<sup>1</sup> Qoraalkani waa warqad uu Shariif Saalax u qoray guddoomiyaha Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga, Dr. Maxamed Daahir Afrax. (Tifaftiraha)

aqoonyahannada shisheeye ee ku hawllan arrimaha Soomaalida. Sidaa darteed waa Caalami (International). Dhinaca kale, SSIA waa urur caalami ah, oo qolo gaar ah khusaynin. Seddexdaa urur waa la xiriirin karaa, waxaana loo dejin karaa hab shaqo oo xiriirin kara. Waxaa aad muhiim u ah in siyaasadda laga fogeeyo ururradan, taas oo dhib uga iman karo dhinac.

2. Sidaad ogtahay, waxaa caado ah in baareyaasha cilmiga ay xibin ka noqdaan Akadeemiyeyaasha, iyadoo kala shaqeeya arrimo gaar ah, sida ereybixinta, marka laga hadlayo arrimaha afka. Waa in laga jawaabi karo sidee iyo shuruudehee Akadeemiyada xibin looga noqdaa? Ma shardi baa xibintu inay ahaato baare AfSoomaaliga, hiddaha iyo dhaqanka keli ah? Maxaa lagu caddayn karaa haysashada shuruudahaa? Diiwaangelinta xibinta habkee lagu socodsiiyaa (procedures)? Maxaa dhici kara haddii albaabka cid kasta loo furo? Arrimahan xallintooda ma fududa.

Waxaan qabaa in Akadeemiyada lagu soo xiro Soomaali iyo shisheeyaba inta ku hawllan Cilmibaarista Af-Soomaaliga, Hiddaha iyo Dhaqanka, sida aqoonyahannada Jaamacadda Roma III, SOAS London, Indiana University iyo kuwo kale, xibinna ka noqdaan Akadeemiyada.

### 3. Xiriirka dowladaha iyo Akadeemiyada

Miisaaniyadda Akadeemiyada waxaa qaybsanaya hay'adihii heshiiska wada saxiixay, si siman, iyadoo ay bannaan tahay in hay'ad qaybteeda ka siyaado bixiso. Miisaaniyaddaa oo koobaysa hawlaha sannadka cusub la qabanayo. Xiriirka saxiixeyaasha iyo Akadeemiyadu waa mid toos ah, qoraal iyo oraahba ah. Xiriirrada ay Akadeemiyadu la yeelanayso hay'adaha hawlaheeda ku abbaaran, iyo hababka ay isula shaqaynayaan Akadeemiyada ayaa qoondaynaysa.

# XIRMADA 3<sup>aad</sup>

## Lifaaq (6) Xarfaha Qoraalka Afka Maay<sup>1</sup>

Bismillaahi Arraxmaani Arraxiimi,

*Ujeeddo: Xarfaha Qoraalka Afka Maay*

### **A- Labo afeef iyo labo waano**

1. Kulankan ujeeddadiisu ma aha inaan hindisayno xarfo hor leh oo loo dejiyo qoraalka Afka Maay. Cidna kula tartami mayno umuuraha laga hadlayo, ama lagu ducfaruurayo faro hore loo qoray (Mariya Von Tilling iyo afka Jabarti).<sup>2</sup>

2. Hindise cusub iyo dadaal cilmiyeed oo la qabtay waa arrimo, mar walba, qaddarin iyo guubaabin mudan. Sidaad

---

<sup>1</sup> Lifaaqan 6aad iyo kan xiga ee 7aad, waa qoraallo uu Shariif Saalax si cilmi ah ugu gorfaynayo 'Qoridda iyo Xarfaha Lahjadda Maay'. (Tifaftiraha)

<sup>2</sup> Mario Von Tiling (1886-1974) waa gabar cilmibaare Jarmal ahayd oo daraasado kala duwan ka qortay Af Soomaaliga. (tifaftiraha)

la socotaan horumarka cilmiga waa arrin ururta aan xasilin, oo marna xarkagin, kuna dhisan isbeddel isdaba-joog ah, kuna dherersan taariikhaha jiritaanka jinsiga Aaddanaha. Waxaa tusaale u ah safarradii dheeraa ee xadaaradihii ummadihii hore (Masar, Hindiya, Giriigga).

## **B- Nasteexada**

1. Qofka Soomaaliga waayahan jooga in la yiraahdo ‘afkaarta qabiilka iyo gobolaysiga (qabiilkoo la ballaarshay) iska daa’, waxay ku tahay xaqdarro, maxaa wacay bulshada samannadan ayaa qabyaaladda aaminsan, ama u arkaya gabbaadka qur ah ay helayaan. Bulshada waayahan ma laha dowlad wax u qabata, u garsoorta, shaqa siisa, ammaankooda iyo himiladooda dhaqaale kafaalaqaadda. Ha ahaatee, aragtiyadan maanta caamka ah waa aragtiyo marxali ah, aan rajaynayo in laga guuro waqti dhow. Markaa waa lagama maarmaan in dhaqanka jirana qofku tixgeliyo, liifadda rajadiisa qarangaariddana marna gaaban, ama damin.

2. Qof kastoo Soomaali ah xil baa ka saaran sidii aynu u soo ceshan lahayn dowladnimadii, xikmad la’aan gamcaheenna ku burburinnay. Dadka ka faa’idaystay burburka qaranka waxay u dhaqmayaan inay Dowladnimo u baahnayn. Weyna ogaan doonaan qaladkooda. Dowlad

la'aan xoolihii la kasbay LAHAANSHAHOODA MA SUGNAAN KARO, meel aan sharci ka jirin laguma noolaan karo, shaqo sugan lagama heli karo. Waxbarashana micne yeelan mayso. Burburka dowladda wuxuu sababay khasaare aad u weyn oo ku habsaday dadka D/M. Ayaandarrada gobolladaa ka jirta, ama ay soo mareen, ayaa ugu xanuun badan wixii dalkoo dhan ka dhacay, oo murugada badnaa.

**C- Maxay tahay ujeeddada ummadaha aan faraha lahayn ay u raadiyaan abjaddiyad ay afkooda ku qoraan?**

Ummadaha waxay doonayaan si buuxda inay u soo shaac-bixiyaan, si karti leh, hiddahooda iyo dhaqankooda, si ay u xoogaystaan shucuurtooda waddaniga, horumarinta barashada cilmiga, kordhinta iyo badinta dhaqaalahooda.

Tijaabadii ugu horreysay qoraalka af-Soomaaliga waxaa sameeyay Cismaan Yuusuf Keenadiid 20neeyadii Qarnigii hore. Waxaa si dhab ah qoraalka afka loo rasmiyeeyay 1972dii. Dadaalka qoridda qolo gaar ah oo Soomaali ah lagu xumeeyay ma jirin. Dad aan ku farxin way jireen. Dad Digil iyo Mirifle (D/M) ka tirsan ayaa jira oo ku dooda ilaa maanta, kuna andacooda, in beelahaas xaqooda la duudsiyay, markii far iyaga ay gaar u leeyihiin ama gaar

u ahayd, loo soo dallacsiin waayay in la qoro, oo la rasmiyeeyo. Anigoo Guddiga Af-Soomaaliga Guddoomiye u ahaa, waxaan caddaynayaa, ineeyan jirin far D/M leedahay, ama ay wadatay koox beelahaa ka mid ah, oo tartan kula jirtay fariihii taariikhda lahaa, sida Af-Carabiga iyo fartii Cusmaaniyada (aan u nisbaynayo Cismaan Yuusuf) iyo fartii Laatiinka. Seddexdaa farood waxay loollamayeen muddo 30 sanno ka siyaado ah. Qolo waliba waxay lahayd taageereyaal iyo naadiyo xoogag badan. Alle ha u raxmadee, Mustafa Sheekh Xasan Cilmi, oo reer Baydhabo ahaa, ayaa watay far la magac-baxday KONTON BARKADLA, isagoo ka mid ahaa Guddigii Af-Soomaaliga. Mustafa maalin keli ah kamaan maqal isagoo guddiga u soo jeediyay: ha la qaato farta Konton Barkadle. Aniga uma hiillin karin, mana arag cid kale oo taageero la garab taagan. Haddana ma aan sheegi karo, siday u qorneed. Dibadda ayuu isaga safray Mustafe Guddiga intuuusan howshiisii dhammaysan, malahayga dhammaadkii 1971. Xibnihii guddiga waxaa lagu sharfay billado, markuu dhammaaday Ololihii Horumarinta Reer Miyiga, Maarso 1975tii. Mustafe kuma jirin dadkii billadaha la siiyay, isagoo dalka dibadda uga maqnaa awgeed. Isagoo hijradii ka soo laabtay ayuu guri aan ka degganaa Muqdisho, Agoosto 1982, isuna diyaarinayo

inaan Beijing ku laabto, anoo Shiinaha safiir uga ahaa JDS, ayuu Mustafe ii yimid.

Wuxuu iga codsaday inaan gacan ku siiyo sidii uu ku heli lahaa billaddii lagu sharfay saaxiibbadii ay ku wada jireen Guddigii qoridda Af-Soomaaliga. Waxaan warqad u qoray Madaxweynaha, anigoo la socodsiiyay xaaladda billadda Mustafe, oo weli callaqaan, kana dardaarmay in la siiyo, mana hubo waxay arrintu ku dhammaatay, annagoon is-arag buu Ilaah oofsaday. Anigoo weli ku sugan Beijing ayaa, si lama filaan ah, waxaan ka akhriyay jariiddada Dowladda: 'Xiddigta Octoobar' geeridii Mustafe, oo war qaawan ah, waxbana laga sheegin taariikh nololeedkiis. Waxaan aad uga gubtay in illowshahaa aabe la'aanta ah sidaa ku gudubto geerida halyeygaa D/M. Isla usbuuca waxaan la xiriiyay Aadan Cabduraxmaan (Aadan Goobbe), ay qaraaba soke ahaayeen inuu iigu soo diro Kolayga Dibloomaasiga (boostada safaaradaha loo soo diro), wax Alle wuxuu ka heli karo taariikh-nololeedkii Mustafe. Durba waa i soo gaarsiiyay. Markaan qoraalladii helay waxaan diyaariyay Xuska Taariikh-Nololeedka Mustafa, sida ugu suurta-galka waafiga u ah. Waxaan xuskaa koleyga ugu diray 'Xiddigta Octoobar'. Si wanaagsan oo xarrago leh ayay u soo daabaceen, oo bog dhan qoraalkii loo huray.

## **D- Doodda ah waxaa la xaqiray Afka iyo Farta Maay**

Dadbaa si joogta ah haatan u faafiya, dibad joogtana u badan, war ah in shacbiga D/M dowladdii Kacaanka ay ku takri-fashay, fartii ay soo bandhigeenna la xaqiray, oo la rasmiyayn waayay. Wararkaa waa kuwo baaddil ah, lagana leeyahay ujeedo baaddil ah, sababaha soo socda awgood:

1. Ma jirin far D/M leeyahay, oo shacbiga watay, oo tartan gashay, sida seddexdii farood aan soo sheegay. Ruux dedaalay, sida Mustafe (AHN), ayaa isku dayay in far uu qoro, taas oo joogtay tijaabo bilow ah. Waxaa xusid mudan in Afka Maxaa culumada afafka ay billaabeen inay qoraan, laga billaabo 1814, oo qoraalladu hadba heer marayeen, oo horumar leh.

2. Afka Maay aad baan u tixgelnay, mana jiri karin awoodo horjoogsan karta. Waxaan go'aansannay in qaamuus lagu uruuriyo ereyada lahadaha Soomaalidoo dhan, si simanna majhuud loo saaro. Odeyaashii Afka iyo Hiddaha lagala tashanayay waxaa ka mid ahaa Mustafe Sheekh Xasan iyo Oday Maxamed Sheekh Cabdalle Xuseen, aniga shakhsiyan uga yeeray Xuddur isagoo jooga.

3. Suurtagal ma ahayn in isku waqti la rasmiyeeyo lahjadda Maay iyo Maxaa, sida ay ku andacoonayaan nimanka ‘masabidka’ wada, iyadoo la xusuusto in qoridda Af-Soomaaliga lagu loollamayay wax ka badan 50 sanno, dowladihii Kacaanka ka horreeyayna ku dhici waayeen inay go’aan ka gaaraan, bal iskaba daa inay rasmiyeeyaan.

### **E- Qorista Afka**

Boqolkii sanno ee la soo dhaafay baareyaal badan ee Af-Soomaaliga (lahjadahoo dhan) waxay isku dayeen inay wax ka qoraan: ereyada afka, naxwaha, sarfiga (grammar and Morphology), dhismaha weerta iyo jumlada, isbarbardhigga Af-Soomaaliga iyo afafka kale ee Bahda Kushiitigga, gabayada iyo geeraarrada, xiriirka Af-Soomaaliga iyo Af-Carabiga iyo qaybo kale. Hayeeshee, xarfo Maay u gaar ah marna qoraal laguma tijaabin Prof. M. X. Mukhtar ka hor (fiiri qaamuuskiisa English-Maay la nashriyay 2007). Aniga qof ahaan ma qabo in abjaddiyadan ebyoon tahay, ay noqon karto mid kama dambays ah. Waxaan qabaa inay u baahan tahay in weli la sii hufo, oo la sakamo. Laakin waa tijaabo bilow ah, mudan in la guubaabiyo oo loogu mahadnaqo. Waxaan

Prof. Maxamed u sheegay dhaliillaha aan qabo, markuu qaamuuskiisa i soo gaaray 2010kii.

## **F. Alifbaada Maay**

-Shibbaneyaal

B,P,T,J,JH,D,TH,R,S,SH,DH,G,GH,GN,Q,F,K,L,M,N,N  
G,W,H,Y:

-Shaqallo

A,E,I,O,U-AA,EE,II,OO,UU.Y.

2-Dhawaaqyada gaarka looga dhigay Af-Maay:

-P,JH,TH,GH,NG,GN.

3-Tusmo (misaal):

P= heped, hapoog; JH= jhiir, jheer, jhee'r; TH=mathal, mithaal, muthung; GH= haghir, Haghar; GN= gnaagnuura, agnuura, mugnug, Fagniiis (nin magicii), magnuug.

Waxaan qabaa in Xarfo dhowr ah ee Alifabaadan laga maarmi karo sida: P= oo ah dhawaaq aan jirin. B baa beddeli karta, oo ah dhawaaqa runta ah (proper phoneme), iyada qudheedu dhawaaqyadeedu kala culculus yihiin, hadba waxaa saameeya xarfaha la jaarka ah. TH= waxaa loo dayn karaa D caadi, siduu yeelay Guddigii Af-

Soomaaliga. Maxaa wacay waxaa ku jira ‘Maxaada’ lafteeda dhawaaqyo taas la miisaan ah, iyo kuwo ka sii culus oo la moodo DHA sida FADUUL. Misaalka hore waxaa ka mid ah: Adeer, Madiina iyo kuwo kale oo badan. GH= (allifuhu ku sheegay ghayn carabi ah inay la miisaan tahay), waxaa loo dayn karaa G caadi ah. Sida xarafka aan soo dhaafnay, dhawaaqan wuxuu yeelan karaa GHUNNO xoog leh marna fudud. Wuxuu ka buuxaa Afka Maxaa. Annaga waan derisnay, waana ka maagnay inaan xaraf gaar ah u qorno. Y=wuxuu allifuhu siiyay laba hawlood inay isla mar qabato: mar waa YA’caadi ah sida: fiyaaw, feyla, nuuriya, badiyow, hayow iwm, marna waa alif, tilmaamaya dhawaaq Af-Maay gaar u ah, aalaaba ereyga aakhirkiisa gala sida: mary(a), qasy(a), bury(a). Maqbuul ma aha in hal alifbaa gudaheed hal xaraf laba hawlood lagu xambaaro. Waxaa habboon in Ya’da alifka ah lagu beddelo: a’ nabar leh, ama nabran (manbuura), si looga gaashaanto qoraal qalalaasan, oo wareer keeni kara. JH= qudheedu waxaa laga dhigi karaa hal xaraf, iyadoo J kor dhibic laga saarayo.

Eebbe ayyaa Towfiiqda iska leh, waxaan ka baryaynaa inuu na waafajiyo.

Waxaa qoray Shariif Saalax Maxamed  
Qaahira, Masar 21 Febraayo 2012.

## **Lifaaq (7)**

### **Qoridda Lahjadda Maay**

Bismillaahi Arraxmaani Arraxiim

#### **Qoridda Lahjadda Maay**

##### **A- Hordhac**

Sida la wada ogyahay Af-Soomaaliga (iyo fartiisa) waxaa la rasmiyeeyay, oo la sharciyeeyay, inuu dalkoo dhan ka noqdo luqadda lagaga dhaqmo, oo beddesha luqadihii shisheeye hore loogu dhaqmi jiray. Rasmiyaynta afka, iyo farta, ka dib waxaa dhacdadaa dunidoo idil loo arkay arrin yaab iyo majarasho mudan, oo wejiyo badan loo fasiray: ka xuroobid af-shisheeye, iyo hoggaaminta qalaad ay wadato, shisheeye fiirid, is-go'doomin iyo ka hullaabasho dunidan isu furmaysa oo xudduudaheedu sii ballaaranayaan. Dhinaca kale, waxaa Soomaaliya ku soo go'ay aqoonyahanno ku xeel-dheeraa baarista Af-Soomaaliga (Maay iyo Maxaa), culuunta bulshada, oo kala nooc ah, hiddaha iyo dhaqanka (taariikhda duugan (archeology) iyo tan daahirka ah, ama weli la diiwaangelin), baarista arrimaha culuunta (beeraha, xoolaha, aaddanaha, hababka dhismaha, cimilada badda

iyo berriga, qodidda caloosha dhulka (geological and geophysical studies), iyo qaybo kale. Dadaalladaa oo dhan waxaa la gala socon karaa shirar xilliyeedki (3 sanno mar) uu qaban jiray SSIA (Somali Studies International Association), oo lagu soo bandhigi jiray, welina lagu soo bandhigo, in kastoo haatan ay ka yar yihiin sidii hore, qoraallo qiime cilmiyeed leh, oo dalka khuseeya.

Ha ahaatee, markay suushay dowladdii dhexe ee Soomaaliya, 1991, dadaalladii afka lagu hormarinayay way shuuqeen, markii baareyaashu ay waayeen xarumihii cilmiga ee Qaranka ay ku hiran jireen, lagana xiriirin jiray. Iyadoo xaqiiqadu ay taa tahay haddana baareyaashii Culunta Soomaalida weli way shaqaynayaan, meelaha qaar waxaaba loo dhisay maraakiz ballaaran. Sidoo kale SSIA shirarkoodii ma kala go'in; labadaa arrimood oo aan xusay aad bay u rajo-gelinayaan dadka ku hawlan baarista iyo daraasaadka Culunta Soomaalida. Waxaa xusid mudan, haddaynu dib u eegno Soomaliya gudaheed, horumarkii afka, guud ahaan, sidii iyo heerkii la rabay uma suurtagelin, dowlad la'aanta awgeed. Labaatan iyo dhowr sanno ka hor, waxan ku tala-jirnay in la ebyo hab-qoraal dalkoo dhan lagaga dhaqmo, oo maanta jaantaa rogan noqday. In qaamuus weyn lagu ururiyo Af-Soomaaligoo idil oo cuskan xirfadaha (beeraha, miyiga

iyo xoolo dhaqidda, kalluumaysiga, hawlaha badan ee gacanta laga qabto, dhaqanka iyo Hiddaha) xiddigiska, dhabiibidda, aqoonta faalinta iyo xiriirrada la qabo in lala yeelan karo waxyaabaha aan muuqan, sida arwaaxda.

Waxaa mahad mudan Dowladda Djibouti iyo Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, oo diyaarinaysa qaamuus ballaaran, la bar tilmaameedsanayo inuu Af-Soomaaliga koobo, gaar ahaan labada lahjaddood Maay iyo Maxaa.<sup>1</sup> Af-Soomaaligu waa lama huraan, qof kastoo Soomaali ahna xil baa ka saaran horumarintiisa.

## **B- Isa Saamaynta Labada Lahjadood**

I-Waxaan hore u tilmaannay in iskuday kastoo baariseed ee Afka uu mudan yahay qaddarin iyo guubaabin. Afkuna, sida caadiga ah waa cunsur nool oo kora, isna bedbeddala, sida culuunta kale, oo aragti laga qabay arrin ugub ah qof cilmiyahan ah curiyay, haddana ay dhacdo in cilmiyahan kale isla arrintii weji cusub, oo kii hore ka duwan, u yeelo. Heerka seddaxaad, labadii aragtiyo midba

---

<sup>1</sup> Qaamuuskan oo loo bixiyay 'SOO MAAL' waxa daabacay Machadka Afafka ee Jabuuti & SomaliSpeaking PEN, Jabuuti 2013. Waa qaamuuska ugu weyn ilaa hadda ee Soomaali-Soomaali ah, wuxuuna ka kooban yahay 70,000 oo gelitaan. (Tifaftiraha).

midda kale burin mayso ee waxaa ka soo baxaya aragti hor leh oo seddexaad, oo xambaarsan nuxurkii labadii hore. Waana hayaan aan dhammaanaynin, ama joogsannin ilaa abad (thesis antithesis, synthesis). Sidaas oo kale Farta Maay weli ma xasilin, waxay ku jirtaa heerkii horumarka (evolution).

II-Waxaan jimcihii hore soo sheegnay in xarafka ‘P’ uusan ahayn dhawaaq jira, mar haddii labada bushumood ayaan is-qabsanayn, marka lagu dhawaaqayo. Sidoo kale waxaan sheegnay in TH lagu beddeli karo D caadi ah, arrintaasoo ay go’aansadeen baareyaashii hore ee guddigii rasmiyaynta Afka. Afka Maxaa waxaa ku jira ereyadan soo socda, oo ‘Thaal’ carabi ah u miisaan eg, oo D qur ah loo qoro, shiddana cid ku haynin: bidaar, madaar, badar, fadal, madal, iyo kuwo kale oo badan.

III. Waxaa kaloo aan niri xarafka GH (allifaha buugga English-Maay ku sifeeyay in dhawaaqeedu la mid yahay GHAYN Af-Carabi ah), sida THda, wuxuu ka buuxaa Afka Maxaa, sida: fagaare, dagaag, tagoog, agas, magac, Dagooye iyo dhawaaqyo kaloo badan. Waxaan qabaa in xarafkan loo daayo G caadi ah, oo xaraf kale lagu dhafin. Mararka qaar GHAYNKA wuxuu isu rogaa Q, weliba saamaynta qayb lahadaha ka mid ah awgood.

IV. Xarafka kale ee Alifbaada English-Maay u baahan in wax laga qabto waa xarafka Y, sidaan hore u sheegnay laba hawlood ayaa lagu xambaaray. Arrintaasoo dhib iyo wareer u keeni kara hirgelinta Farta Maay. Fikradda aan soo jeedinayno waxay tahay in xarafka Y (ya') caadi ah loo daayo. Dhawaaqa A nabar tufid ah wadata (ejective sound), gaar u ah Af-Maay, waxaa loo dayn karaa A caadi ah, oo nabar loo yeelo sida: a'= qasa', fidha', bura', tira'. Badiba (a') ereyga aakhirkiisa ayay gashaa, dhexdiisana kol kol bay gashaa, sida dha'dheb, dhadha'miyow, fajha'nna'.

V. JH oo ah dhawaaq Af-Maay u gaar ah sida: Jhijha, faajher, mijhin iyo kuwo kale; wuxuu u baahanyahay dib u habayn, si J oo yerehe iyadoo la farsameeyay loogu daysto.

VI. Sidaa aawadeed waxaan soo jeedinaynaa in dhismaha Farta Afka Maay lagu saleeyo habkan:

-SHIBBANEYAAL:

B,T,J,JH,D,R,S,SH,DH,G,GN,F,Q,K,L,M,N,NG,W,H,Y

-SHAQAL:

A,E,I,O,U,AA,EE,II,OO,UU. (dhawaaqa A gaarka u ah Maay xaraf gaar ah uma baahna). Dhawaaqyada cul-culus nabar ayaa u calaamo ah: a',e',i',o'u'.

VII. Culumada afka Soomaaliga waxay isku khilaafeen Afkan waa mid nabroole ah, iyo maya ee waa mid dhawaaq kala cod-cod leh (accentuated language vs tunal language). Baareyaashaa qaar ka mid ah waxay isku dayeen inay yiraahdaan labada noocba afkan wuu wada yahay. Haddaynu eegno xagga nabarka waxaa tusaale u ah: dul iyo du'l (dhabar iyo sanku dulkiisa); fo'ol iyo fool (foosha dhalidda iyo wejiga); qaad iyo qa'ad (tan hore ficilul amar, tan xigta waxay ka dhigan tahay waa hore ayuu qaaday-tagto hore). Xagga is-beddelka codka waxaa la yiraahdaa: Cali Nu'ur iyo Cali Nuur (kan hore waa magac sifo lagu karay, Cali keligiis ayaana iska leh, ku dhawaaqidduna , kor baa loo qaadayaa, kan labaad Nuur waa Cali aabbihii, codkana kor looma qaado). Waxaa xusid mudan, iyadoo Af-Soomaaliga oo idil ay dhawaaqyadaa cul-culusi iyo nabro ay ka buuxaan, haddana Afka la rasmiyeeyay shaqallada nabro ama calaamad kale looma yeelin (afaf badan baa se nabro isticmaala oo muujiya xoogga dhawaaqu leeyahay, sida Talyaaniga: perche', un po', piu'; Fransiiska: apre's, alie'ne', poe'me;). Lahjadda Maay waxay la mid tahay

lahjadaha kale, sida laga dheehan karo tusaalooyinkan: bo'od iyo bood (kor ing bo'od ii boodka mooroda'; do'od iyo dood; ma'al iyo maal, oo shal eh handha' ii nabar maaloowi, fo'od ii food, way shal eyiina foodka dhan ii foodka' naftiis- tusaalooyin kale idinkuba afka ka baara). Waxaan qabaa, oo kale, in Ada[a], badiba hashaa dhammaadka ereyga loo dayn karo A aan calaamad lahayn, ayna ku milmi karto qoraal ahaan Ada fudud, iyadoo la wada ogyahay culayskeeda, si kalena aan loo kicin karin.

### **C- Alifbaayaasha faruhu dhawaaqyada afafka ma wada koobi karaan**

Af waliba xarfaha la qorayo ka sokoow, waxay ku dhisan yihiin xeerar dadka luqaddaa ku hadla wada garanayaan. Waxaa ka mid ah Af-Soomaaliga oo xarfka J bar oo ka bar Soomaalida ay GIIN caadi ah u akhrinayaan, oo ka duwan qoraalka. KH dad badan waxay u akhrinayaan Q (qajaar-khajaar], Q iyo Giinkaba ma waafaqsana qoraalka. Dad baa C iyo X u akhriya A iyo H; kuwana Rda waxay u akhriyaan DH, kuwo kale waxay u akhriyaan J, sida Gaj, Gabaj (gar iyo gabar). Masar keli ah ku cibaaro qaata.

Ereyo isku qoraal ah haddana micnahoodu kala geddisan yahay, ama dhowaaqii qoraalku lahaan lahaa kala duwan

yahay, Qaybta hore waxaa ka mid ah Af-Ingriiska sida: suit (sut) oo bedlad ah iyo suit (sut) oo ah ‘anficid; Af-Soomaaliga: Daliil iyo Daliil (dulli ah iyo wax wax lagu calaamaysto, ama tusaale u noqon kara); siraad iyo siraad, kala ah siraadka aakhiro iyo laambadda la shito, iyo kuwo kaloo badan.

Sidaa aawadeed Afafku xeerar bay ku dhisan yihiin, ujeeddooyinka afafkana taxanaha qoraalka ayaa caddeeya.


Qore: Saalax Maxamed

Qaahir, Masar 06/03/2012



## **QAYBTA SADDEXAAD**

**Sawirro Xul ah oo Muujinaya  
Sooyaalka Taariikhda Shariif Saalax**



*Shariif Saalax oo fadhiva Xafiiskiisa safaarada Soomaaliva ee*



*Midig Qoraaga Anderswiski oo ka mahadcelinaya billad sharaf la guddoonsiiyey. Bidixna waa Danjire ShariifSaalax*



*Shariif Saalax oo Boqoradda Ingiriiska loo wado,  
si ay waraaqaha safiirnimada uaa auddoonto*



*Muuqaalkan: midig waa Anderswiski oo qoorta loo suray billad  
lagu maamuusay. Dhexda waa Shariif Saalax,  
dhinaca bidixna waa PM Jones johanson*



*Safaarada Soomaaliya ee UK, Shariif Saalax oo soo dhaweynaya dadkii boqorada u gayn lahaa.*



*Shariif Saalax oo la kulmay xildhibaan oo u dooda Arrimaha Soomaalida, oo ka tirsanaa baarlamaanka UK.*




*Dhexda waa Shariif Saalax oo u qaybsanaha ganacsiga ka ah safaaradda Soomaaliya ee Masar*



*Shariif Saalax oo shir kaga qayb galaya Xarunta midowqa Afrika ee Itoobiya.*



Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta sare Shariif Saalax oo kormeeraya meelaha taariikhda leh ee magalaada Muqdisho



Shariif Saalax oo taariikh ka raadinaya xeebta Jilib-Marka, bulshada meesha degenna la kulmay



**Shariif Saalax oo ka qaybgalaya ololihii bacad celinta Shalanbood**



**Sawir kooxeed Guddigii Af Soomaaliga  
ee la dhisay 1971**



Shariif Saalax oo ardaydii iyo shaqaalihii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed kala qaybgalaya hawl beer-qodid iskaa wax u qabso ah



Shariif Saalax oo cashar ka bixinaya Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed



Shariif Saalax safka hore bidix labaad oo kaga qaybgalaya dalka Talyaaniga shir aasaaskii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed



Bidix labaad waa markii uu danjire Shariif Saalax warqadihiisii danjirennimo u gudbinayey masuuliinta waqooyiga kuuriya.



Shariif Saalax oo eegaya arday kuuriyaan ah  
oo Afsoomaali akhrinaya .



Shariif Saalax oo laga guddoomayo waraaqihiisii danjirenimo



Shaariif Saalax iyo hooyadii Khayra Maxamed



Wafdi uu hoggaaminayo Shariif Saalax oo heshiisyo la saxiixanaya dawladda Waqooyiga Kuuriya.



Muuqaalkan wafdi uu hoggaaminayo Shariif Saalax dhexda ubax haysta oo tegay Waqooyiga Kuuriya.



Muuqaalkan waa Shariif Saalax midig iyo marwadiisa Caasha Cabdi bidix oo ku dhex jira aqal Soomaali lagu dhisay xaafad ka mid ah dalka Ingiriiska oo lagu maamuusayo wiil Ingiriis ah oo jaamacad ka qalin jebinaya.




Shariif Saalax iyo marwadiisa Caasha Cabdi Diini



Midig safiirka Qadar u fadhiya dalka Talyaaniga iyo bidix Shariif Saalax oo isagana Soomaaliya u fadhiya magaalada Rooma.



Marwo Caasha cabdi oo Shariif Saalax siinaysa cunto Soomaali lagu sameeyey munaasabad aqal Soomaaliga lagu daawanayay xaafad ka mid ah magaalada London



Shariif Saalax iyo Saaxiibbadii oo maroodiyaal ku dalxiisaya  
dalka Waqooyiga Kuuriya.



Danjire Shariif Saalax oo warqadihiisii danjirenimo  
uu ka guddoomaya  
madaxweyne ku xigeenka Shiinaaha



Hore dhexe madaxweyne Maxamed Siyaad Barre, xagga dambe dhexe Cumar Carte Qaalib iyo Shariif Saalax dalka Talyaaniga



Wafdigii madaxweynaha Siyaad Barre, dawladda Talyaaniga oo sawir xusuus ah iska qaaday



Shariif Saalax oo ay ciidamada Ustareeliya siinayaan  
salaan sharaf.



Shariif Saalax oo la sheekeysanaya madaxweyne ku  
xigeenka dalka Shiinaha.



Muuqaalkan waa Shariif Saalax iyo marwadiisa Caasha Cabdi oo ku qaabilaya gurigooda Talyaaniga ku yaal bulshada



Shariif Saalax dhexda iyo marwadiisa Caasha Cabdi bidix kaga xigta, oo munaasibadda 21 Oktoobar awgeed xaflad ku sameeyey Hoteel ku yaal dalka Talyaaniga.



Muuqaalkan waa Danjire Shariif Saalax  
iyo marwadiisa Caasha Cabdi Diini  
oo la hadlaya qaar ka mid ah martidii xafladda yimid.





Muuqaalkan waa Shariif Saalax iyo wafdi uu hoggaaminayo oo tagay dalka Shiinaha oo loo xirayo astaanka dalka





Shariif Saalax oo khudbad ka jeedinaya  
goob lagu soo bandhigay buug uu qoray



Bidix Shariif Saalax, Cali shido, Xuseen Iimaan, Prof Cali Cabdiraxmaan  
iyo Abuukaato Maxamed Cabdalle




Midig Shariif Saalax, dhexda waa Cabdinaasir Yuusuf 'Ganey',  
bidix Prof Cabdalla Mansuur. goobtuna waa Jabuuti



Muuqaalkan waxa ka wada muuqda bidix hore Siciid Saalax, Shariif Saalax,  
Cabddala Maansuur oo midigta taagan iyo aqoonyahanno kale



Safka hore, bidix Shariif Saalax iyo Maxamed Xaaji Xuseen Raabbi



Bidix Sharif Saalax, M. I Hadraawi, Cabdi Muxumed Amiin,  
C/qaadir Maax iyo Aw Jaamac Cumar Ciise.

## Tixraac

Aamina Muuse Weheliye. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK..* Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo <https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Bashiir M. Xersi. (2014). *Maxaa Danjire Shariif Saalax loo Maamuusi Waayey? April 9, 2014.* Soo dejiyay Maarso 11, 2018, laga helayo <https://bilediraac.wordpress.com/2014/04/09/maxaa-danjire-shariif-saalax-loo-maamuusi-waayey/>

Caasha Cabdi Diini. (2016, October 16). *Personal Communication (Wareysi).*

Cabdalla Cumar Mansuur. (2015). *Midaynta iyo Horumarinta Af-soomaaliga.* Ku jira buugga Cabdirashiid M. Ismaaciil et al (ed). Afmaal: Proceedings of the Conference on the 40th Anniversary of Somali Orthography. Djibouti: The Intergovernmental Academy of Somali Language.

Cabdalla Cumar Mansuur. (2017, December 3). *Personal Communication (Email).*

Cabdi Deeq Xaashi. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK.* Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo  
<https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Cabdicasiis Maxamed Cali. (2017, July 2). *Personal Communication (Email).*

Cabdiqaadir Ruumi. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK.* Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo  
<https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Cabdiraxmaan Abtidoon. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK.* Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo  
<https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Maxamed Cusmaan Cumar. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK.* Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo  
<https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Maxamed Daahir Afrax. (2014, April 12). *Xus iyo Xusuus Danjiri Shariif Saalax Maxamed Cali AGA UK.* Soo

dejiyay 16/3/2018. laga helayo

<https://www.youtube.com/watch?v=OdXQhaD9xC4>

Mohamed Haji Mukhtar. (2015). *A Remembrance of Salah Mohamed Ali and Aw Jama Umar Isse: The Passing of a Generation in Somali Studies*. Northeast African Studies, Volume 15, Number 1.

Saalax Maxamed Cali. Tarjumay sheekada “*The Trials of Brother Jero*” ee uu qoray qoraaga Nayjeeriyaanka ah ee Wole Soyinka. (lama daabicin).

Saalax Maxamed Cali. Tarjumay sheekada Giriigga ah ee “*Sophocles’s Electra*”. Lama daabicin.

Salah Mohamed Ali. (1991) *Il Somalo Circoloare [An article on Somali dialects]*.

Salah Mohamed Ali. (1998). *The Unity of Somali Language Despite the Barriers of Regional Language Variants*. Annarita Puglieli (ed). In proceedings of the 3rd International Congress of Somali Studies. Roma.

Salah Mohamed Ali. (1999). *Madre Coraggio di Mogadiscio*. In *Il Diritto dell’Uomo*.

Salah Mohamed Ali. (2001). *A Moment in Somali History: Education in Huddur under the British Military Administration (BMA) 1941-1950*. Jariiradda Demenedung, Newsletter of the Inter-Riverine Studies Association (ISA). Mount Pleasant, MI : ISA

Sharif Salah Mohamed Ali. (2012). *Halgankii loo galay qoridda Af Soomaaliga (1949-1972)*. Muqdisho: [Daarta daabacday lama xusin]

Shariif Maxamed Cabdalla. (2014). *Wareysi VOASomali, March 21, 2014*. Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo <https://www.voasomali.com/a/2352279.html>

Shariif Saalax Maxamed Cali. (2005). *Huddur and the History of Southern Somalia*. Qaahira: (مكتبة النهضة المصرية).

Shariif Salax Maxamed Cali. (2005, April). *Xusuustebyo Eldoret: Shirweynihii Nabadaynta Soomaaliya 2002-2003*. Nairobi: [Daarta daabacday lama xusin].

VOA Laanta Af Soomaaliga. (2014). *Warka Fiidnimo March 21, 2014*. Soo dejiyay 16/3/2018. laga helayo <https://www.voasomali.com/a/2352279.html>

صالح محمد علي (دكتور). (2010). ملحمة النواب الأحرار الصوماليين ضد الاحتلال الاثيوبي 2006-2009 . قليب، مصر: الأهرام التجارية.

صالح محمد علي. (1994). أصول اللغة الصومالية في العربية: دراسة مقارنة (الجزء الأول). القاهرة: دار النهضة العربية.

صالح محمد علي. (1996). المعجم الكشاف عن جنور اللغة الصومالية في العربية (المجلد الأول). القاهرة: مكتبة النهضة المصرية.

Copyright © AGA 2018  
Daabacaadda 1<sup>aad</sup> /*First edition*  
Muqdisho/Mogadishu  
Soomaaliya/Somalia